# DIINTAN

## هذا الدّين

باللغة الصومالية

الإتحاد الإسلامي العالمي
للمنظمات الطلابية
١٤٠٠هـ - ١٩٨٠م

دار القرآن الكريم
للعناية بطبعه ونشر علومه

Produced by
The Holy Koran Publishing House
P.O.Box 7492, Beirut, LEBANON
P.O.Box 2409, Damascus, SYRIA

Filmset by THE GRAPHIC ARTS SERVICES, Beirut

MIDOWGA ISLAAMKA CAALAMIGA

EE URURADA ARDAYDA

# DIINTAN

*Waxaa Qoray*

SAYID QUDUB

*Waxana Tarjimay*

Cabdirasaaq Caqli

I.I.F.S.O.

1400 A. H. = 1980 A. D.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَٰنِ الرَّحِيمِ

**IN THE NAME OF ALLAH**
**THE MERCIFUL THE COMPASSIONATE**

# I

# HAB BANII'AADMI

Waxaa jirta xaqiiqa bilow ah oo dabeecadda diintan ah iyo habka uu ugu hawlgelayo nolosha aadamiga. Xaqiiqadaasi bilowga ah ee fudud waa la iloobaa ama khaladbaaba laga fahmaa. Illowgee-daasi iyo tixgelin-la'anteedaasi waxaa ka dhasha khalad weyn marka diintan la gudagelayo, ha ahaato xaqiiqadeeda dhabta ah, taariikhdeeda waaqiciga ah ee waqtigan iyo Mustaqbalkeedaba.

Dadka qaarkii waxay Islaamka ka filayann, maa daama uu yahay mid Eebbe soo dejiyey, inuu nolosha banii'aadmiga ugu hawlgalo si mucjiso ah, caqligalka ka weyn, oo sababo aan la malayn karin leh. Waxay ka filayaan inay u socoto iyadoon la tixgelin dabii-caddacadda banii'aadmiga, awoodooda fidriga ah, iyo waqicigooda maadiga ah ee marxaladaha kala geddisan ee hor-u-marka banii'aadmiga bii'ad kasta noloshiisa ka mid ah.

Marka ay arkaan inaanu habkaasi ku socon, oo ay la hawlgelayaan awoodda aadamiga ah ee xaddi-dan, iyo waaqiciga maadiga ah ee nolosha banii'aad-

migu, mar-marka qaarkoodna labadaasi arrimood si cad oo sugan ay diintu usoo jiidato. Mararka qaarkoodna ay ka hortimaaddo. Ay xoojyaan shahawaadka iyo damaca aadmigu, tabardarridooda iyo nuqsaantooda, iyagoo iska-hortaagaya sidii ay u raaci lahaayeen baaqa diinta, jidkeedana ay ugu socon lahaayeen.

Marka ay taasi arkaan ayuu niyad-jab lama filaan ahi du dhacaa. Waxaana waxyeello gaadhaa kalsoonidoodii ay u hayeen diintan iyo habkeeda nolosha. Mararka qaarkoodna shaki ayaa diintaba ka gala

Sidaas awgeed, qaladaad farabadan ayaa ka dhasha qalad keliya oo aasaasi ah. Kaasi oo ah iyadoo khalad laga fahmay diintan iyo habka ay u socoto ama la illoobay oo loga tallaabsaday xaqiiqadaasi bilowga ah ee fudud.

* * *

Diintani waa hab Ilaahi ah ee nolosha banii'aadmiga. Xaqiijinteeda nolosha aadamiguna waxay ku xidhantahay dedaalka banii'aadmiga naftiisa ee aan dhaafsiinayn awoodiisa aadami iyo soohdinta waaqaca maadiga ah ee nolosha dadka bii'ad sugan. Hawshuna waxay ka bilaabantaa meesha uu aadamigu



ka helayo qalabka loo baahanyahay. Waxayna soconaysaa Ilaa dhammaadka jidka iyadoon la dhaafyn soohdinta awoodda aadamiga iyo deddalka ay ku bixiyaan awoodaasi.

Astaanta gundhigga ah ee Islaamku waa: Markeliya ma Iloobo, markasta iyo meel-kastaba, jiritaanka aadamiga iyo xuduudda awoodiisa, iyo waaqica noloshiisa maadiga ahba. Isla-mar-ahaanta, wuxuu gaadhsiinayaa. Sida marar-horeba dhacday, dhicina karta, haddii la sameeyo dedaalka, lagama maarmaanka ah, heer aanuu hab keliya oo banii'aadmigu samaystay gaadhin. Taasi oo lagu gaadhi karo si hawlyar, raaxo leh sugan oo qumman.

Khaladka oo idili xuxuu ka yimaadaa marka laga tallaabsado ama la iloobo dabeecadda diintan, ee laga filo khawaariq dhalan-rogta jiritaanka dadka ee aan oggolayn awoodiisa xadidan, tixgelina waaqaca maadiga ah ee bii'addasi.

Miyaan diintan Ilaahay soo dejin? Miyaanu Ilaahayna wax kasta awoodi karin? Hadaba maxay diintani ugu hawlgashaa oo keliya soohdinta awoodda aadamiga ee xadidan? Maxaynago'aanada hawlgalkaasi ugu egihiin tabar-yaraanta aadamiga? Maxayna had-iyo-jeer u guuleysan weeyday? Dadka wataana maxay had-iyo-jeer u heli-waayeen guusha? Maxay mararka qaarkood saafin-imadeeda iyo nadiifnima-

deeda uga kor-maraan shahawaadka iyo maadaduba? Maxay mararka qaarkoodna dadka baadilka wadaa uga guuleystaan dadka xaqa ku taagan? Arrimahaasi oo idili, sida aynu aragno, waa su'aalo iyo qalad fahan, ka soo abuurmay xaqiiqadii bilawga ahayd ee laga tallaabsaday ee ay iska-lahayd dabeecadda diintan iyo habka ay u hawlgasho.

* * *

Runahaantii, Ilaahay wuu awoodaa inuu ku bedelo abuuritaanka aadamiga jidka diintan ama jid-kaleba. Laakiin – Isagaa sarreeye – Wuxuu doortay inuu dadka u abuuro fidradaasi uu ku sugan-yahay. Taasina ay ugu wacantahay xikmad uu isagu uun ogyahay. Wuxuuna doonay inuu hanuunka ka dhigo midhaha ka soo baxa dedaalka iyo doonista hanuunintaasi.

**«Kuwa noo soo jihaada, waxaanu ku soo toosinna jidadkannaga»**

Wuxuu kaloo doonay inay firdrada aadamigu noqoto mid had-iyo-jeer hawlgasha oo aan marnaba istaagin, caddilminna.

**« Nafta iyo waxa wadaba. Wuxuu ku Ilhaamiyey xumaan iyo alle cabsi.**

**Waxaa liibaanay kii nadiifiya. Waxaana, hoogay kii qarriba »**



Wuxuuna doortay inuu ku dhammaystiro xaqiijinta habkiisa. Ilaahiga ah ee nolosha aadamiga, jidkaasi ah dedaal aadami oo ku eg xuduudda awoodda dadka.

**« Run-ahaantii, Ilaahay ma bedelo xaaladda ay dad ku sugan-yihiin Ilaa ay dadkaasi bedelaan waxa naftooda ku sugan »**

**« Haddii aanu Ilaahay sugeen in dadka qaarba-qaar wax u diidayaan waxaa kharribmi lahaa dhulka oo idil »**

Wuxuuna doortay inuu dadka ku gaadhsiiyo waxaasi oo idil, hadba siduu dedaal ula yimaaddo iyo awoodda uu bixiyo, iyo dhibta uu u samro si uu u xaqiijiyo habkaasi Ilaahiga ah ee qumman, naftiisana uga meydho xumaan oo idil, nolosha ku xeeran oo idilna u hagaajiyo.

**« Ma waxay dadku moodeen in lagu dhaafayo inay yidhaah-daan oo keliya, waanu rumaynnay. Iyagoon la imtixaanin. Waxaannu imtixaannay kuwii ka horeeyey. Runlowga ah iyo kuwa beenlowga ah.»**

Mana aha in qof khalqiga Ilaahay ka mid ahi wediiyo Ilaahay sababta uu u doortay sidaasi uu isagu doonay. Mana aha in qof khalqigiisa ka mid ahi, maa-daama aanu qofna ahayn Ilaah, aanuna lahayn cilmi iyo awood cilmi toona, weydiiyo nidaamka guud ee uunkan iyo go'aanda nidaamka ee ku dhex-jira

dabiicadda khalqi kasta oo ka mid ah jiritaanka.

Waayo? Waxaa la xidhiidha, su'aal aanu weydiin karin Muumin dhab ah, weydiina karin Mulxid dhab ahi. Muuminka dhabta ahi waxaanu u weydiin karin waayo aadaabtiisu xagga Eebbe way ku weyntahay. Eebbahaasi oo uu si fiican u garanayo naf-ahaantiisa. Sifooyinkiisa iyo astaamihiisaba. Aqoon weyn u leeyahay dabeecadda garaadkiisa aadaminmo iyo soohdimihiisaba taasoo aanay suuragal u ahayn inay ka hawlgasho aaggaasi. Mulxidka dhabta ahina wuxuunu u weydiin karin waayo mabô aqoonsana jiritaanka Ilaahay hab yaraatee. Haddii uu isagu aqoonsado Ilaah-nimadiisa wuxuu isla-mar ahaantaas garanayaa haybadiisa iyo astaamaha Ilaah-nimadiisa. Lamana weydiin karo wuxuu falo. Hadana wey weydiinayaan. Waayo isagoo keliya ayaa wax walba og. Ogna wixii uu falo.

Su'aashaasi waxaa weydiin kara oo keliya mid dheel-dheelaya oo geleb-gelab ah. Aan ahaynaa muumin dhab ah iyo mulxid dhab ah toona. Sidaas awgeed loomaba baahna in wax ka soo qaadba uu yeesho oo layskuba hawliyo. Mid jaahil ah ayuunbaa weydiin kara xaqiiqada Ilaah-nimada iyo astaamaheeda. Sida keliya ee wax lagu bari karaa kaasi jaahilka ahina waa iyadoon jawab toos ah la siinin, ee la garansiiyo xaqiiqada Ilaah-nimada iyo astaamaheeda.



Haddii uu garto oo uu rumeeyo waa qof muumin ah markaasi, Haddii uu dafiro oo uu diidana waa mulxid. Sidaas ayay dooduba ku dhantahayllaa uu muran yimaaddo. Haddii dooddu isku bedesho muranna qofka Muslimka ah loomaba oggola inuu laba sii wado.

Gabagabada ay arrintaasi ku soo dhammaanaysaa waa in aanu qof khalqiga Ilaahay ka mid ahi su'aali karin, sababta uu Ilaahay u doortay innu banii'aad-miga sidaasi u abuuro (Fidradaasi). Muxuuna u doortay inuu ku waariyo fidradiisaasi inay noqoto mid hawlgal joogta ah leh oo aan marnaba kala-go'ayn, Muxuuna u doortay inuu ka dhigo habka Ilaahiga ah ee noloshiisa aadminimo inay ku suura-gasho jidkaasi ah dedaal banii'aadmi oo ku eg xuduuda awoodda aadamiga, iyo waaqaca maadiga ah ee noloshiisa. Kamuuna yeelin inuu ahaado mid ku suurogala hab caqligalka ka weyn oo leh sabab qarsoon oo aan la ogaan karin.

Laakiin, waxaa lagama maarmaan ah in qof kasta oo khalqigiise ka mid ahi ogaado xaqiiqadaasi oo uu garto, Indhihiisana ku arko iyadoo si dhab ah uga hirgalayso waaqaca nolosha banii'aadmiga. Waana inuu xaqaaiqa taariikhda banii'aadmiga ku muujiyaa Iftiinkaasi, isagoo dhinac ka og jidka socodkeeda taariikhiga ah, dhinaca kalena ka og sidii

uu u wajihi lahaa, ugulana noolaan lahaa xikmadda Ilaahay iyo qadarkiisa, meesha saxa ahna iskaga taagi lahaa.

Habkaasi Ilaahiga ah ee uu matelayo Islaamku suuraddiisa kamadambaysta ah siduu innoo keenay Nebi Mexamed – N.N.E.K.H.A ugana suurogelayo dhulkani, iyo adduunkanba si uu kor ka imanayo uun.

kumana suuragelayo erayga Ilaahiga ah ee ah « NOQO » uun oo loo caddeeyo kumana suuragelayo maquunis Ilaahi ah oo la mid ah sida uu u wado uunka ku wareegaya falaga iyo socodka kowkabyada, ee wuxuu ku suuragelayaa isagoo uu qaado urur dadka ka mid ah, oo Imaan buuxa ku rumaysan una oogaya sidiisa dhabta ah inta karaankooda ah. kuna dedaalaya inay ku sugaan quluubta dadka kale iyo noloshoodaba. Kuna jihaadaya himiladaasi wixii karaankooda ah oo idil. Waxay la jihaadayaan tabar-daridda aadamiga iyo hawada naftooda. Waxayna la jihaadayaan dadka ay tabar-darida iyo hwada iska-hortaagtay inay helaan hanuunintaasi. Waxayna gaadhayaan – intaas oo dhan ka dib marka uu habkaasi xaqiiqoobo, heer ay fidrada aadamiga ku suuragasho una diyaarsan waaqaca maadiga ah. Waxayna dadka kala bilaabaan meesha ay ku sugan-yihiin mana is-madax-mariyaan xaaladooda dhabta ah iyo waxay rabaan, iyagoo ku socoda oo maraya



marxaladaha habkaasi Ilaahiga ah. Ururkaasi wuxuu ka adkaan naftooda iyo nafta dadka kaleba mararka qaarkood. Mararka qaarkoodna, waxaa jebin naftooda iyo kuwa dadka kale. Si hadba leeg dedaalka ay bixiyaan iyo wasiiladda ay u doortaan diritaasi ee ku hab-boon munaa-sabadda xilligaasi iyo baahida waqtigaasi. Waxaana intaasi oo idil ka sii muhimsan sida ay xil isaga saaraan xaqiijinta habkaasi iyo hirgelintiisa dhab ahaaneed marka la eego waaqacooda iyo asluubtooda gaar-ahaaneed.

Waa taasi dabiicadda diintan iyo jidkeeduba, wana taasi qorshaheeda, hawlgalka, dhaq-dhaqaaqeeda iyo habkeeduba. Waana taasi runta uu Ilaahay rabo inuu baro bulshada Muslinka ah marka uu yidhi:

**«Run ahaantii, Ilaahay ma bedelo xaaladda ay dad ku sugan-yihiin Ilaa ay dadkaasi bedelaan waxa naftooda ku sugan».**

**« Haddii aanu Ilaahay sugeen in dadka qaarba qaar wax u diidaan waxaa kharribmi lahaa dhulka oo idil ».**

**« Kuwa noo soo jihaada, waxaanu ku soo hadayn jidadkanaga ».**

Waa taasi xaqiiqada uu Ilaahay doonay inuu baro bulshadii Muslimiinta « **Dirirtii Uxud** » markii ay suurogal noqon- weyday inay matasho xaqiiqada dhabta ah ee diintani naf-ahaanteeda xilliyo ka mid

ah dirirta. Waxay ka tallaabsatay oo ay Illowday xaqiiqada bilowga ah. Waxayna u maleeyeen in guushoodu qasab tahay maa-daama ay Muslin yihiin. Ilaahayna wuxuu ku yidhi:

**« Markii ay idinku timid dhibaato la mid ah, mid aad hore u aragteen-waxaa tidhaadeen, « Maxay sidani u dhacday? ku dheh, » Xaggiinna ayey ka timid ».**

Wuxuuna ku yidhi Ilaahay:

**« Wuu rumeeyey ballankiisii ahaa in oggolaanshi hiisa aad ku tijaabisaan. Laakiin waa fashi-sheen, arrinkiina waa isku dirirteen. Waana caasideen ka dib markii uu idin tusay waxaa jeceshihiin. Waxa idinka mid ah, mid aakhiro doonaya. Wuuna idinka jeediyey si uu idin imtixaano ».**

Bulshadii Muslinka ahayd waxay xaqiiqadaasi baratay « **diritii uxud** » kumay baran hadal iyo canaan toona, ee waxay ku baratay dhiig iyo dhibaato xanuun leh.

Waxayna bixsay wax qaali ahi jebitaan ka dambeeyey guul, khasaare ka dambeeyo dhereg iyo dhaawac aan cidna dhaafin, iyo shuhado sharaf leh oo uu ka mid yahay Shuhadada **« xamse »** – Illahay raalli ha ka noqdee. Waxaana intaasi oo idil ka sii darna oo bulshada Islaamka kaga sii xumaa; Waxaa lagu dhawacay Rasuulkii Ilaahay – N.N.E.K.H.A



– Waxaa la dakhray wajigiisii Sharafta lahaa. Waxaana lagu jebiyey dhooshiisii Ilkaha. Wuxuuna ku garab dhacay godkii uu qoday Abuu Camar kii faasiqa ahaa ee reer Quraysh la jiray soo gaadhay. Isagoo keligii ay la joogaan inyar oo asxaabtii ka mid ah oo marba mid la dilayo intii ay daafacayeen. Mid ka mid ahina – Abuu Dajaana – uu dhabarkiisa ugaga dhigayo fallaadhaha ay Mushrikiintii ku soo gamaysay. Waxaana kolba dharkiisa ku dhacayey fallaadh laakiin kamuu dul dhaqaaqin ilaa ay Muslimiintii soo rogaal celisay iyagoo helay dersigaasi kulul ee qadhaadh. Waxaa hadaba inoo cad in suurogelinta habkaasi Ilaahiga ahi lagu gaadhayo dadaalka banii'a-admiga. Xaqiiqana ay tahay inuu ku suuragelayo xuduudda karaanka aadamiga taaso toosinaysa nafta dadka hagaa-jinaysana nolosha banii'aadmiga. Waxaynanu sidaas u leenahay ma aha inaynu sabab u yeelaynno doonista Ilaahay si arrinka aynu uga dhigno sidii uu ka dhigay, laakiin waa inaynu tusno eegmo dhab ah wax-yaalaha ka soo baxa hawshaasi doonistiisa ah ee nolosha addoomadiisa.

Xaqiiqada Iimanku kuma dhammaystirmayo qalbiga Ilaa dadka loo soo bandhigo helgan arrinka iimaankaasi ah. Qalbiga oo ay ka halgamaan oo ay ka nacaan baadilkooda iyo jaahiliyaddooda, goostaanna inay u raraan dhinaca xaqa iyo Islaamka.

Carrabkana ay ka halgamaan iyagoo gaadhsiinaya una caddaynaya dadka. Diidaanna baadilka aan meelna haysan. Cadeeyaanna xaqa uu inookeenay Islaamku, ka halgamaan gacanta si ay uga riixan hor-joogsiyada jidka hanuuka marka laga horkeeno xoog naxarii-daro iyo caga-juglayn qayaxan.

Halgankaasi waxaa lagula kulmi dhibaato iyo xanuun, waxaana loo baahanyahay dulqaad iyo sabir loo yeesho dhibaatada iyo xanuunkaba. Loona sabro guul-darrada iyo guushaba, waayo sabirka guusha ayaa ka adag sabirka guul-darrada. Markaasi ayaa la sugnaanayaa, lana noqonaynin beerka jecli, xaydha jecli. Waana la toosayaa, lana leex-leexanaynin, waxaana loo qabsanaya jidka iimaanka si cad oo qumman.

Xaqiiqada iimaan-kuna dhammays-tirmayso qalbiga Ilaa uu usoo banbaxo inuu dadka kula halgamo arrinka iimaanka. Waayo wuxuu la halgamayaa maftiisa marka uu dadka kale la halgamayo, waxaana iimaankiisa uga furmaya albaabbo aann u furmeen weligiina haddii uu iska-fadhiyi lahaa isagoo xasiloon. Waxaana uga caddaanaya dadka iyo noloshaba xaqaa'iq aan weligiina u caddaadeen haddii aanu jidkaasi marin, waxayna gaadhayaan naftiisu, dareenkiisu, aragtidiisu, caadooyinkiisu, dabcigiisu iyo facaa'ilkiisuba heer aanay gaadheen weligood haddii



aanu soo marin tijaabadaasi qadhaadh ee kulul. Taasina waxay ka mid tahay waxyaalaha uu Ilaahay innagu tilmaamay hadalkiisa:

**« Haddii aanu Ilaahay sugeen in dadka qaarba qaar wax u diidaan waxaa kharribmi lahaa dhulka oo idil ».**

Wax kharribmana waxaa ugu horeeya kharribaadda nafta oo la imanaysa istaag ay ruuxa joojinayso, himmadana la-ciifinayso ilaa ay ka dhigto wax mayd ah, sidaasi ayey ka dibna nolosha oo idili u noqonaysaa mid mayd oo kale ah, oo ku dhaq-dhaaqaysa oo keliya jawiga shah-a-waadka oo keliya. Sida ku dhacda ummadaha ku ibtilooba nimcada.

Taasina waxay ka mid tahay fidrada uu Ilaahay u abuuray dadka, wuxuuna ka yeelay qummanaanta fidrada mid la socota halganka loo halgamayo hirgelinta habka Ilaahay ee nolosha banii'aadmiga. Taasi oo lagu gaadhayo dadaalka aadamiga ee ku eg xuduudda awoodda iyo karaanka aadamiga.

Halgankaasi iyo imtixaankaasi la socdaa waa sida lagu kala soocayo dadka isku dhex-jira-kadib markii nafaha la sifeeyey – waxaana laga dhex-saarayaa dadka liita iyo kuwa iska-yeel-yeelka ah, kuwa nafta iyo qalbiga jilicsan leh, kuwa ah kha'imiinta, munafiqiinta iyo kuwa dadka istusaya. Waana tani xaqiiqadii uu Ilaahay doonay inuu baro bulshadii Muslinka

ahayd iyadoo loo soo bandhigayo imtixaan, loona soo bandhigayo dhibaato, lana qeexayo waxyaalaha nafta ku dahsoon. Sidoo kalina la kala soocayo dadkii isku dhex-jiray iyadoo la marinayo dhibaato, tijaabooyin culus iyo xanuun qadhaadh.

Waana tani xaqiiqadii uu Ilaahay doonay inuu baro bulshada Muslinka kadib dirirtii uxud, markii uu yidhi isagoo ka jawaabaya su'aashii Muslimiinta:

**« Waa maxay sidani » « Ku dheh » Xaggiinna ayay ka timid ».**

**Wuxuuna isagoo sii wada yidhi » waxa idin gaadhay maalintii ay labada col kulmeen waa wax ku yimid oggolaanshaha eebbe. Si uu u ogaado kuwa muuminiinta ah iyo kuwa munafiqiint ah ».**

**« Ilaahay umuu gelin muuminiita xaaladdassi aad ku jirtaan sabab kale ee waxay ahayd uun inuu ka dhex-saaro ka xun kuwa fiican ».**

**« Iyo inuu Ilaahay ogaado kuwa rumeeyey, idinkalana dhex baxo shuhado. Ilaahayna ma jecla daalimiinta, ee inuu imtixaano kuwa rumeeyey dabar-gooyana gaalada ».**

Intaasi oo idili wuxuu ka daadegeya dareenkooda iyadoo Isla-mar-ahaantaa dhibaatada gaadhay oo dhan ay ugu wacnayd si xaqiiqada iimaanku uga daadegto dareenkooda iyo falalkooda marka dagaalka. Ugu dambayntii, waxay u ahayd deris iyo daahiraad iyo dadkoo la kala soocayey. Intaasi oo idilna waxay khayr u ahayd naftoodii iyo noloshoodii dambe.



Iyadoo la tix-gelinayo dabeecadda dhabta ah ee diintan iyo jidkeeda ay ku hawlgelayso, waxaa lagama maarmaan ah in caddaynada aynu soo sheegnay ku kor-dhinno tusaalooyin dhammays-tir ah. Hirgelinta habkaasi Ilaahiga, waxaa loo daayey xaqii-jintiisa dedaalka aadamiga, oo ku eg xuduudda karaanka banii'aadmiga iyo xuduudda waaqaca maadiga ah ee nolosha aadamiga xilliyada kala geddisan ee hor-umarka iyo bii'adaha duwan, loogamana jeedo taasi, ka maaran, kama dambays ah oo dadku ka maar-mayo arrintaasi, iyo go'intaan qadarka Ilaahay iyo qor-shihiisa, gacan-fidintiisa iyo caawinaadiisa, waafajintiisa iyo sah-liddiisa. Haddii arrinka sidaasi lo eegana wuxuu khilaaf-san-yahay gun-dhig-yada dabeecadda aragtida Islaamka.

Waxaynu hore u soo caddaynay inuu Ilaahay gargaarayo qofkii u soo jihaada hanuunka.:

**« Kiinoo soo jihaada waxaanu ku soo toosinna jidadkanaga ».**

Iyo inuu xaaladda dadka bed bedelo, marka ay bedelaan waxa naftooda ku sugan.

**« Ilaahay ma bedelo xaaladda dad ku sugan-yihiin, ilaa ay ay iyagu bedelaan waxa naftooda ku sugan ».**

Labadaasi odhaahood waxay inoo caddaynayaan

cilaaqaadka ka dhexeeya dadaalka aadamiga ee dadku la imanayo iyo gar-gaarka Ilaahay u soo fidinayo aadamiga, taaso ay ku gaadhayaan jihaadkoodaasi khayr iyo hanuun, wanaag iyo liibaan.

Kama dambaysta meel-marka ahi, waa iraadada Ilaahay uun, taasoo aanu la'aanteed aanu qofka banii'aadmiga ahi waxba gaadhi karin, laakiin iraadadaasi waxay gar-gaaraysaa ka garanaya jidkeed, hawlgalka, kaashanaya gar-gaarkeeda, u jihaadayna Ilaahay dartii si uu u gaadho raalli ahaanshihiisa.

Tiiyoo waxaasi oo idili jiraan, hadana qadarka Ilaahay ayaa ku xeeran dadka iyo hawlahaba, isaga uun baana dhammays-tiraya gaba-gabada wixii khayr iyo dhibaataba lala kulumo. Waana taasi xaqiiqada uu Ilaahay doonay inuu baro bulshada Islaamaka ah, isagoo tusaale-ahaan ugu caddaynaya **«dirirtii uxud»** sababaha guusha iyo guul-darradaba isagoo Isla-marahaantaa diirka ka qaadaya xikmadda Ilaahay ee ka dambaysa imtixaanka guusha iyo guul-darrdadba

**« Ilaahay wuxuu oofiyey ballankiisii ahaa inuu oggoaan-shi-hiisa aad ku imtixaantid Ilaa aad fashisheen oo aad isku dagaasheen. Markaasna aad caasideen ka dib markii uu idin tusay wixii aad jeceshi-hiin. Waxaa idinka mid ah, mid adduunya uun doonaya, waxaana idinka mid ah, mid aakhiro uun u jeeda. Markaas ayuu idinka jeediyey si uu idin imtixaano ».**



Waxaa kale ee uu Ilaahay uga jeeday inuu tuso sunnada dhan ee Ilaahay iyo qadarkiisa kama-dambaysta ah iyo awoodiisa buuxda ee ka dambaysa wixii dhacaya oo idil.

**« Haddii dhibaato idin soo gaadho, dadka kaleba dhibaato taasoo kale ah ayaa soo gaadhay, maalinbana reer baanu u soo wareejinna si uu Ilaahay u gaadho, kuwa Ilaahay rumeeyey, idiin-kalana soo dhexbaxo shuhado Ilaahayna ma jecla kuwa daalimiinta ah, si uu Ilaahay u sifeeyo kuwa rumeeyey, una dabar-gooyo kuwa gaalada ah.»**

Sidaas awgeed, gabagabada kama-dambaysta ahi waxay ku dhammaanaysaa qorshaha Ilaahay, doonistiisa iyo qadarkiisa, si ay ugu dhammaato wixii uu rabo uun, ka dib sababaha iyo walaxaha. Waana arrinta aanu qofna su'aalikarin Ilaahay.

Waayo waa haybaddiisa Ilaahiga ah ee aanu qofna su'aali karin. Waana taasi xaqiiqada Iimaanka sugani, ee aan nafta ka daadagaya Ilaa uu ku xasilo, oo uu hoy ka samaysto. Waana taasitusaalaha dhammaystirka ah ee lagamamaarmaanka inaynu ku kordhino dersigan. Qofka Muslinka ah ee ay qalbigiisa ka daadegto dabeecadda diintani ma la kulmayo wax iska hor-i-maad ah. wax iska hor-immaad ah oo ku jira kitaabka Ilaahayna ma jiro.

* * *

## II

# HAB GAAR AH

Waxaa laga yaabaa inuu immika qof yidhaahdo, haddii uu Islaamku yahay hab Ilaahi ahi ee nolosha banii'aadmiga oo aan dhulka ka hirgelayn iyo adduunyadaba iyadoo lala yimaaddo dedaal aadami mooyaane, kaasoo ku eg xuduudda karaanda iyo awoodda aadamiga iyo xudiidda waaqaca maadiga ah ee nolosha banii'aadmiga ee bii'adaha kala geddisan, hadaba maxaa ka duwaya oo uu kaga geddisanaanayaa hababka banii'aadmigu sameeyeen ee naftooda u dhigteen kuna gaadhayaan awoodda ay kolba ku bixiyaan ee ku eg xuduudda karaankooda iyo waaqacooda?

Maxaanay waajib innogu tahay inaynu isku dayno hirgelinta habkaasi, haddii uu u baahanyahay dedaal banii'aadmi sida hababka kale oo idil? Oo aanu marnaba ku higelayn mucjiso lala yaabo, ama maqunis Ilaahi ah? Ee uu ku hirgelayo uun nolosha banii'aadmiga dhexdeeda oo ku eg xuduudda fidrada aadamiga, karaankooda caadiga ah iyo arrimahooda waaqiciga ah? Marka ugu horeeya waxaa qasab inaagu ah inaynu isku dayno xaqiijinta habkaasi



inaakoo ka bilaabaynaa inaynu marka hore nafteenna ku hirgelinno sifada Islaamka:– Tiirka ugu horeeya ee Islaamkuna waa:– inaynu qirno in Ilaahay mooyee aan Ilaah kale jirin. Maxammedna uu yahay Rasuulkii Ilaahay. Qiridda « Ilaahay mooyee Ilaah kale ma jiro » micnaheeda saxa ahi waa:– in Ilaahay oo keliya loo daayo Ilaahnimada. Wax khalqigiisa ahna aan lala wadaajin wax haba yaraadee sifooyinkiisa ka mid ah sifada ugu horeysa ee Ilaahnimadina waa xukunka guud ee ay ka soo unkanto xaqa uu u leeyahay inuu dadka loo de jyo sharci, iyo xaqa uu u leeyahay inuu dadka u dhigo habka noloshooda, iyo xaqa uu u leeyahay inuu dadka u dejiyo qiimayn ay ku qotonsato noloshani. Qiridda « **Laa Ilaaha illa Allah** » ma suurasuuragelayso mana hirgelayso ilaa la aqoonsado inuu Ilaahay oo keliyi u leeyahay xaq inuu dejiyo habka ay nolosha banii'aadmigu ku socoto. Hab kalena aanu meesha. Soo gell-karin qof allaale qofkii isku daya inuu u dejiyo hab kale nolosha dad banii'aadmiga ka mid ah, wuxuu u sheegtay illaahnimo. Waayo wuxuu shegtay sifadii Ilaahnimada ugu weynayd. Qof allaale qofkii u qira habkiisaasina wuxuu ka dhigtay Ilaah yar oo aan Ilaahiisa weyn ahayn. Micnaha saxa ah ee « Maxammedna waa Rasuulkii Ilaahay » waa in la rumeeyo in habkaasi uu inaga soo gaadhsiiyey Ilaahay, inuu yahay runahaantii habkii Ilaahay ee nolosha

banii'aadmiga. Habkaasi oo keliyina yahay habka inagu qasabka ah inaynu ku hirgelinno nolosheenna iyo nolosha banii'aadmiga oo idil. Waxa haddaba inagu qasab ah inaynu isku dayno hirgelinta habkaasi, si ay nafteenaa ugu xaqiiqowdo sifada Islaamka ay aynu sheeganaynno. Mana hirgelayso ilaa aynu qiro shahaadada « **Laa Ilaaha illa Allaah** » **Maxammadan Rasuul Allaah** ». Ilaahay mooyee Ilaah ma jiro, « **Maxammedna waa Rasuulkii Ilaahay** » Shahaadadaasina ma sugna ilaa Ilaahay oo keliya loo daayo Ilaahnimada. Loona daayo in isagoo keliyi xaq u leeyahay inuu dejiyo hab nololeed. Laykuna dayo in la hirgelyo habkaasi uu Nebi Maxammed – N.N.E.-K.H.A – inooga keenay Ilaahay.

* * *

Waxaana inagu qasbaya isku-dayidda hirgelinta mabda'aasi sababo la xidhiidha Habka naftiisa. Waayo isagoo keliya ayaa caddaynaya sharafta banii'aadmiga, siinayana gobanimada dhabtaah. Kana xoraynaya addoonsiga. Isagoo keliya ayaa u xaqiiqinaya gobanimo buuxda oo taasi ah, oo ku eg xuduudda aadaminimadiisa iyo addoonimadiisa Ilaahay. Wuxuu ka koraynayaa addoonsiga dadka, si uu Ilaahay oo keliya addoon ugu noqdo. Adduunyada oo idilina ma jiro hab kale oo aan Islaamka ahayn oo arrintaasi



keenaya. Waayo, Islaamku, isagoo u qiraya Ilaaha weyn oo keliya Ilaahnimo una oggol inuu keligii xaq uu u leeyahay inuu u dejiyo sharci nolosha banii'aadmiga, ayuu dadka u yeelayaa Ilaah keliya iyo sayid keliya. Una diidayaa inay qaarba qaar u noqodaan Ilaahyo yar-yar, qaarba qaar xukun u dejiyaan, qaarba qaar ka dhigtaan sayid iyadoo la addoonsanayo dadka Ilaahyadaasi yar-yar siinaya ee u qiraya sifooyinka Ilaahnimada. Sifaalahaasina waa mid u gaar ah habkaasi Ilaahiga ah. Uguma gaar aha hadal ahaan iyo dood ahaan oo keliya. Laakiin wuxuu gaar ugu yahay run ahaan iyo dhab ahaanba. Dacwadii Rususha oo idilina waxay ahayd in Ilaahay oo kiliya loo daayo Ilaahnimada. Loonadiido sifooyinka Ilaahay wixii kale ee aan Ilaahay ahayn, ee khalqigiisa ah ee sheeganaya kuna andacoonaya inay xaq u leeyihiin inay u dejiyaan habab nolosha addoomada Ilaahay. Taasi oo ay ku tageerayaan kuwa aan rumaysnayn midnimada Ilaahay!

Ilaahayna wuxuu ka yidhi yuhuudda iyo Nasaarada:

**« Waxay ka dhigteen baadariyadoodii iyo musheekhdoodii rabbiyaal aan Ilaahay ahayn – Iyo nebi ciise ina Maryama. Waxa keliya ee la farayna Waxay ahayd in ay Ilaahay oo keliya caabudaan. Isaga maahee Ilaah kale ma jiro. Waanu ka nasaha-**

**nyahay waxay ugu shariig yeelayaan. »**

Runahaantii kuwaasi may caabudayn baadariyada iyo Musheekhdaasi, ee waxay u oggolaayeen oo keliya xuquuqda u dejinta sharciyada aan ka Ilaahay ahayn. Iyo iyagoo u oggolaa inay u dejiyaan hababka nolosha ee ku sabsan qawaaninta. Wuxuuna Ilaahay ka yidhi!

**« Waxay ka dhigteen baadariyadoodi iyo musheekhdoodii rabbiyaal. Waxayna khilaafeen amarkii Ilaahay ee ah in loo daayo midnimo. Sidaasina waxay ku noqdeen mushrikiin. »**

Waxay silsiladda Imaam Axmed, iyo tirmidi iyo Ibnu Jariir ka soo weriyeen Cudday Ibny Xaatim – Ilaahay raalli ha ka noqdee – markii uu soo gaadhay baaqii Rasuulk Ilaahay – *N.N.E.K.H.A.* – ayuu u fakaday shaam, Mudadii Jaahiliyaddiina wuu kiristaanoobay. Waxaa la soo xidhay walaashi iyo dadkale oo reerkiisa aha. Laakiin Rasuulkii Ilaahay wuxuu soo daayey Walaashi. Waxay ku noqotay Walaalkeed waxayna jeclaysiisay Islaamka, waxayna ku dhiirii gelisay inuu hortago Rasuulka. Cudday wuxuu yimid Madiina. Wuxuuna madax u ahaa reer Dayi. Aabihii Xaatim Al Daayi, wuxuu caan ku ahaa gobanimada. Sidaasi awgeed ayey reer Madiina ugu ahaayeen diyaar Imaatinkiisa. Markii uu u soo galay Nebigii *N.N.E.K.H.A* – Isagoo saliib dahab ah ku wata qoortiisa, Wuxuuna Rasuulku *N.N.E.K.H.A* – Aakhriyayey aayadda aha.



**« Waxay ka dhigteen baadariyadoodii iyo musheekhdoodii rabbiyaal aan Ilaahay ahayn ».**

Cuddaybaa yidhi:

**« Ma caabudaan » Rasuulkii** – *N.N.E.K.H.A* – **Wuxuu ku jawaabay. Runahaantii way caabudaan, waxay u dideen xalaashii, waxayna u xalaaleeyeen xaraantii, markaasi ayay sidaasi ku raaceen. Waana taasi caabudaaddda ay caabudayaan ».**

Saddi wuxuu yidhi, « **Raggii** » ayey weydiisteen inay waaniyaan kitaabkii Ilaahayna dhabarkooda dabadiisa ayey ka tuureen. Wuxuuna Ilaahay yidhi:

**« Waxaa keliya ee la faray inay Ilaah keliya caabudaan ».**

Kaasi oo ah haddii uu wax inoo diido, ay xaraan tahay. Wixii uu inoo oggolaadaana ay xalaal tahay, wixii uu inoo sharciyeeyo la raaco, wixii uu inna amrana la fuliyo.

Islaamkuna waa ka keliya ee oggol in cibaadada lagu koobo Ilaahay oo keliya. Una keliyaynaya inuu isaga oo keliyi xaq u leeyahay inuu u dejiyo hab nolosha banii'aadmiga, isagoo keliya ayaa dadka ka xoraynaya addoonsiga wixii aan Ilaahay ahaynba. Sidaas awgeed waxaa inagu waajib ah inaan isku dayno inaan hirgelino habkaasi oo keliyi, wixii kalena dibbedda loo

tuuro. Waxaana innagu waajib ah inaan isku dayno inaan hirgelinno habkaasi, waayo – isagoo ah mid Ilaahay soo dejiyey – waa ka keliya ee ka madhan shahwaadka banii'aadmiga, jilicsanaanta aadamiga iyo damaca dadkuba iyo dano gaar ahaaneed oo lagu helo iyadoo loo dejisto qawaaniin. Qawaaniintaasi oo u dan ah qofka sharcigaasi dejiyey, reekiisa, dabaqaddiisa, shacbigiisa, iyo jinsiyaddisaba. Waayo habkaasi waxaa dejiyey Ilaahay. Isagoo ah, rabbigii dadka oo idil. Uma dejin sharcigaasi danihiisa gaarahaaneed, ama inuu jeclaysto dabaqad banii'aadmiga ka mid ah ama jeclaysto shacbi ka mid shucuubta adduuunka, ama inuu jinsiyad ka doorbido jinsiyadaha kale. Sharciyanta aadamiga ee uu dejinayo qofka xukunka haystaa, ama reer xukunka haystaa, ama dabaqad xukunka haystaa, ama ummadda xukunka haystaa, ama jinsiyad xukunka haystaa, waa mustaxiil inay marnaba ka madhnaato hawo iyadoo la tixgelinayo sida uu dadku u abuuran-yahay-ama ay ka maqnaato wax u dan ah oo maslaxadi ugu jirto kuwa sharcigaas dejiyey. Laakiin marka uu habka Ilaahay yahay ka xukumaya nolosha aadamiga, waxaa la waayayaa sifadaasi. Waxaana caddaanaya caddaaladdi runta ahayd, dhammays-tirnayd ee loo sinnaa. Taasoo aanu marnaba hab kale oo hababka banii'aadmiga ka mid ahi lahayn, suurogalna u ahayn



inuu sidaasi oo kale u hirgeliyo. Waayo hababkaasi oo idil ma laha wax ka fogeeya hawda aadamiga jilicanaanta dadka, iyo ka fogaanshaha danaha gaar ahaaneed weji kasta ha yeeshaan eh. Marka uu qof maqlo soo jeedintaasi rabbaaniga ah ee dheer ee lagu baaqayohirgelinta caddaaladdaasi buuxda ee dhammaystiran ee aanay marnaba soo dhex galayn hawo, marnaba ayna soo dhex gelayn casabiyad iyo reer soo dhawayn ee ay ka mid tahay hadalkii uu Ilaahay u soo jeediyey bulshadii Muslinka ahayd:

**« Kuwa Ilaahay rumeeyayow, waxaad noqotaan qaar qumman Ilaahay hortiisa markhaatiina u ah dad u dhaxaynta ».**

Caddaaladda idin seejin caddaa lad sameeya iyadaa u dhaw Alle ka cabsiga eh. Ilaahayna ka cabsada. Ilaahay waa ku khabiir og waxaad samaynaysaan ». Waxaa laga yaabaa markaasi inay qof ku soo dhacdo oo uu isyidhaahdo:

« Waa maxay dammaanadda ka dhigaysa bulshada Islaamka ah inay hirgliso caddaladdaasi uu Ilaahay innoogu baaqayo ee uu inna farayo?

Dammaamadda dhabta ah ee habkaasi Islaamka ahi waxay ku dhantahay dammiirka qofka Muslinka ah. Waxayna ka soo unkantaa iimaankiisa.

Marka iimaanka laga dhex helo diintani. Waxaa laga dhex helayaa dammaanadda ugu xooggan.

Muslimiintuna waxay ka baranayaan diintooda in aasaaska, jiritaankooda, guushooda iyo gacan ku dhulkaba, dhammantood laga helayo sida loo oofiyo tusaalooyinkaasi. Haddii kale jiritaankooda waa baaba. Guushooduna waxay ku dambayn guuldarro. Waxaana la waayi sharaftooda oo way dulloobi. Waxayna maqlayaan Ilaahay oo ku leh:

**« Ilaahay guusha wuu siin kii u gar-gaara ».**

Illaahayna isagoo leh awood oo Casiis ah. Ilaahay guusha ayuu siin kuwa haddii aanu talada dhulka u dhiibno oogaya salaadda, sakadana bixinaya, wanaagana isfaraya, xumaantana diidaya. Caaqibada kuma dambaysta ahna Ilaahay uunbaa iska leh ». Waxayna ogsoonyihiin in aanu Ilaahay jeclaandoonin haddii ay jidka ka leexdaan. Bulshada Islaamka ah naf-ahaantooda ayaa ah dammaanad dhab ah ee hirgelinta tusaalooyinkaasi. Waayo waxay ku taagantahay caqiidadani. Waxayna naf-ahaanteedo qaadaysana wixii uu Ilaahay ku waajibiyey. Waxayna ula muuqataa digniin xumaani ka soo gaadhaysa wax yar oo xilka laga jeedsadaa. Tiiyo dhibaatadaasi ayna gaadhayn oo qudha dulmiga gaystay. Hadaba waxaa innagu waajib ah in aan hirgelinno habkaasi, in aan hirgelinno caddaaladdaasi buuxda ee dhammaystiran ee aan ku hirgelayn iyadoo la raaco habkaasi gaarka ah mooyaane.

* * *



Waxana innagu waajib ah in aan isku dayno hirgelinta habkaasi . Waayo waa habka keliya ee madax-banaan go'aanada jahliga banii'aadmiga iyo gaabinta dadka, kana fog jilicsanaanta aadamiga. Waayo waxaa dejiyey kii abuuray banii'aadmigan ee og wixii hagaajinaya iyo wixii u dan ahba. Isagaana og waxyaalaha ku qarsoon koobnaantiisa iyo dhismihiisaba. Iyo waxyaalaha ku qasoon xaaladaha adduunyadan ee noloshiis aadaminimo ku weheliya. Haddii uu u dejiyo habna waxaa habkaasi loo eega-yaa arrimahaasi oo idil. Kuwaasoo aan suurogal u ahayn banii'aadmiga ha ahadeen keli ama urur-ahaane xilli kasta oo waqtiyaada ka mid ah, iyo facyada oo idilba inay si dhammaystiran u fahmaan. Arrimahaasi qaar ka mid ahi waxay u baahanayihiin waaya-aragnimo la soo ururiyey oo ku saabsan ti-jaabooyinkii ay soo martay nolosha banii'aadmigu xilliyadii hore oo dhan, waqtigan, aynu ku jirno iyo mustaqbalka aan weli la gaadhin. Taasi waa mustaxiil. Qaarkoodna waxay u baahanyihiin ogaanta dhammaan waxyaala-ha ku qarsoon uunka ku xeeran banii'aadmiga. Taasina waa Mustaxiil sidoo kale. Waxaa intaas sii dheer, garaadka aadamiga suuragal uma aha inuu ka helo garasho sax ah oo dhammaystirn xataa oo keliy waayo-aragnimada iyo ti-jaabooyinkaas. Waayo waxaa ugu awood la'aantaasi dabeecaddiisa kala

dhiman, — ee aan dhammaystirnayn — waxaana jidanaya hawo iyo jilicsanaan. Sidaas awgeed kuma habboona inuu u dejiyo hab nolosha banii'aadmiga. Wuxuuna Ilaahay leeyahay:

**« Haddii uu xaqu raaci lahaa hawooyinkooda waxaa fasahaadi lahaa samooyinka iyo arlada »**

Wuxuu kaloo leeyahay:

**« Waxaanu ku samaynay sharci la raaco, ee raac hana raacin hawada kuwa aan waxba garanayn ».**

Dadka oo idili ma garanayaan. Cilmigaasi dhammaystiran, ee looga baahanyahay in lagu dejiyo nolosha aadamiga. Waxa keliya ee ay wataan waa hawo iyo jahli marka ay sanka la soo galaan wax aan waxba uga shan-iyo-toban, oo ayna iyagu lahayn Astaamaha Ilaahiga ah ee ay ku andacoonayaanna waa dembi weyn iyo shar ballaadhan.

Waxaa innagu waajib ah in aanisku dayno hirgelinta habkaasi waayo waa habka keliya ee ku oogaya nidaamka nolosha aadamiga iyadoo salka ku haysa caddayn buuxda ee jiritaanka, iyo kaalinta uu banii'aadmiga kaga jiro-jiritaankaas, iyo himiladiisa aadaminimo. Taasi oo ah sida xaqiiqada ah ee dhabta aan ahaynna sida uu inoo sawirayaan jahliga tabaryarida iy hawada aadamiguba aragti kale oo aan ta Rabbaaniga ahayn. Waana kani gundhigga keliya ee caafimaadka qaba, xoggana



ee ku oogaya nidaamka nolosha aadamiga iyadoo haysata xididdada dabeecadda. Hab kasta ee nolosha banii'aadmiga ee aan ku qotomin gundhiggaasi cad ee dhammaystiran ma haysto xididdada dabiicadda. Waana hab been-been ah suurogalna uma aha inuu sii waaro, waana halka ay ka soo unkamayso hoogga banii'aadmiga ilaa iyo inta oogan-yahayba. Ilaa ay bur-burinayso fidradoodu oo ay ku noqdaan asalkii xooganaa ee caafimaadka qabay. Caddayntaasi jirtaan ee ku jirta habkaasi Ilaahiga ahi, waa ta keliya ee saxa ah, waayo waxaa sameeyey kii jirtaankaba abuuray, dadkana abuuray ee og xaqiiqada jiritaanka iyo ta dadkaba. Caddayn kasta oo lagu sifeeyo jiritaankan iyo kaalinta uu dadku kaga aadan-yahayba iyo himilada jiritaanka aadaminimo, ee uu sameeyey dadka naftiisu, waa caddayn kala dhiman. Waayo jiritaanka ayaa ka weyn dadka, suurogalna ma aha inuu dadku u sameeyo caddayn buuxda. Xaddidaadda, himilada, jiritaanka aadaminimo waxay u baahantahay cilmiga kii dadka abuuray iyo wuxuu uga dan lahaa abuuritaankiisa, sidoo kalena waxay u baahantahay in ay ka madhnaato hawada, si loo xaddido himiladaasi. Taasoo aan weligeed ka suuragelayn banii'aadmiga. Haddii dib loogu fiirsado dadaalka falsafadda ee isku dayday, micnaynta jiritaanka iyo caddaynta kaalinta uu aadamigu kaga jiro, iyo mic-

naynta, qaayaha jiritaanka aadaminimo. Waxa lala kulmayaa, waxyaale lala yaabo oo lagu qoslo marka la arko sakhafadda iyo xumaanteeda. Ilaa uu dadku la yaabo: sideebay aragtidaasi uga soo baxday faylasuuf. Ilaa uu xasuusto in faylasuufkaasi naftiisu uu yahay banii'aadmiga la siiyey oo keliya caqliga aadmiga. Taasi ma aha heerka caqliga aadamiga. Dadkaasi Falaasifada ahina waxay dhex gelayn bad aan cidi ka saari karin ilaa uu Ilaahay u qiil bixyo mooyaane, oo uu meel kale uga dhexsaaro oo aan meeshaas hore ahayn. Taasoo if ay wax ku arakaan uga baxo waana qaabka nolosha waqiciga ah. Taasoo ah heerka khal-iifnamada dhulka, ee waafaqsan habkaasi Ilaahiga ah. Kuna xidhan fadhiga iyo gargaarka Ilaahay, sida laga fahmay caddayntaasi, dhammaystiran ee jiritaanka, himilada aadaminimo, iyo hadalkiisa, cad ee xaqa ah. Waxaana habkiisa ku dheehan caddayntaasi qa-derku ku qotommo, aragtida aadamiga ee saxa ahi iyo qaderka uu ku qotomo nidaamka noloshiisu xididdada dabiiciga ah. Waxaa haddaba inagu waajib ah inaan isku dayno hirgelinta habkaasi si nidaamka nolosha aadamigu ugu qotonsato xididdada dabiiciga u ah. Mana jiro hab kale oo laga helayo astaantaasi loo baahanyahay. Ugu dambayn, waxaa innagu waajib ah in aan isku dayno hirgelinta habkaasi. Waayo waa habka keliya



ee ku xidan nidaamka koonka oo dhan. Waana in aanu dadku raacin hab aan ku xidhanayn nidaamkaasi. Waayo waxaa ku qasab ah in uu ku dhex-noolaado uunkan, iskaashina la yeesho nidaamkaasi uunka. Isku xidhnaanshaha ka dhexeeya habka nolosha iyo habka nolosha uunku waa ka keliya ee dadka u kafiilanaya inuu la kaashado xooggaga uunka ee weyn, halka ay iska hirdiyi lahaayeen. Marka uu la herdamana wuu burburi oo uu baabi'i. Umana gudanaayo xilkii ahaa khilaafada dhulka, sidii uu Ilaahay rabay. Haddii uu ku xidhnaado nawaamiista uunka oo uu waafaqo, wuxuu heli sirta aqoonteeda, sakhiraadeeda iyo sidii uu noloshiisa ugaga faa'iidayn lahaa. Kuma guban doono dabka uunka ee waxbuu ku karsan, diirsan shidanna doonaa. Fedrada aadamiguna asal ahaanteedu waxay ku xidhan tahay naamuuska uunka. Marka uu dadku ka saaro nidaamka noloshiisa, naamuuskaasi, lama hirdamayo uunkaasi weyn oo keliya ee wuxuu weliba la hirdamayaa fidradiisa naf ahaanteeda. Wuu dhibaatoon, oo wuu iscuni, wuu wel weli, wer werna wuu dili, wuxuuna u noolaan sida uu maantaba banii'aadmigu ugu nool ayahy cadaab iyo hoogg xataa tiiyo ay jiraan guulaha aqoonta oo dhammi, iyo nolol sahlidda ilbaxnimada madiga ahiba. Aadaminimada maanta waxaa haysta dhibaato, wer wer, murugo iyo jaahwareer. Si ay uga

cararto waaqaca dhabta ah ee nafteeda ayey isticmaas-haa afyuun, xashiish iyo wax yalaha dadka sakhraami-ya. Waxayna samaysaa xawli waalan, iyo muqaama-raad foolxun, tiiyo la haysto badhaadhaha maadiga ah. Wax soo saar buuxa, nololsahlid iyo firaaqo ah. Wax soo saar buuxa, noloshalid iyo firaaqo badan. Run ahaantii madhnaanshahaasi, wer werkaasi iyo wareerkaasi way sii siyaadi uun, mar aallaale marka uu si siyaadaba hor-u-markaasi maadiga ahi, iyo nolol sahliddaasi ilabaxnimada ahi. Madhnaansha-haas wuxuu u eryanayaa aadaminimada sida shabax laga baqanayo. Wuu eryanayaa wayna ka cararaysaa. Laakiin sidaasi ayey dhammaan wareerkaasi foosha xun. Ra'yiga ugu horeeya ee ku soo dhacaya qof allaale qofkii booqda dalalka, maalqabeenka ah ee leh nolol sahlidda ilbaxa ahi ee ay ugu horeeyaan Maraykanka iyo Iswiidhanka, waa in ay dadkaasi yihiin dad ka cararaya shabaxyo eryanaya. Kana cararaya naftooda hoosahaaneed. Waxaana, isla mar ahaantaaba u caddaanaya in maalqabidaasi maadiga ahi, raaxadaasi dareen iyo raaxadaasi jinsi-guba ay u hoggaaminayaan inuu dhex muquurto cudurka casabiga ahi iyo kuwa nafsiga ahiba, leexasho jinsi ah, wer wer joogto ah, xanuun iyo waalli, dembiyo foolxun oo joogto ah, iyo sharaf aadaminimo oo ka maqan noloshaba. Aadaminimadu waxay keentay



guulo waaweyn – marka loo eego cilmiahaan – dhina-ca caafimaadka, daaweynta cudurada jidhka. Waxay-na soo saartay daawooyin cusub iyo habab daaweyn iyo baarridba leh. Gaarahaan soo saaridda bensaliinta iyo mayosiinta. Dhinaca soo saaridda warshadaha waxaa la gaadhay wax u eg mucjiso. Tiiyo weli hor-u-marku sii socodo. Sidoo kale guulo waaweyn ayaa laga gaadhay ogaanshaha hawada sare, dayaxgacmee-dada, hirarka hawada, maraakiibta hawada. Tiiyo weli ay socoto. Laakiin waxaasi oo dhammi maxay u keeneen nolosha aadamiga. Maxayna u keeneen nolosha nafsiga ah. Ma la gaadhay badhaadhe? ma la helay xasiloonaan? ma la helay nabadgelyo? Wexaa la helay dhib, hoog, wer wer iyo baqo. wax hor-u-mar ah oo laga gaadhay ma jiro samaynta hadafka nolosha aadamiga, iyo qaayaha jiritaanka aadamiga. Marka laysgarab dhigo aragtida qofka ilaxa ah ee qaayaha jiritaanka aadamiga iyo aragtida Islaamka ay qaayahaasi ka leedahay, waxay ilbaxni-mada maanta lagu jiraa u muuqanaysaa mid ceebay-san oo shucuurta aadamiga meel ku xidhaysa kana yaraynaysa foojignaantiisa, jeclaysigiisa iyo dadni-madiisaba Haddii aynu soo qaadano Marykanka, Waxay caabudayaan Ilaahayo cusub, oo ula muuqda qaayaha jiritaanka aadamiga. Ilaaha lacata; Ilaaha dhadhanka, Ilaaha sumcadda, Ilaaha wax soo saarka.

Sidaas awgeed ayayna dadku naftoodaba u helayn. Waayo maba hayaanqaayihii jiritaankooda aadaminimo. Sidaasi ayuu xaalkuna ahaa jaahiliyadihii hore ee caabudi jiray Ilaahayadaas oo kale. Waayo ma hayaan Ilaahoodii runta ahaa. Tiiyoo ay waxaasi oo dhammi jiraan waxaa innagu waajib ah inaan isku daynno inaan labkaasi Ilaahiga ah ku hirgelinno nolosha banii'aadmiga, si aan aadaminimada ugu soo celinno Ilaahooda keliya. Kuna soo celinno qaayaha jiritaanka ku laaiqa ah banii'aadmiga. Kuna soo celinno naamuuska uuniga ee dhammaystiraya uunka oo dhan. Waana taasi xaqiiqada uu inoo soo bandhigayo Quraanku. Wuxuuna diidayaa arrinka kuwa doonaya in laysku xukumo wax aan sharciga Ilaahay ahayn, iyo habkiisa nololeed. Kuwaasoo ku khilaafsan wax kasta jiritaankan ballaadhan.

**« Ma waxay doonaan wax aan diinta Ilaahay ahayn. Diintaasoo ay u hoggaansanaadeen waxa ku nool samooyinka iyo arladuba, ha dooneen ama yaanay doonin eh. Isagnay u noqon doonaan. »**

* * *

# III

# HAB FUDUD

Waxaa laga yaabaa inuu qof yidhaahdo:

**« Laakiin aadaminimad suurogal uma aha inay aad ugu sabirt habkaasi heerka sare ah ee gaarka ah ».**

**Bulshadii ka suurogalisay arligan xilli waqtiyada ka mid ahi way ka jeedsatay.**

Aadaminimaduna waqtiyadii ka dambeeyey waxay raacday habab kale oo aan heerkaasi sare gaadhsiinayn laakiin aan ku kallifayn aadaminimada dedaalkaasi adag ee dhibaatada leh. Hadalkaasi marka hore wuxuu u muuqanayaa sidii wax sax ah. Waayo qorayaal badan ayaa isku dayey inay fikraddaasi ku abuuraan dadka maskaxiisa, kana dhaadhiciyaan in habkaasi yahay mid aan dhab ahayn, waaqicina aan ahayn – oo aan muddo dheer ku habnoonayn fidrada aadamiga. Ee uu yahayn uun baaq fikrad-ahaaneed inna gaadhsiinayaa heer aan la kari karin. Hadalkoodaasina waxa ka danbeeyay dan khaa'inimo leh. oo la rabo in niyadda laga dilo oo laga quusto in aadaminimadu ku hoos noolaan karto. Habkaasi qumman. Waxayna khaa'imintaasi fidnadii ka bilaabantay

dilkii Cisman – Ilaahay Raalli ha ka noqodee iyo khilaafkii xigay ee dhex maray Cali iyo Macaawiya iyo arrimihii la xidhidhay khilaafkaas oo idil, ka dhex heleen fursad u sahashay wixii ay doonayeen. Fursad weyn ayey ka heleen wararkii saxa ahaa iyo kuwa beenta ahba, sidii ay u sugi lahaayeen micnaahaasi foosha-xun, iyagoo mararka qaarkood caddaynaya, mararka qaarkoodna si dahsoon u sheegaya, hadba sida ay duruuftu ugu saamaxdo. Waxaana sii caawiyey – iyadooyna niyad ka ahayn – qaar muslimiin ah oo ku jahwareeray xaqiiqada ah in arrimahaasi dhacay ay joojin karin lahaayeen hor-u-kaca Islaamka taariikhda weyn ah. Waxaana kaloo ku leexad xagga aragtida siyaasadda xukunkii – jiray xilligii Nebig *N.N.E.K.H.A* iyo labadii ka dambeeyey. Sidoo kale waxaa ku dhacay leexasho asluubtii Boqoradii qaarkood iyadoo ay ugu wacantahay dareenkoodii xad dhaafka ahaa, marka dhinacaasi laga eego, waxay maleeyeen in hor-u-kacii Islaamka oo idili istaagay muddadii yarayd ee khiilafadi haysay meesha. Waxayna ugu baaqayaan aragtidaasi si kulul oo ka niyad ah, iyagoo doonaya heerkii sare, una xammasadaysan aragtidaasi ifaysa ee gaarka ah. Arrinta oo dhammi waxay u baahantahay in dib loogu fiirsado. Si qotodheerna looga baaran-dego, iyadoo fiiro gaar ah la siinayo arrimaha aadaminimo ee meesha



ku jira. Waana in la fahmaa dabeecadda diintani iyo dabeecadda habkeeda ay ku hoggaaminayso tallaabooyinka aadamiga muddo dheer, bii'ado kala geddisan iyo duruuf kala gaar ah.

* * *

Ugu horreyn, ma aha sax in habkani Ilaahiga ahi banii'aadmiga ku kallifayo dedaal adag oo aanu u dulqaadan karin muddo dheerna una sabri karin. Run-ahaantii waa hab la yaab leh, laakiin Isla-marahaantaas waa hab fidri ah. Oo ku tiirsan kaydka fidrada kana shidaal-qaata kaydkaasi urursan. Wuxuuna kaga geddisanyahay ee lagu gartaa waa isagoo ugu horreyntiiba garanaya sidii, loo kordhin lahaa kaydkaasi. Run-ahaantii wuxuu garanayaa jidka uu u marayo nafta aadamiga taabashada ugu horreysaba: Wuxuu garanayaa meelaha uu ka gelayo, si fududna wuu u gelayaa. wuxuu garanayaa irridaha lagasoo galo iyo kuwa laga baxaba. Wuxuuna u hantiyayaa si qumman. Wuxuu garanayaa xoogeeda iyo karaankeeda weligeedna ku xad-gudbi-maayo. Wuxuu garanayaa baahideeda, iyo waxay jeceshay wuxuuna ugu jawaabayaa si buuxda. Wuxuu garanayaa kartideeda asalka ah ee dhisan. Wuxuuna u horseedayaa shaqo iyo dhismo. Iyadoo uu leeyahay sarryntiisa, nadiifnimadiisaa, wanaagaas iyo fiicnaantaasba. Waa hab

banii'aadmi. banii'aadmigaas ku nool dhulka korkiisa. Waa hab tixgelinaya fidrada banii'aadmiga marka dhinac kasta laga eego, iyo astaanaha dhismiisa iyo koobnaantiisa iyo wixii la xidhiidhaba. Marka ay naftu raacdo fidradeeda, marka waxayaalaha ay u baahantahay ee ay doonayso ay lesho. Marka loo daayo karaanka iyo dhismaha, Waxay nolosha ula soconaysaa si fudud oo aan qasab ahayn. Waxayna ku socon jidkaasi fidrada ee korreeya. Ila ay gaadho figta sare iyadoo ku haysata wehel, raaxo, xasilooni jidkaasi dheer ee ay ku socoto.

* * *

Kuwa ka shakisan, shakigana ka geliya suurogalka hirgelinta habkaasi waxaa baqa-geliyey akhlaaqda habkani iyo nadiifnimada akhlaaqiga ah ee uu ka koobanyahay. Waxaana ka cabsiinaya takaliifta akhlaaqdaasi ku dheehan, waxayna u qaadanayaan silsilado iyo hor-joogiyo aan u sii daynayn banii'aadmiga wuxuu rabo. Iyo waxa ay naftiisa ku abuurani had-iyo-jeeraale rabto. Kaasina waa dhallaan-habaabis ay abuurtay qaladka laga fahmay dabeecadda diintan. Asluubta Islaamku kuma koobna oo keliya silsilado iyo hor-joogsiyo la soo ururiyey iyo waxyaalo laysku diidayo uun. Maya arrinku sidaaa ma'aha! ee naf-ahaanteeda ayey u tahay xoog dhisan iyo dhaqdhaqaaq u hor-seedaya korriin joogto ah. iyo dhaqdhaqaaqa oo loo sii daynayo iyo naf-ahaantiisa oo ku hirgelay dhaq-dhaqaaqaasi. laakiin tiiyo ay tahay asluub nadiif ah. Hawlgalka iyo raacsanaantu waa suurad anshaxeed ee habkani. Fadhiga iyo diidmaduna waa suurad aan anshax lahayn waayo, waxay diidantahay qaayihii jirtaanka aadamiga. Sida uu inna tusayo Islaamku. Taasi oo ah khaliifnimadii dhulka, iyo faa'idaysiga wax allaali wixii uu Ilaahay u sakhiray banii'aadmiga inta karaankoda iyo awoodooduba tahay, sidii ay u cammiri lahaayeen una dhisilahaayeen. Dedaalka la muujinayo si loo gaadho khayr iyo dagaallanka lala dagaallamayo sharka. waa suurad akhlaaqi ah oo ay ku furmayso karaanka asaasiga ah ee shakhsiyadda banii'aadmiga. Sida uu Islaamku wax u arkayo, daacadda Ilaahay ayna u matalaysa cunsurka akhlaaqeed si fiican. Marka aynu soo qaadananaynno suuradda akhlaaqiga ah ee dusha uga muuqata silsilado iyo hor-joogsiyo, waxaynu dhinac kalena ka arkaynaa inay matalayso suurad leh madax-banaani, xornimo iyo dhaq-dhaqaaq. Haddii aynu soo qaadanno nafta laga joojinayo inay dhexgasho shahwaadka jinsig ah ee xaaraanta ah, waxay dusha uga muuqataa xadhig iyo hor-joogsi shahwaadkaasi lagana madaxbanaanaaday gumaysigoodii. Sarena loo dhigay doonistii aadamiga oo ay

kala dooranayso goobaha shahwaadka, iyadoo ku eg xuduudda Nadiifnimada ah ee uu Islaamku soo fidiyey, tiiyo aan laga baxayn xerada inta uu Ilaahay inno xalaaleeyey.

Bal aynu soo qaadano tusaale kale oo ka mid ah tusaalooyinka asluubta. Tusaalaha wax huridda. Marka hore waxay ula muuqanaysa mid kallifaad ku ah nafta, oo ka joojinaysa inay ku raaxaysato waxa ay haysato si ay ugu hurto naf kale. Laakiin asal-ahaanteedu waa bakhaylnimada oo laga xoroobo layskana sarreysiiyo wax isla jeclaanta. Lana ballaadhiyo shucuurta khyrka guud ee aan meel uun ku koobnayn. Sidaasi awgeed xaqiiqo-ahaanteed waa gobanimo xornimo iyo furfurnaan. Meel ummahayno, inaan tusaalooyin badan soo bandhigno. Intaasi ayaa innaga filan inay fikrad innaga siiyaan, xaqiiqada dhabta ah ee silsiladaha akhlaaqiga ah ee habka Islaamka. Islaamku wuxuu u haystaa dembiga iyo xumaanuhu inay yihiin silsilado iyo xadhko xidhaya nafta banii'aadmiga ah, culaysinaya, hoosna usoo dejinaya. Wuxuuna ku tirinayaa madax-banaanida xadhkahaasi, xornimada dhabta ah. Asluubta oo idili waxay salka ku haysaa gundhiggaasi. Wuxuu sidaasi u yahay, waayo wuxuu u haystaa in asalka fidradani uu yahay u diyaarin khayr. Dadka waxaa loo abuuray sidii ugu qummanayd. Wuxuuna usoo



noqonayaa heerkii: – ugu hooseeyey marka uu isku dhiibo waxaan habka Ilaahay ahayn ».

**« Waxaanu dadka u abuurnay sidii ugu qummanayd, waxaanan u soo dejinay halkii ugu hooseysay kuwa Ilaahay rumeeyey ee wanaagga sameeyey mooyaane ».**

Sidaas awgeed, habka waafaqaya fidradu, waa ka gacan ku siinaya sidii uu uga baxsan lahaa xadh-kaha iyo silsiladaha ku xeeran fidradaasi habboon, kana xoraynaya xabsiga shahawaadka. Islaamku wuxuu ku hammiyayaa inuu hoggaamiyo bulshada aadamiga ah si uu u abuuro xaalado iyo dhiggaallo ka xoraynaya dadka leexashada daakhiliga ah ee fidrada. Wuxuuna u oggolaanayaa xoogagga san ee ku dhisan fidradu inay muuqato, xornoqoto, sarena u kacdo. Wuxuuna tirirayaa hor-joogsiyada ku kala dhex jira fidrada iyo madax-bannaani loo helo samaantaas loo abuuray. Kuwa u malaynaya in asluubta Islaamku banii'aadmiga saarayso culays u diidaya xaqiiqada noloshooda, waxay ka imanaysaa fikraddaasi dhibaatada ka soo gaadhay qofka muslinka ah ee ku nool bulsho aanu Islaamku xukumayn. Marka uu arrinku sidaasi noqdana wuxuu Islaamku noqonayaa asluub-ahaantiisa culays dhib-leh. Waxayna ku siganayaan afraadda ku nool Islaamkooda nadiifta ahi. Inay bulshadaasi jaahilka ah ee wasakhda ahi tiriirto. Laakiin kaasi

ma aha dhigaalka dabiiciga ah ee Islaamku sii arkay
Wuxuu sii tusayaa dadka asluubtaasi heerka sare a
ee nadiifta ah in Islaamku yahay nidaam dhab ah
wuxuuna tusayaa in dadka ku nool habkiisa ay k
nool-yihiin bulsho u Islaamku xukumayo. Bulshada
sina waxaa laga dhex helayaa khayr, barwaaq
nadiifnimo, taasoo ah wanaagga ay garanayan oog
yaanna dhammaan dadka taageeraya bulshadaas
Sharka, dembiga iyo wasakhnimaduna waxay noq
nayaan xumaanta ay diidayaan dhammaan xoogagg
xukumaya bulshadan. Marka uu arrinku sidaasi
hagaago wuxuu habka Islaamku u noqonayaa nolosh
hab fudud oo aad u sahlan. Run-ahaantii, waxa
dhibaatada xaqiiqda ahi tahay marka dadku khilaaf
habkani. Isuna dayaan inay ku raaxaystaan shaha
waadkaasi hooseeya, raacaanna sharka iyo dembig
Waayo dhammaan xoogagga xukumaya bulshad
markaasi, – ee sii dheer xoogga fidrada dhabta ah e
dadka – ayaa is-hor-taagaya kana dhigaya jidkoodaa
leexsan mid dhib-badan oo adag. Halkaasi ayu
Islaamku ka doonayaa inuu xukunka kama-dambay
ta ah ee bulshada aadamigu noqdo ka Ilaahay iy
habka Ilaahay dejiyey. Wuxuuna diidayaa in xuku
kaasi kama-dambaysta ah uu yeesho qof khalqi
Ilaahay ka mid ahi hab aan ka Ilaahay dejiyey ahay
Wuxuuna ku tirinaya gaalnimo cad iyo shirki dha



sidii aynu hore ugu soo sheegnay maqaaladii hore. Islaamku wuxuu leeyahay weji keliya. Taasi oo ah in Ilaahay oo keliya loo daayo Ilaahnimada. Ahna in habkiisa oo keliyi xukumo nolosha aadamiga. Waayo waa kaasi micnaha toosan ee qiraya. « **Laa Ilaaha illa Allaah** » Ilaahay mooyee Ilaah kale ma-jiro – sidaynu horeba usoo sheegnay. Waxaa kaloo Islaamku doonayaa in loo oogo bulsho Islaam ah oo uu fardiga Muslinka ahi ku hoos noolyahay isagoo diintiisaasi haysta, taasoo waafaqsan asluubta ay diintani wadato. Shu cuurta Islaamku ka qabo jiritaanka oo idil iyo qaayaha jiritaanka aadaminimo, wuxuu si weyn uga geddisanyahay aragtiyaha jaahiliga oo idil. Waana ta aadamiga u sawiraya inay ka go'an-yihiin. Hanuuninta Ilaahay xilli kasta iyo meel kastaba. Waana khilaaf weyn oo aan sinaba layskugu iman karin meel dhexdhexaad ah. Waxaa lagama-maarmaan ah meel go'an oo aragtidaasi ku noolaato. Taaso wada wadata dhammaan qiimayntiisa gaar-ahaaneed. Waxaa loo baahanyahay meel aan ahayn ta jaahiliyadda. Waana in ay ahaataa bii'ad aan ahayn ta jaahiliyadda, meeshaasi gaarka ah ee lagu noolyahay aragtida Islaamka, iyo habka ka soo unkama. Waxaa ka soo neefsahadiisa dabiiciga ah si too ah oo xor ah waxaana ka soo beermaya koritaankiisa dhabta ah iyadoon waxba iska-hortaagayn aanu jirinna wax dib

u dhigaya koritaankaasi oo ka hor-i-manayaa, aana jirinna hor-joogsiyaal dibedda kaga imanaya o tirtiraya ama u caga-juglaynaya. Bii'adda caynkaa ah waxay nolosha qofku noqonaysaa mid sahla waayo wuxuu u neefsanayaa dabiicaddi loogu taloga lay. Wuxuuna ku helayaa gacan khayrka. Wuxuun ka helayaa raacidda akhlaaqda Islaamka dareen raax leh, iyo raaxo bulshadeed. Haddii aanay bii'ad cayn kaasi ahi jirinna, waxay nolosha qofku noqonaysa mid aan suurogal ahayn – ama ugu-yaraan mid ada – Waxaana halkaasi loo baahanyahay inuu ka gart qofkii doonayaa inuu noqdo muslin, in aanu ka karin inuu Islaamnimadiisa u guto si sax ah, isago ku dhex-nool meel muslin ahayn Islaamkuna k talinayn Haddii kale wuu qaldanyahay haddii uu maleeyo inuu Islaamnimadiisa haysan karo isago ah tuke-baal cad oo ku dhex nool bulshooyink jaahilka ah. Habka Islaamku waa mid fudud, mark bii'addiisa lagu dhex noolyahay. Wuxuuna so jeedinayaa in jiritaanka bii'addaasi la helaa wax kast oo dhaca. Tusaalooyinkiisa oo idilna waxay k qotomaan gun-dhiggaasi.

* * *

Sidoo kale ma qummana in habkani dadka k kallifayo dedaal ka adag dedaalka la bixinayo mark



lagu hoos noolyahay hababka jaahiliga ah. Hababka jaahiliga ah – kuwaasoo banii'aadmiga gooni uga saaraya hanuuninta Ilaahay xilli kasta iyo meel-kastaba, waxaa saamaynaya go'anada ka soo baxa jahliga aadamiga, tabar-yaridiisa, iyo hawda aadami-gaba oo ah xaaladaha ay ugu wanaagsantahay. Sidaas awgeed waxay la hirdamaysaa oo ay ka hor-i-manay-saa fidrada aadamiga, iska-hor-i-madd dhan ama meelaha qaarkood. Markaas ayay u dhibboonaysaa nafta aadamigu sida ay uga hor-tagto fidrada ay u abuurantahay. Waxaa sidoo kale, astaameeya daa-weynta iyo xallilaadda mashaakilka aadamiga.

Waxaa laga-yaabaa inay mashkilad dhinac ka xalliyaan, laakiin dhinaceeda kalena ay dhibaato. Keento. Waana taasi natiijada aragtidooda kala dhiman ee kari-weyday inay arrimaha oo dhan hal mar wada xallido. Marka ay daaweeyaan xanuun cusub oo ka kacay daaweyntii xanuun hore, waxaa isla mar-ahaantaas abuurmaya xanuun hor leh. Sidaasi ayey weligeed ku socon. Waxaana taasi inooga mar khaati kacaya barashada isbeddelada iyo xilliyada uu soo maray aadamigu. Shaki kuma jiro, waxay tani kallifaysaa aadamiga dedaal ka adag, dedaalka lagu bixinayo hab dhammays tiran, qumman oo dhan oo fidrada la socda, oo ka eegaya dhibaatooyinkeeda oo dhan dhinac kastba, una dhigay daaweyn buuxda oo

dhammays tiran, oo ka soo unkantay aragti buuxda oo dhammays tiran. Qof kasta oo dersaa soo ururinta dhibahii aadamiga ee ka soo abuurantay hababkii jaahiliga ahaa muddadii dheerayd ee taariikhda, ma odhan karo habkaasi Ilaahiga ah oo wata takaliiftiisa oo idil iyo asluubttiisuba wuxuu kallifayaa aadamiga dedaal aanay kallifeynin hababka jaahiliga ahi. Taa ugu fudud ee habkani leeyahay isagoo weliba doonaya inuu ilaa figta sare gaadho, – waa ma is-dhega mariyo fogaanta jidka mana dedejiyo tallaabada mana ka tallaabsado mar xaladaha. Aagga ka horreeya waa ballaadhan yahay. Mana soo koobi karto da'da qofku. Mana waddo baqe uu ka baqanayo in dhimashaduba ka soo gaadho inta aanu gaadhin xaqiiqada qaayahaasi fog, sida ku dhacda dadka wata madhabyada iyo hababka dhulka ee banii'admigu leeyahay. Kuwaasoo arrinka oo idil ku dhammeeya fac keliya, dedejiyana xasiloonaanta fidrada aadamiga si ay deg deg ugu boodaan hirgelinta sawirkaasi is tusaya. Umana sabrayaan tallaabooyinka dabiicaga ah ee deggan, xasilloon ee muuqda. Jidkaasi ay qaadayaanna waxaa ka dhaca dhimasho, waxaa daata dhiig badan, waxaana burbura qiimayn oo idil. Waxaana khal khal galaa qaderin oo idil. Aakhir taankana iyaga naftooda ayey burburiyaan xoogagga fidradu taasoo ayna qalabkooda gacanta ay ku samaysteen is hortaagi karin.



Laakiin habka Islaamku wuxuu u soconayaa si fudud oo jiicsan. Wuxuuna dhiirri gelinayya fidrada aadamiga, si ay hal jiho u wada qaadaan, isagoo iska hortaagaya inay jid kale qaaddo, xoojinayana mar allaale markii ay liciiftaba, laakiin weligii ma jebiyo mana burburiyo, isku mana dayo sidaasi wuxuu siiyaa dulqaad, wax garad iyo wax garashaba leh, isagoo ku kalsoon qaayahaasi fog ee dheer, ee la hubo xaqiiqdana ah. Kaasoo kii aan ku dhammaan wareegga hore, ee uu ku dhammaandoono wareegga labaad. Haddii aanu ku dhammaan wareegga labaadna, uu ku dhammaandoono wareegga saddexaad, ama ka tobnaad, ama ka boqolaad, ama ka kunaad. Waxa keliya ee loo baahan yahay waa dedaal lala yimaaddo iyo jidka oo lagu waaro. Sida uu geedka dheeriba u baxo ka dib marka uu xididadiisu aad ugu qotomiyo dhulka, laamihiisuna u dheeraadaan una fidaan. Sidoo kale ayuu habkanina ugu baxaa nafta iyo noloshaba. Wuxuu u fidaa si qunyar oo deggan. Kuna dheehantahay kalsooni iyo xasilooni. Ugu dambaynna waxay noqon uun, sidii Ilaahay doono. Islaamku wuxuu beeraa midhihiisa, wuuna is dultaagaa si uu u ilaaliyo. Islaamku wuxuu beera midhihiisa, wuuna is dultaagaa si uu u ilaaliyo. Wuxuuna u daayaa si ay ugu baxdo koritaan dabiici ah oo deggan, isagoo ku kalsoon qaayahaasi fog. Si kasta oo uu gaabiyo ama uu dibba

ugu socdo mararka qaarkood, waa arrin fidradu uun iska leedahay. Mararka qaarkood daaqaba waxaa qariya ciid, waxaa cuna cayayaan, waxaana guba haraad, waxaana hafiya daad. Waxaan a wax yeello u gaadhaa siyaalo farabadan. Laakiin beerfalaha waxgardka ahi wuxuu og yahay in beerto nabadgelay- so bixina doonto.

Kana guulaysandoonto waxyeeladaasi muddada dheer soo gaadhay. Ma walaaco mana wer-wero, isku-mana dayo inuu ku dhaliyo hab aan ahan, kaa fidrada. Sidaasi oo kale ayuu Islaamku u leeya- hay, Ta-kaliiftiisana ugu sahlaa nafta aadamiga. Halkan ugama baahanin maanta inaan ka hadalno dhibaatooyinka ay soo gaadhsiisay aadamiga cidhii- dhiga habka jaahiliga ah iyo kuwa wataba. Waxaana innagaga filan, waxa maanta dhibaato taallo dhulka bari iyo galbeedba. Meel-kastana dadka wax-garadka ahi waxay ka oogeen qayla-dhaan digniineed.

* * *

Ugu dambayn, run ma aha in habkan Islaamku aanu noolaan muddo dheer, sida ay dadka qaarkii yidhaahdaan iyagoo uga jeeda xumaan iyo khaa'inni- mo. Qaarna yidhaahdaan iyagoo xammaasad iyo qiireba hayso. Dhismaha ruuxiga ah, ka bulsheed iyo ka siyaasadeedba, ee ku qotonsaday isagoo salka



ku haya habkani heerka sare ah ee gaarka ahi. Taasoo dhismihiisu qaatay oo keliya muddo ku siman hal qarni oo keliya – ama run-ahaanta qarni badhkii – wuxuu waday inuu iska caabbiyo wax-yeellooyinkaas ku soo aaday oo idil nacabkii soo weeraray oo dhan iyo weeraradii foosha-xumaa ee lagula kacay muddo ka badan kun sanadood. Hawlahaasi baqaha lehi waxay si isdaba-joog ah u weerarayaan una dhex- jebaaxayeen saldhig-yadiisa, tiiyo ay waxaasi oo idil ka dambeeyaan dhammaan xoogga caalamka jaahilka ah. Wayna kari-waayeen inay burburiyaan aasaaskii- sa. Laakiin muddadaasi dheer iyagoo isrursanayana una dhabbagelaya, isku-taxallujinaya joogtana-ka- dhigaya, waxay u keentay inay qun-yar qun-yar laciifiyaan, kana leexiyaan asalkiisii hore tartiib- tartiib ilaa ay ugu dambayntii aad loo laciifiyey lana baqa-geliyey. Tiiyo ay waxaasi oo idili jiran – Ila iyo haanta – way u suurogeli weyday inay ka leexiyaan usuushiisa aragtida. Usuushaasi oo ay haatan suuro- gal u tahay soo noolayn-Cusub marka uu dhabarka ku qaado fac cusubi. Si aynu u ogaanno qiimaha xaqiiqadaasi taariikhiga ha, waxaa loo baahanyahay inaan eegno dhismo kale oo ku qotomay hab jaahili ah. Waa dhismihii dawladda Roomanka. Wuxuu dhismahaasi qaatay muddo ku dhow kun sannadood. Wuxuuna ku burburay in ka yar hal qarni oo keliya.

Weligiina dib dambe cago iskuma soo taagin. Usuushiisina wax-haba-yaraatee ka hadhay oo dhalin kara soo noolayn majiro. Waana taasi kala-geddisnaanta aasaasiga ah ee u dhexeeya habka Ilaahay iyo hababka addoomada. Run-ahaantii waxaa jiray xilli aad u wanaagsanaa marka la eego taariikhda habkani iyo aadamiga oo idil. Taaso taariikhda aadamiga oo idil ula muuqata heer aad u sareeyey oo tiigsigeeda qoortu ku daalayso indhuhuna fiirsanayaan iyadoo taagan weli heerkii sare. Xilligaasi wanaagsan waa mid aad u gaaban. Xilligaasi ma aha taariikhdii Islaamka oo idil, ee waa manaarad uu Ilaahay qotomiyey si uu banii'aadmigu u higsado. Iskuna dayaan inay halkaasi gaadhaan. Rajooyinkoodana soo cusboonaysiiyaan sidii ay u gaadhi lahayeen figtaasi sare, iyagoo kor u fuulaya. Ilaahayna wuxuu u qaybiyey xilligan halka uu kaga aaddan yahay koritaankaas. Taasoo ah mannaaradda la higsanayo. Waxaa xaqiiqo ah in xilligaasi aanu ahayn mid ka dhashay mucjisad aan soo noqonayn, ee uu ahaa midhihii dedaalka aadamiga ee ay bixisay bulshadii Islaamka ahayd ee ugu horeysay. Waana suurogal in la hirgeliyo marka lagu bixiyo dedaal la mid ah kii hore mar kale. Laakiin dedaalkaasi ay bixisay qolo la doortay oo aadamiga ka mid ahi waxay u noqon kartaa tusaale facac badan oo aadamiga ka mid ah



oo soo socta – oo aan ahayn fac keliya. – Hirgelinta figtaasi gaarka ah ee facaasi leeyahay waxay ku xidhantahay qadarka Ilaahay, si uu tusaalahaasi u yeesho weji dhab ah oo dhiirri-geliya suurogelideeda. Keenana garashada astaamaheeda. Intaas ka dibna u daaya aadamiga facaca dambe ee xiga inay isku dayaan inay mar kale gaadhaan. Wuxuu habkaasi ku socday si uu ugu fuliyo kaalintiisa – wixii ka dambeeyee xilligaasi – aagag furan oo nolosha aadamiga ah wuxuuna ku hawl-gelayey aragtiyada dadka, taariikhdooda iyo waaqacoodaba muddo badan. Wuxuuna kaga Tegay raadad badan nolosha banii'aadmiga oo dhan. Taasi oo laga yaabo inay tahay ta inna rajogelinaysa, si aadamiga suurogal ugu noqoto inuu mar labaad isku-dayo inuu mar kale figtii koro.

* * *

# IV

# HAB KU SOO JIDANAYA

If kaasi dhalaalayaa wuxuu gaadhay jiidasho joogto ah ee nolosha dhabta ah ee aadamiga, iyadoo ay ugu wacantahay, haybaddiisa, sarrayntiisa, weynaantiisa dhammidiisa. Wuxuuna kaga tegay raadad joogto ah, taariikhda aadamiga oo ka dhigaya faca haatan jooga ee aadamigan ah mid ka karti weyn fac-yaashi hore oo dhan – Wixii ka dameeyey qolodii la doortay ee raacii ugu horreeyey – sidii uu ugu dedaali laahaa hirgelinta Islaamka. Waxaana gacan siinaya dhax lidda fikradaha, qiimaynnada, hababka iyo dhigaalada uu soo maray. Waxaynu maqaaladdan isku deyidoonnaa si kooban oo qurxan munaasibna ku ah dabiicadda baaritaanka gaaban, inaynu dhinac kasta ka eegno raadadka iiftinkaasi baxaya ee gaarka ah ee aan ku ekayn oo keliya taariikhda ummadda Islaamka, laakiin ah taariikhda aadamiga gebi-ahaanteed.

* * *

Waxaana muhim ah in aan ogaanno inay dadkaasi oo matalayey tusaale aadaminimo oo sarreeya,



tusaalooyinkaasi oo ahaa qaar wanaagoodu gaar ka dhigay oo dhammaan tusaalooyinkii kale ee soo maray aadamigu ay u noqonaya wax carruur ah ama naflay aan dhammays-tirnayn. Waxaa muhiim ah in aan ogaanno in dadkaasi ku hir-geliyey habkani Ilaa higa ahi noloshooda. Sidaasi lala yaabo ay ahayeen tiiyo taasi jirto dad banii'aadmiga ka mid ah oo aan ka bixin dabiicaddoodii iyo fidradii loo abuuray, inan jirin wax keliya oo cidhiidhiyey karaankoodii ay u dhisnaayeen, naftoodna kumay kellifin wax awood-dooda iyo karaankooda ka baxsan, laakiin waxay la yimaadeed dedaal kasta oo aadmi leeyahay, waxayna ku raaxaysteen dhammaan waxyaalihii lagu raaxaysan jiray ee xalaasha u ahaa ee bii'addoodaasi jiray. way khaldameen oo way asiibeen, way kufeen oo way kaceen, marna waxaa heleelay tabar-yarida aadamiga – sida uu dadka banii'aadmigaba u haleelo. Tabar-yaridaasina way ka guulaysteen mararka qaarkood. Aad ayey muhiimmo weyn u leedahay in xaqiiqadaasi la gartaa. Waayo waxay aadamiga gelinaysaa rajo weyn haddii laysku dayo in la soo celiyo halgankii. Waxayna ka dhigaysaa xil iyo waajib uu banii'aadmigu leehay inuu u halgamo tusaalahaasi ifaya ee suurogalka ah, iyo inuuu wadoo halgankaasi waxayna banii'aadmiga u keenaysaa inuu kalsooni yeesho kuna kalsoonaado fidradiisa

nafahaaneed – Taasoo suurigelinaysa – Haddii jidk
toosan la raaco – inay gaadho heerkaasi banii'aadm
nimada sare ah, ee ay mar taariikhda ka mid ah gaa
dhay. Kumayna gaadhinna mucjisad aan suuragelay
oo aan soo noqonayn, ee waxay ku gaadhay iyado
raacday hab dabeecaddiisu tahay inuu xaqiiqooh
dedaalka aadamiga oo aan dhaafsiisnayu karaank
banii'aadmiga. Facaasi weyn ee gaarka ahi wuxu
ka kacay badhtamaha lamadegaanka saboolka ah
dabeecad ahaanna u xaddidnayd una koobnay
awoodiisu, dhaqaalihiisu iyo cil, igiisauba. Inkasto
bii'addani ay tahay mid suuragal u ah inuu ka kac
fac sidaasi ahi, aadaminimadaasi oo kalena le
maanta iyo beeriba, ma aha mid aan qaadi karnay
ha ahaato fidro ahaan, iyo karaan ahaanbe eh in ay
mar labaad ku guulaysato halgankaasi haddii ay k
dhigato habkaasi gun-dhigeeda nololeed. Habkaas
– tiiyo ay jiraan dhibaatooyin badan oo ka so
gaadhay muuddo farabada leexashada colaadda iy
weeraradii lagu hayey – Wuxuu soo saari jiray da
tusaale ah oo u eg facii ugu horeeyey ee gaarka ahaa
oo leh wax lagaga daydo iyo raadad la raacaba
Tusaalooyinkaasina waxay aad u soo jiiteen nolosha
banii'aadmiga, waxayna aad u dhalan-rogeen jidka
hayaanka taariikhda aadamiga. Waxayna aad u
dhalan-rogeen jidka hayaanka taariikhda aadamiga.



Waxayna gadaashooda iyo hortoodaba kaga tageen raadad iyo tixgelinno xooggan oo ku daabacan wejiga nolosha midba geddiyeysana. Habkanina xilli kasta wuu awoodi karaa inuu soo saaro tusaalooyinkaasi oo kale, mar allaale markii la bixiyo dedaal dhab ah oo laysku dayo in la dabbaqo laguna xukumo nolosha, tiiyoo aan dheg loo dhigayn dhammaan xoogagga ka hor-i-manaya iyo dhammaan hor-joogsiyada ka xannibaya jidka uu ku socdo. Sirta ku garsoonna waa iskaashiga tooska ah ee uu la leeyahay fidrada iyo ka faa'iidaysiga kaydka ku jira. Kaydkaasina waa mid weyn oo joogto ah. Mar allaale marka uu la kulmo habkani, waxaa soo butaacaya iliilado maal ah waxaana diirka ka qaadmaya mug-weyntii qaarsoonayd.

* * *

Xilligaasi wanaagsanaa wuxuu karay inuu nolosha aadamiga ka hirgeliyo mabaadii iyo aragtiyo, qiimeynno iyo miisaamid, ee aan hore loo karin in laga hirgeliyo taariikhda oo idil. Taasoo ahayd si caddan ah oo qoto-dheer leh dhammaanteedna dedaal nool oo dhammays-tiran. Sidoo kale hore umay dhicin in sidaasi loo hirgeliyo mabaadiidaas, aragtiyahaas, qiimeynadaas iyo miisaamiddaas nolosha aadamiga, oo uu sidaasi cad qotodadheer ee leh dodaalkaasi

nool ee dhammays-tiran u hirgeliyo hab keliya ama nidaam-keliya oo adduunka oo idil. Waxaana ugu sii muhimsan runtaasi oo kele, dedaalkaasi, daacadni-madaasi iyo isxil-saarkaasi, runta ah ee qotoda-dheer. Waxay mabaadiidaasi, aragtiyohaasi, qiimeyntaas iyo miisaamiddaasi soo dhaweeyeen dhammaan wax-yaalaha la xidhiidha nolosha aadamiga. Waxay aragtida aadamigu Ilaahay ka qabto, iyo xidhiidhka ay la leedahay iyo aragtideeda jiritaanka ay ku noos-hay iyo cilaaqeedkeeda iyo aragtideeda qaayaha jirtitaankeeda aadaminimo iyo kaalinta ay kaga aadantahay uunkan iyo hawsheeda. Sidoo kale, waxay la hawlgashay aragtida xaqiiqada ah ee aadamiga xuguuqdiisa, waajibaadkiisa, takaaliiftiisa, qiimeyn-tiisa lagu miisaamo noloshiisa, dedaalkiisa iyo kaa-lintiisaba. Taasoo salka ku haysa cilaaqaadka uu Ilaahay la leeyahay, cilaaqaadka ehelkiisa, cilaaqaad-ka reerkiisa, iyo cilaaqaadka uunka, nooleha iyo walaxahaba. Waxay sidoo kale ka shaqaysay, xuquuq-da, waajibaadka siyaasiga ah kuwa bulshada iyo kuwa dhaqaalahaba, hababka, dhigaalada iyo arri-maha isku xidha xuquuqdaasi iyo waajibaadkaasiba. Hadalkoo koobanna, dhammaan goobaha nolosha banii'aadmiga ee wejiyadeeda kala geddisan. Intaasi oo idilna waxay qarrirtay xukunkeeda qaarka ka dhigay ee gooni u soocay ee ku dhuftay shaabbad



gaar ah oo rabbaani ah. Waxaasi oo idili wuxuu ka dhacay bii'ad col la ah mabaadiidaas iyo aragtyahaasi oo idil. Colma la ah qiimeyntaasi iyo qadarintaasi. Bii'ad caalami ah oo inkirsan aasaaska mabaadiidan aragtiyahaasi, qiimeyntaasi iyo miisaamiddaasi. Tyoo ay jirto duruuf dhaqaale, bulshadeed, siyaasadeed, caqliyeed iyo mid nafahaaneedba. – ha ahaato mid gool ku siman ama mid caalami ah – Taasoo ayka muuqatay nay ka Hortimaaddo tusmadda uu qarriray Islaamku ee waaqaca nolosha aadamiga markii ugu horeysay – ama ugu yaraan – aan gacan siinayn dhaq-dhaqaaqaasi dheeraynaya. Wuxuuna guushiisi ku tiirsanaa – kaydka fidrada si diyaar loogu noqdo ku toosidda habkaasi Ilaahiga ah ee dhalan-ahaantiisa waafaqsan fidrada – Intii ay gacanta ku dhigi lahaa-yeen waxaalahaasi dadka soo jiidanaya – Waxay hawlgelisay kaydkaasi waxayna ka soo dhex saartay qiiqii qarinayey. Run-ahaantii waa kayd ballaadhan oo karaya – Haddii la helo habka ka nabadgelinaya wareerka iyo caajiska, – inuu u jilib-dhigo arrimahaasi dadka istusaya ee ay dadka qaarkii meel dhaw wax ka arkaa u qaadanayaan inay matalayaan wax kasta oo nolosha aadamiga ah. Islaamkuna ma isdhega-marinayo arrimahaasi, kamana boodayo raadka ay ku yeelanayaan nolosha aadamiga ee laakiin iskuma-dhiibayo, isagoo ka dhiganaya arrin dhab ah oo

aan dhinacna looga bixi karin, ee wuxuu ku dedaalayaa nabad-gelinta kaydka fidrada, ururintiisa iyo toosintiisa, si uu u hagaajiyo waqaca, si fudud oo aan xanuun lahayn, si la mid ah sida aynu ku soo caddaynnay jidkiisa hawl-geleed, maqaaladdii hore. Wuxuu ku dhammaanayaa sidii xilligii hore oo kale uu ku dhammaaday, tiyoo ay ka soo hor-jeeddo duruuftaasi ah mid gudahaba iyo mid dibadeedba oo caalami ah iskuna bedeleen duruuf raacsan sidii ka dhacday oo kale jasiiradda Carabta iyo kuwii soo raacayba Banii'aadminimada maantuna waxay tahay – meelaha qaarkood – mid xaalad iyo duruuf ka wanaagsan leh maalintii uu habkani yimid, oo uu muddo yar ku dhaliyey afgenbi buuxa iyo kacaan weyn. Kuna dhaliyey si fudud, sahlan oo soconaya. Waxay nu noqonkartaa maantana mid uga hawl-karsan habkani – tiiyoo ay jirto sababo aan ku caddayn – doonno maqaaladda soo socota – karaankeeda jirtiaankeedii maantuna wuxuu noqonayaa mid ka weyn. Gaar-ahaan marka aynu ogaanno in kaydka fidrada aadamigu – tiiyoo ay dul lalmanayaa daruuro fasaad, shar iyo leexashaba ahi, iyo tiiyoo ay jiraan caga-juglayn iyo xasuuqid ka imanaysa dhigaalada maadiga ah iyo xaaladaha dhaqaalaha iyo fikradduba, wuxuu karayaa inuu kaco is-urursado, oo uu hawlgalo Taasina waxay suuragelaysaa marka uu habku ku



guulaysto nabad-gelintiisa, ururintiisa, iyo jeedintiisa, iyo ku duwga tubta la socota fidrada banii'aadmiga, fidrada uunka, sidii uu Ilaahay u abuuray. Kaydkanna saafinimadiisa, qoto-dheeridiisa iyo ballaadhnidiisuba waa mid ka sarreeya arrimaha kale oo idil ee wata suuradda « Waaqaca » Maxaa markaasi ka galay, haddii maanta ay arrimahaasi yihiin qaar ka soo hor-jeeda. Dad aan garanayn dabiicadda habkani. Waxay ula muuqdaa « Xaqiiqada » inay tahay wax aan isbedeli karin, gilgilan-karin oo weyn. Laakiin kaasi waa dhalanteed uun, fidradu aadamiguna waa mid waaqici ah sidoo kale, mana aha mid si toos ah ula socota waaqacaasi dusha ka muuqda, maa-daama meel-kasta ay ku dhibboontay bari iyo galbeedba. Mar-allale marka fidradu la hirdanto dhigaal, dhigaalada ka mid ah ama nidaam, nidaamyada ka mid ahba, marka hore waa la jebiyaa. Waayo dhigaalkaasi iyo nidaamkaasiba waxaa ka dambeeya xoog maadi ah oo maquuninaya. Laakiin waxaan shaki ku jirin inay fidradu ka xooggantahay kana sugantahay dhigaal kasta iyo xoog kasta oo dhigaalkaasi la yimaaddo. Waxaana hubaal ah in kamadambaysta uu guuleysan gaar ahaan marka lagu toosiyo hab dabeecadiisu uu la mid yahay dabeecedda uu isku leeyahay.

Taasina mar ayey dhacday marka uu habkaasi

Ilaahiga ahi ka hor-yimid waaqacii jasiiradda Carab, iyo waaqacii arliga oo idil. Wuxuuna waaqacaa ka guuleystay guul la yaableh. Wuxuuna beddel dhigaaladoodii aragtyeed iyo cilmiyeedba. Wuxuu u dhidbay aasaas cusub. Arrintaasi dhacdayna kuma dhammaanin mucjisad la yaab leh oo aan soo noq nayn. Laakiin waxay xaqiiqowday – iyadoo waafa san sunnaha Ilaahay ee joogtada ah – dedaal aadan oo ku eg xuduudda karaanka aadamiga. Waxay arrintaas hore u dhacday inna tusaysaa inay suuro tahay inay soo noqoto. Gobanimadii xilligaasi iy raadadkii ay kaga tagtay nolosha aadamiga iy waaqaca taariikhiga ahba dhammaantood waa arrin saacidaya halgan cusub.

* * *

Wuxuu xilligaasi karay inuu ku sugo nolosh aadamiga caadoyin hawlgal leh, iyo dhigaallo waaqi ah, oo salka ku haya mabaadiidaas, aragtiyoha iyo miisaamiddaas, Taasina kumay dhimanin lama waayin markii xilligaasi dhammaaday. Laakiin wax isku fidiyeen sidii daad socda, oo ku shubmaya meel fog oo dhulka ah, iyo xilliyo isdaba-joog ah. Waxay noloshii aadamiga oo idili – si kastaba ha noqotee wuxuuna noqday kayd banii'aadminimada oo idil Taaso ay nuugaysay oo ay ku noolayd muddo ku



sano ka badan. Kaydkaasoo soo jiidanaya aragtiyaha, jiidanaya dhaqaalaha iyo cammiraadeedaba jiidanayana ilbaxnimadeeda si buuxda. Waxayna ka hawlgelaysaa cidhif kasta oo dhulka ah. Raadadkii ay ka tageen waxay weli soo jiidanayaan nolosha aadamiga ilaa maantadaas aynu joogno, tiiyoo ay jiraan dhammaan xoogaggii daadkan is-hortaagayey iyo tiiyo ay jiraan u noqoshadii reer qalbeedka – ka taaliyey arliga oo idil muddo go'an, u noqdeen jaahilyaddii giriigga, iyo jaahiliyaddii roomanka. Waxaana nolosha banii'aadmiga loo sameeyey oo dhaafsiisan jiidashadoodaas waaqiciga ah, mabaadii, qiimeynno, aragtiyo, dhigaallo aan ilaa maantadaas la ogeyn halkii u asalka ahaa ee ay ka yimadeen iyagoo ku noqonaya meelo kale aan ahayn habkani. Laakiin ma adka in la ogaado asalkoodii hore ka dibna lagu soo celiyo habkaasi Ilaahiga ah, Inay la hawlgalaan, qaybna ku yeeshaan raadadka nolosha aadamiga. Maqaalad kale ayeynu kaga hadhi doona tallaabooyinkii balaadhnaa ee ay aadaminimaduna soo qaaday sidii loo hirgelin lahaa jidkaasi maanta lagu sugan-yahay. Taaso markii ugu horreeyey ee u Islaamku soo baxay aad u diidday isna hor-taagtay muddo laga joogo saddex iyo boqol oo sano iyo dheeraad Waana suurogal, iyadoo ay ugu wacantahay tallaabooyinkaasi laga soo qaaday nolosha aadaminimada, ugunaa

wacantahay xaladda maanta ay ku sugan-taha aadaminimadu guud ahaan, inay maanta ugu dhow dahay inay fahanto habkan Islaamka, uguna karaa weyntahay, haysatana kayd waaqici ah oo ay k dhaxashay mawjadihii hore, taasoo ayna haysan na markii ugu horeeyey ee ay timid . Waxa kaloo ay haysataa kayd tijaabooyin u gaar ah. o ay ka heshay xilliyadii laga leexday lagana fogaad habkani, iyo wax-yaalaha maanta taagan ee ay geysatay leexashadaasi iyo ka fogaantaasiba. Waxyaa lahassi ayaa ah kana mid ah waxyaalaha saacida in la aqbalo oo la qaato habkan Ilaahiga ah, inn inna siinayana sabir iyo dulqaad loo yeesho halgank soo socda. Ilaahay indankii.

* * *

# V

# KAYDKA FIDRADA

Markii ugu horeysay ee uu Islaamku yimid wuxuu waajahay waaqaca ballaadhan. Oo ah kii jasiiradda Carabta iyo kii arliga oo idilba. Waxaa jiray oo hortaagnaa caqiidooyin, aragtiyo, qiimeynno, mii-saamid, habab, dhigaallo, masaalix iyo afaaraqabiil. Markii ugu horeeyey ee uu yimid, fogaanta u dhexay-say Islaamka iyo waaqaca dadka ku nool jasiiradda Carabta iyo aaduunkuba waxay mid aad u ballaadhan oo dheer. Geeddiga loo baahnaana wuxuu ahaa mid aad u fog. Xaaladdahaasi dhabta ah waxaa weheli-nayey qarniyo taariikh leh masaalix kale geddisan, xoogag noocyo badan oo dhammaantood ku ahaa hor-joogsi diintan cusub ee aan ku koobnayn inuu bedelo caqiidooyinkaasi, aragtiyohaasi, qiimeyntaasi, miisaamiddaasi, caadooyinkaasi, dhaqankaasi, aslu-ubtaasii, dareenkaasi oo keliya ee weliba doonayey inuu bedelo, nidaamyada, Dhigaalada, sharciyada, qawaaninta, qaybinta hantida iyo maalka. Wuxuuna aad ugu dedaalayey inuu ka saaro hoggaaminta dadka gacanta qawlaystada jaahiliyadda kuna soo celiyo Ilaahay iyo Rasuunlkiisii. Haddii qof xilligaasi

joogay lagu odhan lahaa, Diintan cusub ee isku daya waxaasi oo idil iyadoo ay horjoogto waaqacaasi muuqda ee xooggan ee haysta awoodda dhulka oo idil waa ka guuleysan doona, waana ka beddeli doona waqacaasi muuqda in ka yar qarni badhkii, wuxuu hadalkaasi kala kulmi lahaa uun ku dheel-dheel ku jees-jees iyo cay. Laakiin waaqacaasi muuqday inyar ka dib, dib-ugurasho ayuu ka sameeyey goob-tiisii si uu ugu banneeyo hoggami-yahan cusub. In yar ka dibna hoggaami-yahaasi cusub wuxuu gacanta ku dhigay hoggaamintii aadaminimada si uu mugdiga uga saaro, Iskuna xukumaan sharicada Ilaahay, iyadoo la hoos hadhsanayo calanka Islaamka. Hadba sidee bay u dhacday? Wuxuuba uu muuqday wax aan suurgal ahayn, ka uu indhasarcaadiyey waaqacu, tirtirayna culayskiisu isagoo miisaamaya arrimaha iyo dhigaalada. Sideebay suurgal u noqotay in qof keliyi – Maxammed Bin Cabdillaahi – *N.N.E.K.H.A* – inuu is-hortaago keligi adduunka oo idil, ama ugu yaraanba jasiiradda carabta oo idil markii ugu horreysay? Ama ugu yaraan quraysh oo ahayd saadadii Carabta oo idil markii uu bilaabayey dacwaddiisa? ama caqiidooyinkaasi, aragtiyahaasi, qiimeynnadaasi miisaamiddaasi, nidaamyadaasi, dhigaaladaasi, masaalixdaasi, afaraqabiilkaasi kadibna uu waxaasi oo idil uga guuleystay.



Dhammaantoodna bedelay. Taageyna nidaam cusub, oo salka ku haya habkan cusub, iyo aragti cusub.? Umuu tamalluqin caqiidooyinkoodii iyo aragtiyohoodii, kamanuuna hawaysan Ilaahyadoodii iyo madaxdoodii, hoosna iskumuu dhigin si uu ugu meelgaadho. Ugu horeyntiiba waxaa la faray inuu ku yidhaahdo isagoo maka jooga ay ka soo wada horjeedaan xoogaggaasi oo idil.

**« Dheh. Gaalayahay. Ma caabudayo waxaa caabudaysaan. Idinkuna ma caabudaysaan waxaan caabudayo. Anguna ma ihi mid caabudaya waxaa caabudeen. Idinkuna ma caabudaysaan waxaan caabudaayo. Idinkuna waa idinku diintiina. Ann waa igu diintayda. »**

Kamuu gabban inuu u caddeeyo kala durugsanaanta diintiisa iyo diintooda, cibaadadiisa iyo cibaadadooda. Iyo inay u dhaxayso meel aan loo kala gudbi karin. Waxaa la faray inuu ugu quus gooyo inayna suurogal ahayn inay mustaqablkana isku iman karaan. Sidaasaanu ugu cel-celiyey

**« Ma ihi mid caabuday waxaa caabudeen. Idinkuna ma caabudaysaan waxaan caabudayo».**

Waxaan la faray in ku cel-celiyo inay kaaf-iyo-kaladheeri yihiin, oo ay u dhaxayso:

**« Idinkana waa idinku diintiinna anna waa igu diintayda ».**

Uguma nuuna faanin inuu ku andacoodo inuu leeyahay awood qarsoon, iyo waxa aanu banii'aadmigu lahayn-toona iyo sir u qarsoon-toona. ee waxaa la faray inuu ku yidhaahdo:

**« Dheh. Idinkuma lehi waxaan haystaa khasnadihii Ilaahay. Qaybkana ma ogi. Idinkumana lehi waxaan ahay malag. Waxaan raacaa oo keliya waxaa laysoo waxyoodo ».**

Ugumanuu ballan-qaadin manaasib iyo hantitoona kuwa raaca. Markii uu la dirirayey kuwa diidanaa. Wuxuu ibna Isxaaq yidhi:

**« Wuxuu nebigu** *N.N.E.K.H.A* – **Isku soo bandhigay qabaa'Ilkii waqtigii xajka isagoo leh.**

**« Reer hebelow, anigu waxaan ahay Rasuulkii Ilaahay idiin soo diray, wuxuuna idin farayaa inaad isaga caabudaan, oo aydaan waxba ula sharikyeelin. Iskana dhaaftaan waxaa caabudaysaan ee aan isaga ahayn. Aammintaan in rumaysaan ina gargaartaan si aan idiinku caddeeyo wixii Ilaahay ii soo xil-saaray ».**

Wuxuu Ibna Isaaq yidhi:

**« Wuxuu ii sheegay al-zhri in nebigu** – N.N.E.K.H.A – **U tegay qabiilka reer banii caamir binu sacsaca: Uguna baaqay inay Ilaahay caabudaan ».**

Iskuna soo bandhigay. Markaasi ayuu nin iyaga mid ah mid ah oo la yidhaahdo Bayxara binu



Faraas ku yidhi: – Ilaahaan ku dhaartee Hadii aan Quraysh ka gaato ninkaasi, carab oo dhan waa liqi lahaa. Markaasuu haddana weydiiyey. « Haddii aanu ku dooranoo uu Ilaahayna kaa siiyoo guusha cadowgaaga, xukunka dabedaa ma yeelanaynaa? Nebigu *N.N.E.K.H.A* Wuxuu ku Jawaabay: Ilaahay amarka iska leh, wuxuuna dhigayaa meeshii uu doono. Wuxuu yidhi markaasuu ka yidhi » Waxaa doonaysaa inaan la dagaalanno Carab, haddii uu Ilaahay ku gargaarana aanaan xukunka annaaku yeelanin. Baaqaaga ma rabno. Markaas ayey diideen. Hadaba sideeday u dhacday arrintaasi. Sideebuu qofkaasi keliyi uga xoog batay waaqacasi oo idil. Kagamuu guuleysan mucjisad lamarag ah oo aan soo noqonayn. Waayo wuxuu ku dhawaaqay in aanu goobtani ugu hawlgalayn si mucjiso ah. Mar keliyana kamuu jawaabin dalabkii ay ka doonayeen mucjsad. Ee arrintaasi waxay sidaasi ugu dhacday si waafaqsan sunnada joogada ah ee soo nognoqonaysa mar allale markii ay dadku qaataan ee ay u hoggaansamaan. Guushaasi habka Ilaahiga ahi waxay u dhacday waayo waayo waxay la kaashatay – waaqacii muuqday dabadii – kaydkii fidrada qarsoon. Kaydkaas oo ah sidaynu horeyba usoo sheegnay mid aad u ballaadhan oo aanu jebin karin qiiqaasi muuqdaa, marka la sii

daayo, la kulmiyo, la toosiyo, laguna aadiyo jiho go'an.

* * *

Caqiidooyin kharriban oo leexsan ayaa hantiyey damiirka banii'aadmiga xilligaasi, waxaana buuxiyey daaradii kacbada Ilaahyo yar-yar oo been ah. Kuwaasoo sidoo kale hantiyey maskaxdii iyo quluubtiiba Masaaliixdo qabaa'ilka iyo dhaqaalahooduba wuxuu salka ku hayey Ilaahyadaasi yar-yar ee beent ah. Waxaana ka dambeeyey masuuliyiin iyo faaliyayaal. Iyo dhigaalada dadka u degsan, halkaasi oo ay ku soounkamaysay astaamaha Ilaahnimada ee aadamigu dhexdiisa ka yeeshay iyo masuulyintii iyo faaliyaashii oo la siiyey xaqa u sharciyeynta aadamiga iyo dejinta habka nolosha. Islaamkii ayaa yimid isagoo ku waajahaya waaqacaasi **« Laa Ilaaha illa Allaah »** Lana hadlaya fidrada aan garanayn Ilaah kale Ilaahay mooyaane. Wuxuuna dadkii baray Rabbigooda xaqa ah, astaamihiisa, Sifooyinkiisa, ay garanayso fidradoodu, ee hoos uga dhadhacsan.

**« Dheh, ma waxaan Ilaahay ahayn ayaan ka dhigtaa weli, Ilaahoosoo abuuray samooyinka iyo arladaba isagaana wax quudiya ee lama quudiyo? Dheh waxaa la i faray in aan noqdo kii ugu horeeyey ee Islaama. Hana ka mid noqon mushrikiinta. Dheh**



**waxaan ka baqanayaa haddii aan Ilaahayga caasiyo cadaabta maalinta weyn kii maalintaasi uu ka duwaa waa uu u naxariistay. »**

Waana Taasi liibaanta weyni. Haddii uu Ilaahay dhibaato idin gaadhsiiyo waxa aan isaga ahayn oo idinka dul-qaadi karaa ma jiro. Haddii uu khayr idiin keenana isagu wax walba wuu karaa. Addoomadiisana wax walba wuu u awoodaa. Waana xakiim khabiir ah. **Dheh** ; Maxaa ka weyn marag? **Dheh** Ilaahbaa aniga, iyo idinkaba inoo marag ah. Waxaana lay soo waxyooday Quraankan inaan idiinku digo iyo kii uu gaadhaba. Ma waxaad caddaynsaan in Ilaahay ay la jiraan Ilaahyo kale? **Dheh.** Ma cadday-nayo. **Dheh.** Waa Ilaah keliya uun, aniguna beri baan ka ahay waxaad ugu shariig yeelaysaan». *Al-Ancaam* : 14–19

**« Dheh waa lay diiday inaan caabodo wax aan Ilaahay ahayn. Dheh. Ma raacayo hawooyinkiinna. Hadii aan raacana waan lumay mana ahi kuwa hadaysan. Dheh war cad ayaan ka haystaa rabbigayga. Waanad beeniseen. Waxba igama gelin waxaa aad ku degdegaysaan. Xukanka Ilaahay uun baa iska leh. Wuxuuna sheegayaa xaqa. Wax wax kala caddeeyana isagaa ugu roon. Dheh haddii aan haysan lahaa waxaa aad deg-degsanaysaan, arrintuba aniga iyo idinka innaga dhexaysaa wayba**

dhammaan lahayd. Ilaahay isagaa u aqoonbadan daaliminta. Furayaasha qaybkana isagaa haysta. Wax aan isaga ahayn oo ogina ma jiro. Wuxuuna ogyahay waxa berri iyo badba ku nool. Warqad yar oo dhacda xataa waa kii og. Hal xabbo oo dhextaalla mugdiga dhulka ama wax kastoo qoyaan iyo qallaylba leh waa kii ay ugu qoranyihiin kitaab cad. Waana ka habeenkii idin dheelmiya ogna waxaad maalintii gudateen. Waana ka idin soo saara si uu u dhammeeyo arrin go'an. Isagaanaydun u noqon. Wuxuuna idin sheegi wixii aad qaban jirteen. Isagaana addomadiisa ka gacansarreya. Wuxuuna idiin soo diraa wax idin Ilaaliya ilaa marka uu mid idinka, mid ah u timaaddo dhimashadii ayey qaadaan kuwa aan soo diray mana moogaadaan. Waxaana loo celiyaa Ilaahay, mawlahoodii xaqa ahaa. Miyaanu xukunka iska lahayn. Wax xisaabana isagaa ugu dhakhso badan. Dheh yaa idinka nabadgelinayaa mugdiga barriga iyo baddaba. Waxaad u yeedhaan si ishoosdhig ah iyo siqarsoonba. Waxaanad tidhaahdaan haddii uu naga nabadgeliyo tani, waxaanu ka mid noqon kuwa mahadnaqa. Dheh isagaa kara inuu idin soo saaro cadaab korkiinna iyo luguhiinna hoostoodaba ama uu idinku wareeriyo qoloqolo si uu idin dhedhansiiyo dhibaatada qaarba qaar ku hayaan. Bal eeg sida



aanu kuugu caddaynaynno aayadaha waa in taasooy fahmaan eh ».

*Al-Ancaam :* 56 – 65.

Fidradu waxay dhegaysatay dhawaaqaasi qadiimka ah, ee kala hadlaya waaqacaasi culus dabediisa iyadoo lagu dhex jiro hallowgaasi ballaadhan. Waxayna ku noqotay Ilaaheedii keliya. Dacwadii cusbayd waxay ka guuleystay waaqocaasi culus.

* * *

Markii ay dadku ku noqdeen ilaahoodii keliya waxaa la waayey in dad dad caabudo dhammaanna madaxa ayaa sare loola wada kacay, maalintii ay madaxyada oo idil u foorarsadeen. Ilaaha keliya ee ka gacan-sarreeya addoomadiisa. Waxaana dhammaaday afaara-qabiilkii iyo dhiiggii laysku kala fadili jiray, jinsiyadihii laysku kala fadili jiray, iyo dhaxaltooyadii xukunka, sharafka iyo wejigaba. Laakiin sideebay taasii u dhacday? Waxaa meesha jiray waaqac ijitmaaci ah oo ay ka dambeeyaan masaaliix daba-qadeed, mid afaara-qabiil, mid maadadeed iyo mid macnawi ahiba. waaqacaasi ka talinayey jasiiradda Carabta kana talinayey arliga ku xeeran oo idil. waaqacaasi oo aanu ninna ishor-taagi karin. Waayo kuwa faa'iidada ku qaba may ka daalin, kuwa ku hoos noolna kamay gilgilan karayn. Waxay

quraysh isku magacaabi jirtay « **Laandheeranimo** » Waxayna isa siisay xuquuq, iyo caadooyin aanay Carab oo idili lahayn. Marka xajkana waxay istaagi jirtay Musdalifa, tiiyo dadka idil oo kalena joogsan jireen « **Carafa** » Iyagoo haysta danahaasi oo idil, waxaa u sii dheeraa dano dhaqaale oo Carabata idil oo kale kaga gacan-sarreeyaan. Waxayna qasab ka dhigi jireen inaan kacbada lagu wareegin iyadoon la gashanayn dharka quraysh laga iibsado, haddii kalena lagu wareego iyadoo la qaawanyahay. Dhammaan agagaarka jasiiraddu waxay ka gunuusi jireen kala-soociddaasi dhiigga iyo jinsiyadda laysku kala fadilayo. Bulshada iiraan waxay salka ku haysay tixgelinta nasabka iyo xirfadda. Waxaana u dhexeeyey dabaqadaha kala fogaansho aanad malayn karin. Waxayna u diidi jirtay dadweynaho qof ka mid ahi inuu iibsado wuxuu leeyahay Boqorka ama duqeytidu. Waxaan saldhigga Saasaaniyada ka mid ahaa inuu qof walba ku qanco kaalinta uu nasabkiisu u oggolaaday. Haweysanna wax ka sarreeya. Qofna inuu qaadan kari-jirin xirfad aan ahayn taasi Ilaahay u abuuray. Boqorrada iiraanna hawl keliya oo shaqadooda ka mid ah may u oggolaan-jirin qof caadi ah. Dadweynuhuna sidoo kale waxay lahaayeen dabaqado qaarba-qaar ka geddisanyahiin – mid walbana meel go'an ayuu aadanaa bulshada. Boqorada Faarisna waxay ku andacoon-jireen in xididdadooda uu dhex socodo dhiig Ilaahi ahi. Furusna waxay u eegijireen sidii Ilaahyo oo kale. Waxayna rumaysnaayeen in dabeecaddooda uu ka mid yahay walax-sarreeya oo muqaddaas ahi. Waxayna baryi-jireen inay (Qasaa'id) Ilaahyadooda. Waxayna ula muuqdeen sidii dad qayra-caadi ah oo ka sarreeya banii'aadmiga ka sarreeya sharciga, kana sarreeya doodda. Magacooda lama soo hadal-qaadi-jirin, qofna muu ku fadhiisanjirin meeshood. Waxayna rumaysnayeen inay xaq ku leeyinhiin qof-kasta. Dadkuna ayna xaq ku lahayn iyaga. Wax alliyaale wixii maal iyo hanti ah ee ay weydiistaan qofna wuxuu ahaa waajib aan la diidi karin ta keliya ee dadka u furana, waa in ay yeelan un hoggaansamaan. Gaar-ahaan guriga gaar ah – kaasoo Guriga « **Kayaani** » Waxayna rumaysanayeen in afraaddaasi oo keliya ay xaq u leeyihiin inay gashadaan Taajka, xaddidaanna Cashuurta, Xuquuqdaasina wuxuu u gudbiyaa min Oday iyo wiilkiis, iyo aabbe iyo awowgiis. Waxaana kula doodikara nin daalimah uun. Waxaana kula andcoon-kara mid dulliya uun. Waxay aamminsanaayeen Boqorka, iyo dhaxaltooyada reer boqor. Wax beddel ahna may dooni-jirin. Haddii ay qoyskaasi ka waayaan qof-weyn, waxay boqri-jireen Ilma carruur ah. Haddii ay waayaan ninna waxay boqri-jireen Naag. Kadib

shrwayah waxay boqreen inankiisii ardashiir oo todoba sanno-jiray Sidoo kale Furakh-Zaad Khosro bin Kisra-Abruweys waxaa la boqray isagoo dhallaan ah. Waxay kalooy boqreen Boraan oo ina Kisra ahayd Sidoo kalena Inantii Kisra ee labaad ee la odhan-jiray Azarmi-Dukht waa la boqray. Marnabana kumay soo dhicin inay boqradaan hoggaamiye weyn, ama madax, madax-dooda ka mid ah. Sida Rustum oo kale iyo Jaabaan iwm. Waayo may ahayn reer boqor. Habka dabaqadaha ee Hindya wuxuu ahaa kuwa ugu fooshaxun ee ugu qallafsan marka la eego wuxuu dadku ku samaynayo. Saddex Qarni ka hor dhalashadii Nebi Ciise, waxaa Hindiya ku caanbaxay Ilbaxnimadii Brahman, Kaasi oo weji cusub u keenay bulshadii Hindiga ahayd. Waxaana la abuuray qaynuun reer-magaal oo siyaasi ah layskuna waafaqay. Wuxuuna noqday qaynuun rasmi ah oo salka ku haya diinta, marka la eego nolosha iyo reermagaanimadeedba, waxaana immika loo yaqaan Manuushastar. Qaynuunkaasi wuxuu dadka u kala qaybiyey afar dabaqadood oo kala-nooc ah. Kaasoo ah:

1. Dabaqadda Baraahimada – Faaliyayaasha iyo Ragga Diinta.
2. Dabaqadda Shatari – Ragga Daggaalka.



3. Dabaqadda Waysh – Ragga Beeraha iyo Tijaaradda.
4. Shudri – Shaqaalaha.

Manuu oo ah ninkii qaynuunkan sameeyey wuxuu yidhi:

Ka qaadirka ah ee awoodda lahi wuxuu maslaxadda dadka awgeed ka abuuray Baraahimada afkiisa, Shatarina Qacnitiisa, Wayshna Bawdadiisa, Shudrina Lugihiisa. Wuxuuna u qaybiyey xilkooda iyo waajibaadka masaalixda arliga awgeed **Baraahimadu** waa inay dadka baraan «**Weyd**» (Kitaabka) ama ay siiyaan Ilaahyada Badar bixiyaanna sadaqada.

*SHATARINA* waa in uu dadka Ilaaliyaa, bixiyaan Sadaqada, dhiibaana Nadarka baraan Weyd (Kitaabka) kana dheeraadaan Shahawaadka.

*WEYSHNA* waa iany daajiyaan xoolaha, kana shaqeeyaan hawlaha xoolaha, akhriyaan *Weyd.* Kana shaqeeyaan hawlaha Ti-jaaradda iyo beeraha.

*SHODARINA* Waxaa keliya ee furani waa inuu u shaqeeyo saddexdaasi dabaqadood. Wuxuu qaynuunkani siiyey dabaqadda Baraahimada xuquuq gaarahaaneed oo ka dhigtay Ilaahyo yar-yar. Waayo wuxuu yidhi: – Barahimada waxaa doortay Waana boqorada khaliqiga, waxa caalamka oo idil yaallana iyagaa iska-leh. Waayo iyagaa dadka ugu fadli badan waana saadada dhulka. Wax alliyaale wixii xoolo ah

ee ay ka qaataan maalka addoomaadooda Shudruba ma aha dembi waana furnayay. Waayo aadoonku waxba ma laha. Hantidiisa oo idilna waxaa iska leh sayidkiisa. Barahmanka marinaya Ruweyd (Kitaabka) waa mid loo dembi dhaafay. Xataa haddii dembigiisa iyo falkiisba ay saddexda adduunyo rogaan. Boqorduna looma oggola, xataa haddii aad loogu baahdo inuu wax Cashuur ah ka qaado Baraahimada, ama uu weydiiyo wax Cashuur ah. Lamana oggolayn inuu qof barahman ahi gaajo awgeed u dhinto. Haddii Barahman ku waajibo dil, looma oggolayn ninka xaakimka ah ilaa uu xiiro madaxiisa, ama mid kale oo markaas la dilo. Shatariguna inkastoo ay ka sarreeyeen labada dabaqadood (Weysh, Shodari) Laakiin may ahayn sida Baraahimada. Wuxuu, Manuu yidhi: – Wiilka Baraahimada ah ee tobanjirka ahi wuu ka sarreeyaa odayga Shatariga ah ee boqol jirka ah, sida uu waalidku uga sarreeyo wiilkiisa. Shoodarigana – Lamataabtayaasha – waxay ku dhex jireen bulshada Hindiga – iyadoo lagu socdo qaynuunkaasi rayadka ah ee diineed, Iyagoo ka hooseeya xataa xolaha, kana dullaysan eeydda. Wuxuuna qaynuunka caddaynayaa.

« Waa danta shydraha inay u shaqayso barahimada. Wax ajar iyo abaalmarin toona oo ay ka rabaanna ma jirto. Mana aha inay maal shaqaystaan, hantina



kaydsadan. Waayo taasi waxay dhibaysaa baraahimada. Haddii uu qof shudri ahi gacantiisa u taago ama ulba si uu wax u yeelo barahman waa la gooyn jiray gacantiisa. Haddii uu si cadho leh u laadana waxaa la xanuujin jiray lugtiisa. Haddii uu hawaysto shudri inuu la fadhiisto barahman, waa inuu boqorku maddane kaga gubaa dabadiisa, ama uu ka xarrima oo uu u diidaa waddanka. Haddii uu gacan taabsiiyo ama uu aflagaadeeyna waxaa laga jaraya carrabka. Haddii uu sheegto inuu garanayo qof Barahman ahna waxaa la cabsiinaya saliid karaysa oo kulul. Magta laga bixiyo ayga, bisadda, raha, mulaca, guumeysta iyo ta qofka shudriga ah isku mid ayey ahayd. Ilbaxnimadii roomanka ee caanka baxay waxay salka ku haysay raaxo ay addoomadu oo ahaa saddex dalool oow dalool siinayeen boqorada oo ahaa rubuca soo hadhay. Qaynuunka naftiisu wuxuu kala sooci jiray addoomada iyo saadada wuxuuna kala kormarin jiray dabaqadaha sharafta leh iyo kuwa hooseeya. Sharciga caanka ah ee justinyan waxaa ku qoran – «Qofkii kufsada naag carmal ah, oo qumman ama qurux badan. abaalmarintiisu waa – Haddii uu ka dhashay guri sharfan, in laga qaado hantidiisa badhkeed, haddii uu ka dhashay guri hooseeyana in la karbaasho lagana caydhiyo dhulkaba. Tiiyo waaqacaasi ka taliyo dhulka oo idil, ayuu Islaamku kala

hadlayey fidrada waaqaxa hoostiisa. Fidradaasi oo waxaasi oo idil diidaysay aan aqoonna. Oggolaansha fidrada ee baaqa Islaankuna waxay ahayd mid ka xooggan waagacaasi culus. Waxay fidradu maqashay Ilaahay oo dadka oo idil ku leh:

**Dadyahow waxaanu idinka abuurnay lab iyo dheddig, waxaanan idinka yeelnay shucuub iyo qabaa'il si aad isku kala garataan. Run-ahaantii xagga eebbe waxaa idiinku sharaf badan, ka ugu alle cabsi badan.**

Waxayna maqashay Ilaahayoo gaar ahaan ku leh quraysh:

**« Uroorka (xajka) halka ay dadka kaleba u rooreen. Waxay maqashay Rasuulkii Ilaahay** – *N.N.E.K. H.A* – **oo ku leh dadka ».**

Dadyahaw, Rabbigiinnu waa hal, aabbihiinna waa hal. Dhammaantiin aadanbaa idin dhalay, aadamna waxaa laga abuuray dhoobo Ilaahay agtiisana waxaa idiinku sharaf badan ka ugu Alle Cabsi badan. Carab kama sareeyo Cajam. Cajamna kama sareeyo Carab. Mid casna kama sarreeyo mid cad. mid cadna kama sarreeyo mid cas. Waxa keliya ee lagu sarreeyaa waa Alle ka cabsi « Waxay kaloo maqashay isagoo quraysh ugu leh gaarahaan: – Reer Qurayshow! Naftiinna iibsada, waayo waxa aan Ilaahay idinka xigaa ma jiro. Reer Cabdi Manaafowna wax aan Ilaahay idinka xigaa ma jiro waar Cabbaas bin Cabdilmuqdalib-aowna wax aan Ilaahay ka xigaa ma jiroo. Faadumo ina Muxammed ceayna. Wax allaale waxaad doontid iga weydiiso xoolahayga. Waayo wax aan Ilaahay ka xigaa ma jiro. Waxay fidradu maqashay baaqaasi waanay u jawaabtay. Waxayna ka gil-gilayay mugdigii waaqacaasi. Waxayna la soctay habkaasi Ilaahiga ah. Waxaana dhacay tii dhacday iyadoo waafaqsan sunnadii Ilaahay ee dhici karta xilli kasta.



* * *

Habka ribada leh ayaa ka talinayey jasiiradda Carabta. Taasibaanu salka ku hayey dhaqaalihiisa aasaasiga ahi. Qofna yaanu u malayn inay ahayd mucaamalooyin fardi ah oo ku eg xuduud cidhiidhi ah. Waayo waxay qurayshi la lahayd tijaarad ballaadhan shaam xilliga gu'ga, Yamanna xilliga jiilaalka Waxaana tijaaraddaasi lagu maamulayey hantidii Quraysh. Loomana baahna inaynu Ilowno safarkii Abuu Sufyaan ee ay Muslimiintu dooratay dirirtii Badar ee ka baxasatay Ilaahayna ugu bedelay wax ka khayr badan waxay ka koobnayd kun awr oo ay ku rarnyihiin alaabo. Haddii ribadu ahayd uun Mucaamalaad fardi ah oo xaddidan oo aanay ahayn nidaam koobay nolosha dhaqaalaha oo idil kamay

Istaahisheen celcelinteeda farabadan ee quraanka ku soo noqnoqonaysa. Axaadiista Rasuulkuna – *N.N.E.K.H.A* – sidoo kale ugumay noqnoqdeen Habkaasi tijaaradeed, iyo dhaqdhaqaaqaasi ku qotomaa dhammaantood waxay salka ku hayeen habkaasi ribada ah. Ka hor soo baxa Rasuulkana – *N.N.E.K.H.A* – Iyada ayey ayey ku soo ururayeen dhaqaalaha dalka oo idili. Sidoo kale ayey nolosha Madiinina ahayd. Hantidana Yahuudda ayaa iska haysatay. Ribaduna waa gundhigga dhaqaalaha Yahuudda. Kaasi ayuu ahaa waaqaca dhaqaale ee ay nolosha dalku ku qotontay. Markaasi ayuu yimid Islaamku. Wuxuu yimid iskagoo inkiran habkaasi eedaysanaha ah ee dulmiga leh. Wuxuuna beddelkiisa soo garab dhigay hab kale. Kaasoo ku qotoma Zako, amaah fiican, gargaar, iyo Iskaashi isku-midah.

**« Kuwa bixinaaya maalkooda, habeen iyo maalinba, si qarsoon iyo si cadba, waxay abaalmarintooda ku leeyihiin Ilaahay agtiisa, baqana korkooda ma aha, mana murugoon-doonaan. Kuwa cunaya ribada uma kacayaan sida uu u kacayo mooyaane ka uu. Kuwa maalkooda u huraya si garsson iyo si cadba habeen iyo maalinba waxay ajarkooda ku leeyihiin Ilaahay agtiisa baqo iyo murugotoona korkooda ma'aha. Kuwa ribada cunayaa uma kici doonaan sida uu u kaco qofka shaydaan kufaa-kiciyey mooyaane. Taasina waxaa ugu wacan inay yidhaahdeen – Iibku waa ribadoo kale. Ilaahayba wuu xalaaleeyey iibka, wuuna xaaraantimeeyey ribada. Kii ay digniin rabbi ugu timaaddo ee iska dhaafa. Wixii hore isagoo leh. Arrintiisana Ilaahbaa ku shuqul leh. Kuwii ku noqotaana waa reero nareed wayna ku waari-doonaan. Ilaahay wuu tirtirayaa ribada wuuna korinayaa sadaqada, Ilaabayna ma jecla gaal kasta oo dembiile ah. Kuwa Ilaahay rumeeyey ee wanaagana faray, salaadana oogay sakadana bixiyey waxay ajarkooda ku leeyihiin Ilaahay agtiisa. Baqe iyo murugo-tonna korkooda. Kuwa Ilaahay rumeeyey-aow Ilaahay ka cabsada oo ka fogaada wixii ribada ka hadhay haddii aad muuminiin-tihiin. Haddi aydaan sidaas falina u diyaar-garooba daqaal xagga Ilaahy iyo Rasuulkii siiidinkaga yimaada. Haddii aad toobbad keentaana waxaad leedihiin hantdiinnii hore idinkoon laydin dulmin waxabana aan dulmin. Haddii ay adagtahayna fududaanta eega, haddii aad sadaqaysantaanna iyadaa idiin khayr badan. Haddii aad ogaanlahaydeen. Kana cabsada maalin aad xagga eebbe u noqonaysaan. Naf-Walibana la soo hor-dhigi wixii ay galabsatay, iyadoon waxba laga dulmin.**

*Al-Baqra*: 274 – 281



Waxayna fidradii heshay inay dacwada Ilaahay

ka khayr badan-tahay waxay ku dhex-jirto. Waxayna ka yag-yaqsootay habkaasi qarriban ee ku qotomo Nidaamkaasi Ribada ah. Tiiyo ay jiraan dhibaatooyinka badan ka guuridda dhigaalka dhaqaalaha ee ay ku qotonto nolosha dadku, hadana qaadashada fidradu waxay ahayd mid ka xooggan culayska « Waaqaca » kana nadiifinaysa bulshada Muslinka wasakhdii jaahiliyadda. Waxaana dhacay wixii dhacayiyadoo waafaqsan sunnadii Ilaahay ee soo noqnoqota mar allaale marka ay fidradu iska soo saarto oo ay ka timaaddo qiiqa iyo xumaanta jaahiliyadda.

* * *

Maqaaladdani waxaynu ku ekaanaynaa Saddexdaasi tusaale ee ay fidradu kaga guuleysatay waaqaca. kagana soo dhex-baxday qiiqii caqiidada mugdigeliyey, iyo ka guuleysigeedii. Waaqaca dibedda ee ay abuurtay jaahiliyaddu, iyadoo matilaysa waaqaca caqiidada iyo aragtidaba, waaqaca dhigaalada iyo caadooyinkaba; waaqaca dhagaalha iyo mucaamaladaba. Kuwaasi oo ah noocyada ugu xoogan « Waaqaca » ay arkayaan kuwa aan dareemayn xoogga caqiidada, iyo xoogga fidrada, sidiiyoo uu yahay xaqiiqadii wax tirtiraysay ee aanay is hortaagi karin fidradu iyo caqiidaduba. Islaamku muu laabannin gacmihiisa si uu iskudhiibo waaqacaasi. Laakiin wuu



joojiyey ama wuu beddelay, wuxuuna ka taagay meeshiisii dhismihiisaasi la yaabka leh ee gaarka ah, isagoo ku qotoma asaaskiisaasi xoogan ee qotodadheer. Wixii mar dhacayna waxaa suurogal ah inuu mar labaad dhaco. Waayo arrintii dhacday waxay u dhacday iyadoo waafaqsan sunnadaasi socota, ee aan ahayn mucjisad aan caqliga geli-karin. Wuxuuna dhismahaasi ku qotomay kaydka fidrada ee uu kaydsan qof-kasta oo kaydkani ka faa'iidaysanaya, ururisnaya, toosinaya kuna sii deynaya jihadaasi saxa ah. Banii'aadminimada maantuna waxay noqon kartaa mid ugu karti badan jihaadaasi saxa ah. Waayo waxaa u yaalla raadadkii ay raacii ugu horeeey ee islaamku soo mareen iyo jidkii ay faleen. Kuwaasoo ay ka hor-yimaaddeen caaridaaddii ugu xoogannayd haddana jidkeedii ku socday, kana tagay raadadkii ugu qotoda-dheeraa.

* * *

# VI

# KAYDKA WAAYO-ARAGNIMADA

Markii uu Islaamku ka hor-yimid banii'aadminimada – markii ugu horreysay – wuxuu waaqacaasi kaga hor-tegayey kaydka fidrada oo keliya. Kaydka fidraduna wuxuu la socday diintan, tiiyo ay jiraan qarniyo badan oo la soo maray oo lagu dhexnoolaa foolxumada waaqaca jaahiliga ah ee isdul-buxsamay. Laakiin waxaa ka xooggana ka fidrada, iyadana ku filnayd inuu Islaamku iska-hor-qaado hor-joogsiyadaasi. Waxay ahayd xilli layaab leh fig aad u dheer wuxuuna kaasi ahaa facii gaarka ahaa. Taasoo ahayd bar-tilmaameedkii ifayey. Sidaynu horeyba u nidhi waxay ahayd mid ka mid ah qadarka Ilaahay, kana mid ah maamulkiisa, si ay suuraddaasi gaarka ahi looga hir-geliyo dhigaal nololeed oo dhab ah. Kaasoo ay suuragaltahay – wixii dambena – in lagu soo noqdo suuradeedaasi waaqaca ah, layskuna dayo in la soo cel-celiyo xilliyada kala geddisan, hadba siduu iskugu diyaariyo aadamigu. Ma ahayn oo keliya mid ka dhalatay bii'addaasi oo dabiici ah. Laakiin waxay



ahayd midhihii kaydka la ururay fidrada, markii la helay habkii, hoggaankii, barbaarintii, dhaq-dhaqaaqii hawl-gelinayey kaydkaas horena ugu dhaqaajinayey sidaasi xooggan. Laakiin aadaminimadu – guud-ahaanteed – may noqon kadib mid u diyaar ah inay muddo badan korto figtaasi la yaabka leh, ee ay koreen kooxdaasi la doortay iyadoo Ilaah la jiro. Markii uu Islaamku ku fiday arliga oo idil bari iyo galbeedba isagoo ku socda xawligaasi la yaabka leh, ee aanay taariikhdu weli indhaha saarin, dadkiina diintii Ilaahay usoo galeen raabo-raabo, Ummaddii Islaamkana bedideedu noqotay mid aan ahayn tii la kulantay barbaaintaasi gaar-ahaaneed, qotoda-dheer ee aayar-soconaysay ee ay soo martay kooxdaasi la doortay-Markii ay waxaasi oo idili dhaceen ayey cidhiidhigii ka hadhay jaahiliyaddu dhex gashay dadweynihii. Markii ay intaasi oo idili dhacday, waxay, wixii jaahilyadda kaga sii hadhsanaa nafta dadweynaha, iyo dadka intiisii badnayd ee Islaamka ku soo dhawaaday ay culaysiyeen oo ay hoos uga soo dejyeen figtaasi sare ilaa ay la soo simeen dhulka. Taasi oo aan figtaasi sare wax kale saari-karin iyadoo booddo dheer oo la mid ah tii ay qaaday bulshadaasi la doortay, la sameeyo. Taasi oo ay ku gaadhay barbaarintii gaarka ahayd, qotoda-dheerayd ee qunyar soctay. Taasi oo ay urursatay kaydkii fidrada,

una jeedisay jihadaasi fog. Si bulshadii Muslinku waxay joogtay in ku dhow kun sano – iyadoon ku wada joogin figtaasi dheer, ee ku eg meelo kala duwan. Dhammaantoodna ah qaar ka korreeya kuwa bulshooyinka kale ee aaduunka. run-ahaantii, bulshooyinka kale iyaga ayey gargaar weydiisan jireen in loo fidiyo. Taasi oo ay taariikhdu ka marag kacayso, haddii run laga sheego. Tiiyoo ay aad u yartahay taariikhda runta laga sheegayo.

* * *

Boodadaasi weyn ee gaarka ah, ka taariikhda aadaminimada iyo kunkaasi sano ee heerka sare la taagnaa ma aha qaar iska baaba'ay mana aha qaar ka lumay caalamka nolosha iyo aadaminimada, waayo waxay ka tageen adduunyo gooniya oo ah tii ay markii hore kulantay. Ma aha sidaasi. Waayo taasi ma aha sunnadii Ilaahay ee nolosha iyo aadamigaba. Waayo aadaminimada waxay la midaysan-tahay kuna xidhan-tahay xilliyada waqtiga. Dhismaha aadamiguna waa mid nool oo ka faa'idaysanaya kaydka waayo-aragnimada, urursanayana kaydka aqoonta. Si kasta oo ay u dul-buuxiso qiiqa jaahiliyaddu ee uu aadamigu ku noolyahay iyo si kasta oo ay ugu gacan-sarreyso indho-la'aantaasi iyo muqdigaasi, kaydku waa kii sugnaada uun, kuna dhex



wareega jidka aadamiga.

Haddii ay dacwadii Islaamku markii ugu horeysay, waxa keliya ee ay helshay uu ahaa uun kaydka fidrada oo ay kaga hor-tagaysa waaqaca aadaminimada (Iyadooyna ku jirin kaydkii yaraa ee ka taagnaa risaaladihii hore ee ahaa qaar dad gaar ah loo soo diray, ee aan ahayn mid dadka oo idil loo soo diray sida Islaamka oo kale.) Maanta waxaa u weheliya kaydkaasi fidrada , kaydkii hore ee lagula hawl-galay habkani Ilaahiga ah nolosha aadamiga oo idil, kuwii aaminay Islaamka, kii soo galay xukunka Islaamka, iyo kii uu soo jiitay Islaamkuba. Sidoo kale waxaa la haystaa kaydkii waayo-aragnimada aadaminimada ee qadhaadhaa ee ay keentay jah-wareerkii markii laga fogaaday Ilaahay, jah-wareerkaasina keenay nolol qadhaadh. Mabaadiida, aragtiyaha, qiimeynta, miisaamidda, hababka iyo dhigaaladii uu ka hortagay Islaamku markii ugu horeeyey isagoo haysta oo keliya kaydka fidrada, si xoog ah ayey u inkireen u hor-joogsadeen una dagaaleen. Waayo maalintaasi wax cusub oo lala yaabo ayey ahayd. Waxaana iyada iyo waaqicii markaasi taagnaa u dhexeeyey fogaan aad u balladhan. Mabaadiidan, Aragtiyahan, Qiimeynadan, Miisaamiddan, hababkan iyo dhigaaladanba, waxay ku sugnaadeen nolol koox aadamiga ka mid ah – iyadoo si dhab ah loo hirgelyey – xilli waqtiyada

ka mid ah kadibna waxaa laga hirgeliyey nolosha calaamka Islaamka ee ballaadhan, heerar kala duwan xilli kale oo dheer. Ugu dambaynna waxaa wada bartay aadamiga oo dhan, in ku dhow kun iyo saddex boqol oo sano. Waxaa loo gartay barasho ahaann, eegno ahaan, ama rajo-ahaanba haddii ann loo baranin dhab ahaan loo ti-jaabiyo oo lagu dhaqmo. Sidaas awgeed ma aha mid u cusub sidii ay ahayd maalintii ay soo degtay oo kale. Umana muuqato mid lagu canaanan karo dareenkeed, caadooyinkeeda, sidii markaasi oo kale. Waa dhab in ayna aadamini-madu soo dhadhamin sidii ay u soo dhadhamisay kooxdaasi la doortay xilligaasi gaarka ah. Waxaa kaloo dhab ah in markii laysku dayey in la dabbaqo qaarkood, xilliyo kala geddisan – oo xataa casrigani ka mid yahay – ay suurogal noqon-weyday inay hesho ruuxeedii – lagumana dabbiqin ruuxaasi. Waana dhab – xataa xilligan aynu joogno – inay kor u sii socoto oo ay higsanayso figtaasi ay ku boodday kooxdii Muslimka ee ugu horeysay. Waxaasi oo idil waa sax. Laakiin aadaminimadu guud-ahaanteed – marka laga eego dhinaca aragtida fikradeed – waa mid uga dhow sidii ay u gaadhi lahayd dabiicadda habkaasi. Waana mid uga karti badan qaadistiisa, maalintii ugu horreysa ee uu yimid Islaamku ee lala wada yaabbana.

* * *



Tusaalooyin xaddidan ayaa inoo caddaynaya xaqiiqadaasi dhabta ah. Waxaynanu ka soo dooran dhawr keliya, innakoon aad ugu sii dheeraan doonin. Taasina waa laba sababood: – Ta hore – Dabiicadda hadalkani la qurxiyey ee kooban ee aan ka badnayn tilmaamo tusaya waxa uu ka kooban-yahay mawduu-caasi weyn ee uu ka hadlayo mawduuca « Diintan ». Ta labaad – Haawlahaasi ballaadhan ee ay mawjadda daadkan dheer ee habkani Islaamku kaga tegay nolosha aadamiga oo idil meel kasta oo dhulka ka mid ahi waa mid tiro badan, aad u ballaadhan oo aanu dhammayn-karin qoraa keliyi, baadhis keliya, xilli keliya. Raadadkaasi ayaa dhex galay nolosha aadamiga ila xilligaasi fog, una cammimay nolosha aadamiga si balladhan, kana laabtay oo ka waafaqay meelo aan wada muuqan, oo aan la arki-karin. Waxaa la odhan karaa, iyadoo la soo gaabinnayo – in uunkan inoo muuqda ee ku eg dhulkan kuna dhammatay nolosha aadamiganu, oo ah muuqaalka diintan, aanu ka tegin dhinac keliya oo nolosha aadamiga ka mid ah ilaa iyo taariikhdaas. Tiiyoo laga yaabo inay kala-geddisanyihiin sida wax usoo jiidatay oo ay leedahay darajo, waxaa hubaal ah inuu waaqac dhab ah yahay. Dhaq-dhaqaaq kasta oo dhaq-dhaqaaqyada taarii-khda ee waa-weyn ka mid ahi waxay ka soo dhex-baday si toos ah ama si dadbanba halgankaasi Islaam-

ka, ama haddii aynu si sax ah u sheegno, arrintaasi uuniga ah ee ballaadhan. Dhaq-dhaqaaqa hagaajinta diinta ee ay ku kaceen maartin Luudar iyo kaalfin Yurub dhexdeeda, iyo dhaq-dhaqaaqa fufka ee ilaa maantadan Yurub nafaqaynayso. Dhaq-dhaqaaqa tirtiridda hantigoosadka ee Yurub iyo ka xoroobidda xunkunka boqortooyada. Dhaqaaqa sinnannsha iyo ku dhawaaqidda xuquuqda aadamiga ee ka hirgashay Maagnaa kaartaa ee dalka Ingiriiska, iyo Kacaankii Faransiiska, ee ka kacay dalka Faransiiska, dhaq-dhaqaaqa habka ti-jaabada ee salka ku haya guulaha cilmiga reer Yurub – Waxaasi oo idil oo loo qirsayahay inay yihiin wax-yaalihii ugu waa-weynaa ee hor-u-marka taariikhdu waxay dhaammantood ka soo unkameen dhaq-dhaqaaqaasi weynaa ee Islaamka, kaasoo si qoto-dheer oo aan gunteeda la gaadhi karin ugu lug lahaa. Doktor Axmed Amin wuxuu ku qoray Kitaabkiisa « **Barqada Islaamka** » Dhaq-dhaqaaqyo ayaa ka dhex kacay kirstaankii uu Islaamku raadadka kaga tegay – kaasi oo ay ka mid tahay Qarnigii Sideedaad ee Miilaadiga ama labadii qarni ee labaad iyo saddexaad ee hirjrada dhaq-dhaqaaqi ka kacay Sebtemaaniya Dhaq-dhaqaaqaasi wuxuu diiday in Baadariyaasha hortooda lagu qirto dembiyada, Taasoo ayna baadariyadu xaq u lahayn, iyo in dadku Ilaahay oo keliya madaxa hoos ugu



dhigaan, si uu u weydiisto dembi dhaaf. Islaamkuna maba laha baadariyaal sidaas awgeed maba qirsana ictiraafkooda. Sidoo kale waxaa kacay dhaq-dhaqaaqyo ku baaqaya bururinta sawirrada iyo sanamyada diiniga ah. Kaasoo ahaa qarniyadii sideedaad iyo sagaalaad ee miilaadiga – ama qarniyadii saddexaad iyo afraad ee hijrada. Waxaa soo baxay madhab kiristan ah oo diidaysa in la caabudo Sawirada iyo Sanamyadaba. Wuxuu boqorkii Roomanku «**Liyo» iii** amray Sannaddii 726 – M – oo uu ku joojinayo in la caabudo Sawirada iyo Sanamyadaba. Amar kalena wuxuu soo saaray Sannadii 730 –M– oo uu ku Ceebaynayo Sanamyadaasi. Sidoo kale ayey u ceebeeyeen Qasdandiinkii V iyo Liyo-gii **iv** una joojiyeen caabudaadoodii tiiyo Isla-waqtigaasi ay taageerayeen Baadarigii Girigori **ii** iyo **iii** Jermaniyoos oo ahaa Duqii Qasdandiin. Waxaa kaloo taageerayey Baqoraddii « **Iirene** ». Waxaana labadaasi qolo-dhexmaray halgan kulul oo aan soo koobi karin. Waxaa keliya ee aynu doonaynaa waa in caddaynno in dadka taariikhda wax ka qoraa qaarkood ay caddeeyaan in baaqii lagu tirtirayey Sawirada iyo Sanamyaduba uu ku lug lahaa Islaamka. Waxaana la yidhaa kolodiyas, oo ahaa Baadarigii Tuureen (ee la Magacaabay 828 –M– / 213 –H– ) ee gubay sawiradii iyo sanamyadii, diidayna Caabudaadoodii uu ku dhashay, kuna soo

barbaaray Andaliskii Mulsinka ahayd. Waxaa kaloo jira kox Kiristan ah oo u sharxay caqiidada « Saddaxaynta » Si ugu dhow la midaynta, inkirtayna Ilaahnimada Masiix.

* * *

Markii ciidankii saliibiyiinta ee barbariga aha ka soo noqodeen bariga Islaamka ah qarnigii kow-iyotobnaad ee Miilaadiga, waxay soo noqday iyagoo wata suurad ka mid ah nolosha bulshada Islaamka. Tiiyoo ay jiraan leexasho badan oo gaadhay bulshadaasi, hadana waxa cajab-geliyey astaamihii fiicnaa ee ay wadatay.

Marka la garab dhigo saliibigaasi barbariga ah. Sharcigaasi keliya ee ay u wada hoggaansan-yihiin ka wax xukumaya iyo ka la xukumaayaaba ee aan ka soo unkamin doonista mid keligii tashade ah, ama dabaqad hantigoosad ah sidii ay Yurubahaydoo kale. Waxaa kaloo xornimo shakhsi ah oo lagu kala dooranayo nooca shaqada iyo meesha la degayo, lahaansho gaar-ahaaneed iyo xornimo ti-jaaradeed, iyo iyadoo ayna jirin dhaxaltooyo dabaqadeed iyo awood uu fardigu u qabo inuu kor ugu soo kici-karo, shaqadii iyo dedaalkiisa isagoo higsan-kara meel sare oo bulshada ka mid ah xilli kasta. Qofka reer Yurub ee ku hoos noolaa hab boqortooyo ahi weligii indhaha



muu saarin astaamahaasi fiican isagoo u ahaa addoon ciidda, sharcigaasi keliya iyo sidaa uu rabo taliyihiisu, isagoo dabaqaddiisana ay tahay mid qasab – ku ah waayo waxay ku xidhantahay dhaxaltooyo. Sidaasi awgeed iyadoo ay gargaarayaan arrimaha dhagaalaha ee kale ee nolosha bulshada reer Yurub, waxaa yeedhay dhawaaqaasi tartiib-tartiib u tirtiray habkii Boqortooyada. Kana dhawaaqay ka xoraynta dadka adoonsiga dhulka xataa haddii ayna ka furfurin xadh-kihii kale ee ku xidhnaa iyo xataa haddii ayna bulshadii reer Yurub sare ugu kicin figtii sare ee ay gaadhay bulshadii Muslimku.

* * *

Dhaq-dhaqaaqa fufka ee reer Yurub ee Qarnigii Afar-iyo-Tobnaad ka soo unkamay, jaamicadaha Andalus, soo jidashadii Ilbaxnimada bariga ee Islaam-ka ee noqotay Ilbaxnimo Caalami ah, iyo tarjamadii Yurub ee aqoontii Caalamka Islaamka. Waxaa kaloo ka soo unkamay dhaq-dhaqaaqa Cilmiga Cusub gaar-ahaan dariiqada tijaabada. Wuxuu **brufeld** ku yidhi Kitaabkiisa. « Dhismaha banii'aadminimada » Wuxuu Cilmigu ahaa ka ugu muhimsan ee ay Ilbaxnimadii Carabtu u keentay Caalamka cusub. Laakiin midhihiisu aad bay u gaabinaysay bislaantoodu. Cabqariyaddii ay ku dhashay hidihii Carabtu wad-

danka Isbaaniya, may kobcin ila waqti dambe oo ay Ilbaxnimadaasi ku qarsoontay daruuraha mugdiga. Mana ahayn Cilmiga oo keliyi kii Yurub ku soo Celiyey nolosha. Laakiin arrimo badan oo ay Ilbbaxnimada Islaamku ku lug lahayd ayaa ifiyey nolosha reer Yurub. Inkastoo ayna jirin tusaale gaar ah ee kobaca reer Yurub ee aan bilowigiisii si Caafimaad qabta u keenin hidihii Islaamku haddana jiidashadaasi waxaa si cad oo muhiim ah looga helayaa abuuritaanka Karaankaasi, ee u sameeyey caalamka cusub xooggoodaasi gaarka ah ee sugani kaasoo ah Cilmiga dabiiciga ah iyo ruuxa Cilmi baarista. Isagoo sii wada wuxuu yidhi. Cilmigeenna halka uu kaga abtirsadaa Cilmiga Carabtu ma aha inay inoo keeneen waxsoo saar cusub oo la yaab leh ama aragtiyo horleh, ee waa mid intaasba ka muhimsan. Taasoo ah jiritaankiisa naf-ahaantii Caalamkii hore, sidaynu horayba u aragnay, wuxuu ahaa mid aan Cilmiba jirin. Cilmiga xiddigaha iyo xisaabaadkeeda waxay ahaayeen qaar shisheeye oo ay Giriiggu dibedda ka soo ergisteen, kalana yimaaddeen, weligeedna may qabatimin hiddaha Giriigga inkastoo ay si xoog u dhex gashay uguna mulaaqantay. Waxay Giriiggu Nidaamiyeen Sharciyadoodii, waxayna Cammimeen Xukunkoodii oo ay dejiyeen aragtiyo. Laakiin hababka hawl baadhidda, ururinta iyo kulminta Macluumaadka



runta ah, Fiirada kooban iyo ta joogtada ah iyo baarista tijaabada – intaasi oo idili asal-ahaantoodii waxay ku ahaayeen mid Shisheeye maskaxda Giriigga.

Waxaa aynu nidhaa **« sayniska »** wuxuu Yurub ka soo baxay isagoo ay keentay ruux cusub oo baaris ahi, jidad cusub oo cilmi-baaris ah, iyadoo laga faa'iidaysanayo habka tijaabada iyo fiirintu, iyo la gaadhay hor-u-mar xisaabeed ilaa heer ayna aqoon Giriiggu. Ruuxaas iyo hababkaasi cilmi-baarista ah waxay ahaayeen mid ay Carabta ka soo ergistay caalamka reer Yurub. Intaas ka horna wuxuu yidhi:– «Roogeer Baykon wuxuu ku dersay afka Carabida iyo Cilmiga Carabtaba Dugsiga Oksfoord isagoo ka xiganaya Macallimiintiisa Carbeed ee Andalus. Roogeer Baykon iyo ninka la magaca ah ee Faraansis Baykon ee ka dambeeyey waxay u xaq leeyihiin in lagu nisbeeyo soo saaridda habka tijaabada. Rooger Baykon wuxuu ahaa uun mid ka midah Rusushii Climiga iyo hanka Islaamiga ah ee loo soo diray Yurubtii Kiristanka ahayd. Wiligiina kamuu gabbanin inuu caddeeyo in barashada Casriga ah ee afka Carabiga iyo Cilmiyada Carabtuba inuu yahay jidka keliya ee lagu heli karo aqoon sax ah. Hadalkaasi uu yidhi kuu soo saaray habka tijaabadu waa tusaale ka mid ah soo leexashadii weynayd ee gun-dhiggii ilbaxnimada reer Yurub. Habkaasi Carabtuna wuxuu

aad u fiday xilligii « Baykon », qof kastaana wuxuu u harraadana barashadiisa.

« Halkeebuu haddaba Baykon ka waraabay Cilmiga Sayniska? » Wuxuu ka waraabay jaamicadaha Islaamka ee Andalus. Qaybta Shanaad ee Kitaabkiisa (Cepus Majus) ee uu kaga hadlayo Baadhista Muraayadaha indhaha ayaa runahaantii ah – mid laga soo maan-guuriyey Kitaabka Ibna-Al Haytham ee «**Manaadir**» Dreybar oo ah Baroofesor Jamicadda Niyuu Yoork wuxuu kitaabkiisa « Halganka ka dhexeeya diinta iyo Cilmigu » ku yidhi:

« Waxay Culimada Muslinku xaqiiqsadeen in habka aragti-ahaaneed aan hor-u-mar lagu gaadhayn, rajada helitaanka xaqiiqaduna waa in ay ku xidhnaataa fiiro arrimo dhacay. Halkaasi ayey Shacaairtooda Cilmibaaristu ay u noqotay hab tijaabo iyo go'aanadii dhabta ahaa ee dareemidda »

« Go'aanada dhaq-dhaqaaqaasi Cilmigu wuxuu si cad ugu muuqdaa Hor-u-marka la yaabka leh ee Warshadaha Casrigoodii. Waxaynu la yaabi marka aynnu ku aragno qoraaladooda aragtiyo Cilmi ah oo aynu moodi jirnay yihiin Natiijooyinkii ka soo baxay Casrigeenan. Waxaana kuwaasi ka mid ah habka bilowga iyo korriimada nafleyda, oo loo haysto hab cusub. Taaso lagu dhigan jiray Dugsiyada Muslinka. Waxayna habkaasi usii guda-galeen meel aynaan ka gaadhin, waxayna ku dabbaqeen walaxa qalalan (Solid) iyo macdantaba. Waxaa lagama maarmaan ah in aad loogu fiirsado hadalkaasi iyo kuwa la midka ahba ee ay sameeyeen qorayaasha reer Galbeedka ee meesha saxa ka taagan Islaamka iyo Fikradda Islaamkaba. Habkaasi koriimada sida u abuureen Daarwin iyo Walas aad ayey uga geddisan tahay sida uu arakay Cilmi-baarista Muslinku, kuwaasoo aan ka baxsanayn Kinnisadda iyo Ilaahyada kinnisadaba. Culimada Muslinku waxay arkeen qun-yar socoshada xilliyada abuurista. Waxayna ka bilaabeen sifooyinka maadada qalalan waxayna arkeen inay dhammaanayso ugu horeynta heerarka nolosha dhirta. Waxayna arkeen inay taasina dhammaanayso bilowga heerarka nolosha xoolaha. Markaas ka dibna ay bilaabmayso Laakiin waxaasi oo idil waxay ku daayeen qadarka iyo hawsha Ilaahay. Laakiin Daarwin wuxuu ka dedaalay inuu inkiro soo dhex-gelitaanka xoog aan caadi ahayn koritaankaasi. Waayo wuxuu ka cararayey Kinnisadda iyo Ilaahyada Kinnisadda ee ay magaceeda ku soo bixi jireen Cilmiga iyo Cilmibaaristuba.



Sidaasi Cilmi-baaristii Culimada Muslinku umay keenin xaqiraad banii'aadmiga umanayna diidin astaamaha ruuxiga ah kumanayna celin asal xoolonimo ah. Waayo aragtida Islaamku si qeexan ayey u

caddaysay in banii'aadmiga loo abuuray si madax-banaan. Haddii uu dadku ku fadhiyo halka ugu sarreya ee heerarka noolaha marka la eego habkiisa dhismaha garaadkiisa sarreeya, iyo awooddiisa ruuxiga ah. Waxaana taasi ugu wacan waayo Ilaahay horta isaga ayuu abuuray kadibna noolaha idil oo kale heerkaasi ay ku sugan-yihiin. Waxaana u dhaxeeya faraq weyn gun-dhigga aragtida inkastoo ay Muslimiintu uga horeeyeen Cilmi-baaristaasi). Waxayna ku isticmaaleen Cilmiga Kimistariga daawadii. Waxayna ka gaadheen Cilmiga Makaanikada Ilaa ay ogaadeen xaddadeenna qawaaniinta jaadibiyadda. Waxayna si buuxda u ogaadeen Cilmiga dhaqdhaqaaqa. Waxayna ka gaadheen aragtiyaha ifka, aragga ilaa ay beddeleen rayigii Giriigga ee odhan jiray aragga waxaa lagu helaa Shucaaca ka soo baxaya isha ee ku dhacaya yoolka. Waxayna yidhaahdeen sida ka soo hor-jeedda. Waxayba garnayeen aragtida soo noqoshada shucaaca iyo leexashadiisaba. Xasan Ibnal Haytham wuxuu soo saaray qaansada uu noqonayo shucaacu inta uu dhexmarayo hawada. Wuxuuna caddeeyey inaynu aragno Cadceedda iyo dayaxaba kor hor ubta ayna u soo bixin muuqaalka,



aynaan sii arki karno muddo yar kadib marka ay dhacaan.

* * *

Intaasi ayeynu ku ekaan inaynu tusaale ahaan u eegno raadadka dhabta ah ee habka Islaamka iyo nolosha Islaamkaba ee taariikhda Islaamka iyo dhaq-dhaqaaqyada caalamiga ah ee waa-weyn. Intaasi ayeynu ku ekaysiin iyadoo looga jeedo caddaynta iyo qeexidda xaqiiqadaasi ballaadhan ee wajiyada badan ee aynu sida badan illowno. Marka aynuu aragno dhismaha Il-baxnimada innala da'da ah, ayey innala noqotaa, iyadoo ugu wacantahay tabaryaridenna iyo aqoon-la'aateennu, in aynaan wax nasiib ah ku lahayh, wax raad ahna aynaan ku lahayn bilowgiisa. Uuna yahay wax innaga weyn kana weyn taariidhdeenna aynu moognahay, nasiib-darrideenna. Waxaynanu ka maqalnaafka nacabkeenna ee ay danteeda oo idili tahay uun inay quus-innagageliyaan suurogelinta nolosha Islaamka – ee waafaqsan habka Islaamka. Dan ayaana ugu jirta quusteennaasi. Waayo wuxuu ka magan-gelinayaa weerarkeenna, weerarkeenna ah in aynu ka soo ceshenno hoggaanka ka talinta arligi. Waxaa nasiib-darro ah inaynu qaadanaynno waxay leeyihiin, una soo celinaynno sidii guumeysta iyo daayeerada. Kaasi ma aha hadalkeenna halkan

ah. Waxaynu isku dayeynna uun in aynu diyaarinno uun tilmaanta jidadka ballaadhan ee uu inoo falay raacii ugu horeeyey ee Islaamku ee uu aadamigu og-yahay. Aadaminimada maantuna waxay tahay mid karti weyn u leh garashadeeda iyo aragtideedaba. Waana keydka Cusub ee ku biiraya kaydkii fidrada ee hore.

* * *

# VII

# TALLABOOYIN SUGAN

Markii uu ka soday arliga raacii ugu horeeyey ee Islaamku, ee ay soo ceshatay jaahiliyaddu hoggaankii talada ee uu Islaamku ka qaaday; uu Shay-danku soo noqoday ee uu ka hurgufay boodhkii dirirta garbihiisa, kana kacay xam-baaradii gaadhay una sacabbo tumay xisbigiisii soo noqday ee hoggaanka qabsaday! Tiiyoo ay waxaasi oo idili dhaceen, si buuxda ugumay noqonin nolosha aadamigu dhigaa-ladeedii dib-u-socodka ahaa ee jaahiliyaddii hore. Islaamkuna wuu joogay meesha inkastoo uu dib uga gurrtay meeshiisii ahayd inuu arliga ka taliyo. Wuxuu-na ka tagay raadad aad u ballaadhan, mabaadii ka waa-weyn oo ku sugnaaday nolosha aadamiga oo caan-baxay. Waxaana baaba'ay ishii layaabka lahayd ee lagu eegayey maalintii ugu horreysay ee uu yimid. Raadadkaasi ballaadhan iyo mabaadiidaasi weyn ayeynu isku dayeynaa inaynu ku yar sharaaxno maqaaladdani.

* * *

# BANII'AADMINIMO KELIYA

Waxaa gacanka Carabta ka talinayey isbahaysiga qabiilada, isbahaysiga reerreerka, isbahaysiga qoyska. Arliga kalena waxaa ku caan ahaa isbahaysiga dalka, isbahaysiga waddanka, isbahaysiga midabka, isbahaysiga jisiyadda. Casabiyadahaasi isbahaysiga ah ee yar-yar ee aanay weligeed aadaminimadu wax aan iyada ahayn arag tiiyoo ay jiraan ayuu xilligaas Islaamku yimid isagoo dadka ku leh. Waxaa jirta aadaminimo keliya oo salka ku haysa asal keliya, una jeedda Ilaah keliya. Kala geddisnaanta jinsiyadaha, midabka, kala duwanaanta goobaha iyo meelahu, kala duwanaanta abtirsiga iyo awoowyaashu, waxaa oo idili muu kala saaraynin colaadna dhex-gelinaynin mana kala soocaynin kalana durkinaynin, ee waxay uun in laysku kala layskuna xasuusto. Looguna kala qaybiyo hawlaha iyo xilka khilaafada dhulka. Markaas ka dibna ay ku noqdaan Ilaaha dhulka ku uumay ee u xilsaaray. Ilaahay wuxuu Quraankiisa ku yidhi:

**Dadyahow, waxaanu idiinku abuuray lab iyo dheddig, waxaanan idinka yeelnay shucuub iyo qabaa'il si aad isku kala garataan. Waxaana Ilaahay agtiisa idiinku sharfan ka idiinku alle - ka**



**cabsi badan. Ilaahayna waa wax walba oge, khabiir ah ».**

*Xujaraat* : 13

**« Dadyahow ka cabsada rabbigiinna idinka abuuray naf keliya. Iyadana ka abuuray oorideedii. Labadaasina ka firdhiyey rag badan iyo dumarba. Kana cabsada Ilaaha aad isweydiinaysaan iyo riximmada. Ilaahay waa ka idin fiirinaya ».**

*Nisa* : 1

**« Waxaa aayaadkiisa ka mid ah abuurista samooyinka iyo arllada, kala geddisanaanta afafkiinna iyo midabkiinna. Halkaasi waxaa ku jiro aayado caalamada oo idil ah. »**

Kuwaasi may ahayn mabaadii aragtiyeed ee waa xaalado dhab oo taagan. Islaamku wuxuu isku kala fidiyey dhul aad u ballaadhan oo koobaya jinsiyadaha iyo midabbada oo idil. Waxayna dhammaantood ku milmeen habka Islaamka. Dhaxaltooyo midab, dhaxaltooyo jinsiyad, dhaxaltooyo dabaqad iyo dhaxaltooyo qoysba, midna iskama hortaagin in dhammaan loo wada noolaado si walaalnimo, ama inuuqofku gaadho waxay kartidiisu gaadhsiiso, una suurogelso sifadiisa aadaminimo.

Raadkaasi ballaadhan ayaa dhulkii ku sugnaaday, halkii uu markii hore ahaa mid aad loola yaabo oo si buuxda loo diidana. Xataa kadib markii ay baabaday mawjaddii Islaamku, aadamigu wuu kari waayey

inuu si buuxda u diido ama uu la yaababa. Waa dhab inay aadaminimadu kari weyday inay hirgelso siday u hirgelisay bulshadii Muslinka ahayd, taasoo iyadana sugnaanteedu aanay dhammays-tirnayn. Waana dhab inay casabiyado yar-yar oo badani ila maantada jiraan. Casabiyadda dhulka, casabiyadda waddanka. Casabiyadda jinsiyadda iyo reerka. Casabiyadda midabka iyo afka. Waana dhab in dadka madow ee Marykanka iyo koonfurta Afrika ku nooli ay haysato mushkilad adagi, tiiyoo isla-mar-ahaantaasi ay Yurubna taas oo kale ka haysato inkasto ay yara-qarsoontahay. Laakiin fikradda aadaminimada keliyi waxay weli tahay mid si balladhan ugu mid ah baaqaqa aadaminimada ee maanta. Wuxuuna weli yahay raadkaasi uu dhigay Islaamku mid saldhig u ah fikradda aadamiga – marka aragti ahaan loo eego. Waxay weli casabiyadahaasi yar-yari yihiin qaar sii laciifaya siina baaba'aya, Waayo ma aha qaar asal ah oo xooggan. Way tagtay mawjaddii ugu horreysay ee Islaamku ee ka soo fidday kaydkii fidrada oo keliya iyadoo ka tagtay raadkaasi ballaadhan. Waxayna mawjaddaasi uga tagtay mawjadda ku xigta kaydkii fidrada iyo kaydkeedii lafahaantiisa si ay qolada xigta uga faa'iidaysato. Aadaminimaduna si ka fiican ayey u qaadan una hirgelin waayo waxaan jirin la yaabkii markay cusbayd lala yaabsanaa.

* * *

# AADAMINIMO SHARFAN

Wuxuu Islaanku yimid iyadoo sharafta aadaminimadu ay ku koobantahay dabaqado go'an iyo qoysas gaar ah, iyadoo weliba heer aad u sarreya ah. Laakiin dadweynuhu wuxuu ahaa qoshin-qashin aan qiime iyo qadarintoona lahayn. Wax sharaf ah habayaraatee aan lahayn. Wuxuu Islaamku la yimid baaqiisii caddaa: – Sharafta aadamigu waxay ka timaaddaa aadaminimadiisa lafteeda iyadoon wax kale oo weheliyaa jirin sida jinsiyadda, midabka dabaqadda, hantida, xilka iyo wixii la mid ah oo dhan. Xuquuqda asalka ah ee aadamiguna waxay ka soo unkantaa aadaminimadaasi iyada ah, oo ku noqonaysa asal keliya sidaynu horeyba usoo sheegnay. Ilhaahayna wuxuu ku yidhi dadka oo uu quraankiisa ku sheegay:

**« Run-ahaantii waanu sharafnay banii'aadmiga, waxaanan ku qaadnay berri iyo badba, waxaanan ku nafaqaynay wax lagu raaxaysto, waxaanaan si'aad ah uga faddilnay in badan oo aan abuurnay.»**

**« Markii aan ku nidhi malaa'igta u sujuuda aadam, way u wada sujuudeen ibliis mooyaane. Isagoo**

**diiday isnaweynaysiiyey. Wuxuuna ka mid noqday gaaladii. »**

*Albaqara* : 34

**« Wuxuu Ilaahay idin sakhiray waxa samooyinka iyo arladaba yaalla oo idil. »**

*Jaasiyah* : 13

Markaasi ayey dadkii ogaadeen in dadka jinsi-ahaantiisu ay tahay mid xagga eebbe sharaf ku leh. Sharaftiisuna ay tahay mid uu iska-leeyahay oo asal ah. oo aan raacayn jinsiyaddiisa, midabkiisa, waddankiisa, reerkiisa, qoladiisa, qoyskiisa iyo wax waxaasi la mid-ah toona. Waxay sharaftaasi raacaysaa ku abtirsigiisa dadnimo ee uu ku abtirsanayo jinsiyaddaasi aadaminimo ee uu Ilaahay sharfay.

May ahayn taasi mabaadii aragti-ahaan ah ee waxay ahayd mid dhab ah oo dhacday, kana hirgashay nolosha kooxdii Muslimka ahayd, kuna fidday arliga oo idil. Dadkiina way barteen waxayna ka hirgeliyeen sidoo kale dhigaaladooda nololeed. Dadweynihii oo idilna wuu ogaaday. Sidoo kalena qashinkii wuxuu ogaaday inuu sharaf leeyahay, xuquuqna leeyahay. Taasoo ah xuquuqda aadamiga. Xaqna uu leeyahay inuu la xisaabtamo madaxdiisaba iyo boqoradiisaba. Oo aanu aqbalin dulliga, hoos-u-dhigidda iyo ihaanaddaba. Waxana ogaadeen madaxdii iyo boqoradii inayna xuquuq dheeraad ah oo dhaafsiisan ta dadweynaha lahayn, xaqna u lahayn inay wax-u-dhimaan sharafta kuwa aan madaxda iyo boqorada-toona ahayn. Taasina waxay u ahayd dhalasho cusub aadamiga. Dhalasho ka xooggan dhalashada la dareemo. Muxuu yahay dadku haddii aanu lahayn xuquuq aadami iyo sharaf banii'aadmi-toona. Muxuuna yahay haddii xuquuqdaasi ayna ku xidhnayn jiritaankiisa naf-ahaantii iyo xaqiiqadiisa dhabta ah ee doorsoomayn xilli kasta. Wuxuu Abuubakar – Ilaahay raalli ha ka noqdee ku bilaabay hadalkiisii waqtigii xukunkiisa. « Waxaa layga-kiin dhigay madax. Laakiin idinkama fiicni. Haddii aan wax hagaajiyo, caawiya. Haddii aan wax xumeeyana ii toosiya. Ina addeeca ilaa iyo inta aan Ilaahay iyo rasuulkiisii addeecayo. Haddii aan caasiyna wax addeecid ah idinkuma lihi » Cumar bin khaddabna – Ilaahay raalli ha ka noqdee wuxuu ku khubbadeeyey isagoo ka hadlaya xuquuqda ay madaxdu ku leeyihiin: – « Dadyahow, Ilaahbaan ku dhaartee idiinkuma soo diro madaxda si ay idin karbaashaan, ama ay xoolihiina idiinka dhacaan. Laakiin waxaan idiinku soo diraa si ay idiin baraan diintiinna iyo sunnihiinna. Qofkii lagu xad-gudbo aniga ha isoo gadhsiiyo. Ilaaha nafta Cumar gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee, inaan uga aar-gudi, markaas ayuu Cumar bin Caas soo booday oo uu yidhi: » Amiirkii Muuminiintow,

haddii qof mid ka mid ah madaxda Muuminiinta ku xad-gudbo qof aan muslin ahayn, miyaad uga aar-gudaysaa? « Cumar baa yidhi, Ilaaha nafta Cumar gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee waan uga aar-gudi. Sideebaan uga aar-gudayn anigoo arakay Rasuulkii Ilaahay – *N.N.E.K.H.A* oo naftiisa ka aar-gudaya? waar dadka ha garaacina, waayo way dullaynaysaa. Hana ka dheeraynina guryahooda iyo xaasaskooda way fidnaynaysa hana u diidina xuquuqdooda way gaalaynaysaaye ». Cusmaanna – Ilaahay raalli ha ka noqdee – wuxuu u qoray madaxdii gobollada Islaam-ka oo idil hadal uu ku yidhi: – « Waxaan hawl-wadeenadayda ka doonayaa inay sannad kasta ila kulmaan waqtiga Xajka. Waxaa xukunka laygu dhiibay inaan wanaagga faro, xumaantana diido waa in aan wax dembi ah lagu qaadin qof dadka aan xukumo ka mid ah ilaa aan soo oggolaado. Aniga iyo hawl-wadeenadayduba-toona xaq uma lahin in aan ku xad-gudubno dadka. Waxaana laga soo sheegay Madiina in dadka qaarkood la caayo lana garaaco. Qof kasta oo taasi ka cabanayaa ha ii yimaa-ddo waqtiga xajka. Wuxuuna heli-doona xaqiisa ha ahaato mid uu ku yeeshay hawl-wadeenadayda ama aniga'eh. Ama iska saamaxa, waayo Ilaahay ayaa abaalmariya kuwa isaa saamaxa'eh. Muhimmaduna waxaa weeye – sida aynu horeyba usoo sheegay in



ayna taasi ahayn mabaadii aragti ah, ama hadallo layska yidhaahdo. Waayo waxa loo dabbaqay si dhab ah. Waxaana lagaga dhaqmay dad-weyna dhexdiisa ilaa ay ka dhigteen gun-dhigga dhigaalada dhabta ah. Waxaana jirta tusaale'ahaan arrin caan ah oo ku dhacday Ibna-al Qibdi ee la tartamay ina Cumar bin Caas oo ahaa ninkii Masar gacanta ku dhigay ahaana Guddoomiyaheedii, markii uu ina Cumar bin Caas ka badiyey ayuu dilay ninkii ka soo horjeeday. Aabihiibaa u dacwooday. Wuxuuna uga abaal-guday xilligii xajka layskugu yimid tiiyoo dadkoo idili arkayo. Waana arrin caan ah oo la wada og-yahay. Qorayaashu sida badanba waxay ku ekaa-daan uun caddaaladda Cumar. Laakiin arrintu waxay si weyn u tilmaamaysaa gobanimadaasi buuxda ee uu Islaamku u keenay dammiirka aadamiga iyo noloshoodaba. Masar waxay ahayd dal la qabsaday oo dhawaan ku soo biirtay Islaamka. Al-Qibdina wuxuu weli ku taagnaa diintiisii, wuxuuna ka mid ahaa dad-weynahaasi dalkaasi la qabsaday. Cumar bin Caas wuxuu ahaa ninkii qabsaday Gobolkaasi. Wuxuuna ahaa Guddoomiyihii ugu horreeyey ee uu Islaamku u magacaabo. Waxaa Islaamka ka hor, dalka ka talin jiray Roomaan. Kuwaasoo shaabuu-gyadooda si joogto ah loogu garaaci jiray dhabarka dad-weynahaasi la gumeysanayo. Waxaana laga

yaabaa in Qibdigaasi ay weli ka sii muuqdaan nabarradii shaabuuggii Roomanku. Laakiin mawjaddaasi gobanimo ee uu Islaamku u keenay arliga oo idil ayaa Illowsiisay qibdigaasi shaabuuggii Roomanka, iyo dulligoodiiba. Waxayna ka dhigtay qof banii'aadmi ah oo xor ah lehna sharaf. Wuxuuna ka cadhoonayaa in uu ina boqor inankiisa garaaco, ka dib markii uu tartan dhex-maray. Waayo waa arrin kale. Cadhadii uu ka cadhooday meel kaga dhacidda sharafta inaankiisii waxay ku kalliftay inuu Masar ka ambabaxo oo uu tago Madiina. Ma uu raacin diyaarad, baabuur, markab iyo tareen-toona ee wuxuu fuulay awr dushii. Wuxuu sii socday bilo badan si uu ugu dacwoodo Boqorka oo keliya. Boqorkaasi xoreeyey maalintii uu qabsaday dalkiisa kana taagay calankii Islaamka. Kaasi oo baray sharafta aadamiga ee ay Illowsiyeen shaabuuggii Roomankii. Waa in aynu haddaba sidaasi u fahamnaa, garanaana qoto-dheerida mawjaddaasi gobanimada Islaamka. Arrintu kuma koobna uun in uu Cumar ahaa Caadil. Caadil-nimadiisana looma hanqal-taagi karo xilliyada oo dhan ee arrinta ka dambaysa waxa weeye in Caddaaladda Cumar – ee ka soo unkantay habka iyo nidaamka Islaamka – uu arliga ku sii daayey mawjaddaasi gobanimo oo dib ugu soo celisay sharaftii aadamiga sifadiisii aadaminimo. Heerkaasi sare weli aadamimadu dib umay



gaadhin. Taasi waa arrin dhab ah. Laakiin tubtaasi ballaadhan ee uu Islaamku u falay sharafta aadamiga, gobanimadiisa, xuquuqdiisa la xidhiidha madaxdiisa iyo Boqoradiisaba, wuxuu kaga tegay nolosha aadamiga raadad aan caad-saarnayn. Raadadkaasi qaar ka mid ahina waa kuwa maanta bani'aadmiga ku kallifya inay ku dhawaaqaan **« xuquuqda banii'aadmiga »**, Waxaana dhab ah in baaqaasi in aanu raacin jid dhab ah ee nolosha aadamiga. Waxaana dhab ah in ay aadamiga weli haysato Ihaanad, Dulli, Caddibaad iyo Xayiraad meel kasta oo arliga ka mid ah. Waxaana dhab ah in hababka qaarkood ay ka dhigayaan aadamiga wax ka hooseeya qalabka wax soo saarka, oo ay dilayaan goobanimada aadamiga, Sharaftiisa iyo astaamihiisa sarreeyaba si ay u helaan wax soo saar, dakhli iyo suuq sarreya. Waxaasi oo idil waa dhab. Laakiin weli tubtaasi jeexani weli way ku taagantahay garaadka aadamiga, iyo aragtideedaba. Mana aha mid loola yaabayo sidii loola yaabay maalintii ugu horreeyey ee uu Islaamku yimid. Maantana waxay tahay mid uga karti badan markii la eego garaadkeeda iyo aragtideedaba marka ay ka hadlayso doodda taagan Ilaahay idankii.

* * *

# UMMADD KELIYA

Wuxuu Islaamku tiiyo dadku isku urursanayo isbahaysi nasab, ama ay isku urursanayaan isbahaysi jinsiyadeed, ama ay isku urursanayaan isahaysi dal ama ay isku urursanayaan isbahaysi dano isku dhaw. Waxaasi oo idilna waa casabiyad aan waxba uga shan-iyo-toban ahayn aadamiga laftiisa. Waxaa weeyo uun walax aan naf lahayn oo soo dhex-galay sharaftii aadamiga maamuusan. Wuxuuna Islaamku dhawaaqay hadalkiisii kululaa ee ka hadlaayey arrintaasi kaasoo si cad u xaddidaayey cilaaqaadka dadka ka dhexeeya. Wuxuuna yidhi: – Ma aha midab iyo jinsiyadi-toona, mana aha nasab iyo dal-toona, mana aha masaalix iyo dano-toona ta isku keenaysa dadka kalana soocaysa. Wax weeye Caaqiidada. Waa cilaaqaadka ay la leeyihiin Rabbigooda xaddidaysa cilaaqaadka iyaga ka dhexeeya. Waayo cilaaqaadka ay Ilaahay la leeyihiin waa ta u keentay aadaminimadooda. Waana iyada ta caddaynaysaa suganaantooda adduun iyo aakhiraba. Neeftii uga timid ruuxa Ilaahay waa ta ka dhigtay dadka dad. Waana ta sharafta u yeeshay dadkani una sakhirtay waxa yaalla



samooyinka iyo arladaba. Gun-dhigga xaqiiqadaasi ayey dadku isku urursanayaan ama ay ku kala tegayaan. Mana aha isurusigaasi wax kale oo dibedda uga yimid xaqiiqada aadamiga. Isbahaysiga laysku urursanayaa waa caqiidada. Waayo caqiidadu waa astaamaha ruuxa dadka ka ugu sharafta badan. Haddii la waayo taasina ma jiro – isbahaysi iyo isurursi-toona, mana jiro jiritaan. Aadamigu waa in uu isku urursadaa astamihiisa ta ugu sharafta badan. Mana aha inuu isku urursado daaq iyo cunto, xad iyo degmo sida xoolaha oo kale. Arliga waxaa ka taagan uun laba xisbi oo keliya. Xisbiga Ilaahay iyo xisbiga shaydaanka. Xisbiga Ilaahay waa ka ku hoos nool calanka Ilaahay ee tunka ku qaaday tilmaamihiisii. Xibiga Shaydaankuna waa ka ku biiray millad kasta, koox kasta, shacbi kasta, jinsiyad kasta iyo ferdi kasta oo aan ku hoos noolayn calankii Ilaahay. Ummaduna waa koos dadka ka mid ah ee isku xidhaysa isbahaysiga caqiidada taasi oo ah jinsiyadeeda. Haddii kale ummaddi ma jirto. Waayo ma jirto isbahaysi isku ururiyey. Dhulka, jinsiyadda, afka, nasabka, danaha maadiga ah ee dhow-dhow, mid keliya oo ka mid ahi ma kafayso. Dhammaantood haddii laysku darana ma kafeeyaan inay sameeyaan ummadd ilaa ay isku xidho isku xidhnaanshaha caqiidadu. Isbayaysigu waa fikrad

hantiyaysa qalbiga iyo maskaxdaba. Waana aragti sharxaysa jiritaanka iyo nolosha oo ku xidhan Ilaahii ay neeftii ruuxiisu uu dadku, dad ku noqday. Kagana duwanaaday xoolaha iyo dugaagga. Is-urursigiisuna kagaga duwanaaday is-urursigooda. Kuna guuleystay sharaftii xagga eebbe uga timid. Ilaahayna wuxuu ku yidhi Muuminiinta ha joogaan dhul kaste'eh, xilli kasta, hana ahaadeen jinsiyad kasta iyo midbad kasta, hana ka tirsanaadeen qolo kasta iyo reer kasta, qarni kasta marka laga soo bilaabo Nebi Nuux – Ilaahay raalli ha ka noqdee ilaa Nebi Maxammed – *N.N.E.K.H.A* – iyo ilaa aakhiro sabanka:

**« Waa tani ummaddiinnu waana ummadd keliya, anna waxaan ahay rabbiigiinna ee i caabuda. »**

*Al-Anbiyaa : 92*

Wuxuuna Ilaahay dadka ku kala fadilay aasaaska caqiidada. Si kasta ha ahaato xidhiidhka nasabka ee ka dhexeeyaaye, iyo isbahaysiga jinsiyadda iyo dhukaba'eh.

Wuxuuna yidhi:

**« Ma heli doontid dad Ilaahay iyo maalinta aakhiraba rumeeyey oo jecel mid gooyey Ilaahay iyo Rasuulkiisiiba, xataa haday yihiin aabbayaashood ama Carrurtooda, ama walaaladood ama reerkooda, kuwaaasi ayaa qalbigooda lagu qoray iimaanka. Laguna xoojiyey ruux isaga ka yimid. Wuxuuna**



**gelin doonaa jannooyin ay hoos yaacayaan togag oo ay ku waari doonaan, Ilaahaybaa raalli ka noqday iyaguna raalli bay ka noqdeen. Kuwaasi waa xisbiga Ilaahay. Run-ahaantii xisbiga Ilaahay waa kuwa liibaanay. »**

*Al-Mujtaadala : 22*

Wuxuuna halka si inoo sameeyey sabab keliya oo lagu diriro – oo aanay jirin jid kale oo lagu diriraa. Kaasi oo ah jihaadka Ilaahay dartii. Wuxuuna u xadeeyey hadafka Muuminiinta iyo hadafka kuwa aan Muuminiinta ahayn si cad oo aan caad saarnayn.

**« Kuwa rumeeyey waxay u dagaallamayaan Ilaahay dartii – Kuwa gaaloobayna waxay u dagaallamayaan qawlaysato darteed la dagaallama awliyada shaydaanka, run-ahaantii gaashaan-buurta shaydaanku waa mid tabar-yar. »**

*Al-Nisaa : 76*

Waxay banii'aadmiga oo idil ku ahayd mid lala yaabo xilligaasi in laysku bahaysto caqiido. Oo aan laysku urursan dhul, jinsiyad, midab, tijaarad iyo wax kale oo ka mid ah waxyaalahaasi baabaaya. Waxayna Mad-habtaasi – ahayd mid aad loola yaabay maalintii uu Islaamku yimid laakiin waxaynu aragnaa aadaminimadii oo nuugeysa. Oo dad ay kala geddisantahay dalkooda, reerkooda, afkooda, midabkoodu, jinsiyaddoodu oo isku, urursanaya mad-hab

mad-hab. Waa dhab inayna isku urursanayn caqiido Ilaahay ah. Waxay isku urursanayaan dano dhaqaale ama mid bulsho. Waayo aadaminimadii ayaa hoosaysa. Danaha dhow-dhow ayaa ka sharaf badan xaqiiqada weyn. Laakiin si kastaba ha-ahaatee waxay qirsanyihiin in isbahaysigu noqon karo caqiido noqon karo fikrad, noqon karana isku-xidhnaansho macnawi ah. Kaasina waa hor-u-mar si kastaba ha-ahaatee. Waxaa hadhay uun inay sare u kacdo aadaminimadu. Gaadhana meel ka sharafan oo ka sarreysa. Una baxdo figtii sare iyadoo uu hoggaaminayo Islaamku mawjadda xigta, iyadoo haysata kaydkii fidrada ee horeeyey, gacanna siinayo kaydkani cusub.

* * *

# ANSHAX IYO ASLUUB

Laakiin markii uu Islaamku dadku iskugu soo ururiyey isbagaysiga caqiidada iyadana ka dhigay saldhiggii is-urursiga, iyo saldhiggii kala-guurka, kamuu dhigin necbaysiga caqiidada saldhigga dhaqdhaqaaqiisa. iyo saldhigga mucaamaladiisa. Kamanuu dhigin ta xukumaya cilaaqaadkaa uu la leeyahay dadka kale – ee aan ku biirin caqiidadiisa kuna soo darsamin gaashan-buurtiisa. Ilaahay wuxuu Muumiinta waajib kaga dhigay « Jihaadka » ma aha inay ku qasbaan dadka inay ku soo biiraan Islaamka. Ee waxaa weeye inay ka taagaan arliga habkiisa toosan, caddaaladda ah, ee qumman. Si ay dadku u doortaan caqiidada ay jecel-yihiin iyagoo ku hoos-nool habkaasi u koobaya mid muslin ah iyo mid aan ahaynba una simaya caddaalad buuxda leh.

**« Diintu qasab ma laha. Qummanaantii waa laga caddeeyey khaladkii, kii diida qawlaysatoda ee rumeeya Ilaahay, wuxuu qabsaday xadhig adag oo aan go'ayn. Ilaahayna waa kii wax-walba maqlaya wax-walbna og. »**

*Al-Baqra*

Dhulka uu ka talinayo habka Islaamku ee lagu xukumayo shariicada Islaamka waxaa loo aqoonsaday « Daarta Islaamka » ha ahaadeen dadka ku nooli qaar dhammaantood haysta caqiidadan ama ay qaar ka mid ahi haystaan caqiidado kale. Dhulka aanu ka talinayn habka Islaamuna ee aan lagu xukumayn shariicada Islaamku waxaa loo aqoonsaday « Daarta Dagaalka » wax kasta dadka ku nooli ha ahaadeen'eh. Cilaaqaadka ka dhexeeye « Daarta Islaamka » iyo « Daarta Dagaalka » lagama boodin, ee si kooban oo sugan ayaa loo habeeyey, tiiyo leh asluub, nadiifnimo iyo qummanaan. Daarta Islaamku, waa inay ama la yeelataa heshiis iyo ballan « Daarta Dagaalka », taas oo ah heshiiskaasi oo la raacayo iyo ballantaasi oo laoofinayo iyadoyna ku jirin khiyaamo iyo ballan-baajin toona, kunana jirin ballan ka bax iyo weerar kedis ah. Ilaa ay dhammaato muddadii ballantu ama ay jebiyaan dadka « Daarta Dagaalku ». Haddii uu jiro heshiis nabadeed – oo aan waqti go'an lahayn – sidaasi ayuunbay u ahaanaysaa mid nabaddaasi la dhowro. Waxaana la joojin karaa haddii laga baqdo khiyaamada Daarta Dagaalka. Markaasina si cad ayaa loogu dhawaaqayaa joojinta heshiiskaasi nabadeed. Haddii ay dagaal noqotona, wuxuu dagaalku leeyahay qawaaniin iyo xeerar u degsan. Haddii uu cadowgu usoo liico xagga



nabadda, oo ay nabad saxiixaan, bixiyaanna gibirka ama cashuurta, kana raalli noqdaan habka Islaamka, iyagoo u madax-bannaan doorashada caqiidadooda, taasi muslimiinta xaqbay ugu leeyihiin:

**« Waxaa dugaagga ugu shar-badan Ilaahay agtiisa, kuwa gaaloobay ee aan rumaynaynin. Kuwa aad uu ballan qaadday ee markasta ballankoodii burinaya ee aan alle ka cabsanaynin. Haddii aad kula kulantid dagaalka ula dhaqan si habboon si aad u firdhisid kuwa ka dambeeya, waaba intaasooy wax xasuustaane. Haddii aad ka baqatid dad khiyaamadoodna sidoo kale adiguna u buri. Runtii Ilaahay ma jecla khaa'imiinta. Yaanay u malaynin kuwa gaaloobay inay dheereeyeen, nama cajsi gelin karaan. Una diyaariya intii aad kari kartaan ee ah xoog iyo fardeed si aad u baqo-gelisaan cadowga Ilaahay iyo cadowgiinaba iyo qaar kale oo aan iyaga ahayn oo aydaan garanaynin Ilaahay uun garanayo. Wixii aad Ilaahay dartii u bixisaanna wuu idinka abaal-marin idinkoon laydin dulmin. Haddii ay xagga nabadda u soo liicaanna idinkuna usoo janjeedhsada, Ilaahayna aa, mina isagaa waxwalba maqlaya, wax-kastana og».**

*Al-Anfaal*: 55 – 61

Ilaahay wuxuu ku cel-celiyey oo uu adkeeyey in ballanka la oofiyo, iyadoon dheg loo dhigayn danaha

gaar-ahaaneed, ee ah maslaxadda iyo danta dawladda, si ayna u noqon mid loogu mar-marsoodo bur-burinta ballanka.

« Oofiya ballanka Ilaahay haddii aad ballan qaadaan, hana bur-burina dhaarta idinkoo hore ku adkaystay. Waxaanad Ilaahay ka dhigateen kafiil. Run-ahaantii Ilaahay waa og yahay waxaad falaysaan.

**« Oofiya ballanka Ilaahay haddii aad ballan qaadaan. hana bur-burina dhaarta idinkoo hore ku adkystay. Waxaanad Ilaahay ka dhigateen kafiil. Run-ahaantii Ilaahay waa og yahay waxaad falaysaan. Hana noqonina sidii naagtii furfurtay dunteeda iyadoo hore si xooggan loo dumay oo aad ballankiinii ka dhigtaan xeelad idin dhex-martay, Ummadina ay noqoto mid uga fara-badan ummad kale. Ilaahay halkaas wuu idinku eegayaa uun. Wuxuuna idiin kala caddayn Maalinta Qiyaamaha waxyaalaha aad ku kala geddisantihiin ».**

*Al-Naxl:* 91 – 92

Haddii ay dagaal tahaynna, taasi ninna sharafta laga qaadi-maayo. Lamana dilayo dhallaan, oday iyo naag-toona. Lamana gubayo beer, lamana dabargoynayo lo'. Lamana oggola aar-gudasho. Waxa keliya ee lala dagaalayaa kuwa hubka ee ka soo horjeeda Muslimiinta. Waana tani dardaarankii uu Abii-Bakar ku sii yidhi colkii usaama isagoo u sii jeeda inuu la soo dagaalo Room:

**« Ha samaynina khiyaamo, xad-gudub, hana noqonina basaasiin, hana aar-gudanina, hana dilina Ilmo-yar, oday-weyn, iyo naag-toona. Ha goynina hana gubina geed timir ah, hana jarina geed midho leh. Hana gowricina adhi iyo geel-toona idinkoo cunaya mooyaane. Waxaydun sii mari dad u dibed baxay cidlo, iska dhaafa una daaya naftooda waxay u dibed baxeen. Kuna socda magaca Ilaahay ».**

Ugama jeedo halkan inaan si dheer u sii guda-galo qawaaniinta iyo xeerarka u degsan mucaamalada ka dhaxaysa Daarta Islaamka iyo Daarta Dagaalka iyo Muslimiinta iyo dadka kale-toona. Waayo baarista koobani ma aha meeshii lagaga hadli lahaa. Waxaan rabaa uun in aan tilmaamo tubtaasi balladhan ee uu Islaamku arlada ka taagay si ay ugu macaamaloodaan goobaha kala-geddisani, iyadooyna hore u jirin xeerar caynkaasi oo kale ahi. Maalintii uu Islaamku soo degay waxa keliya ee ay ummaduhu ku mucaamaloodaan waxay ahayd xeerka seefta oo keliya. Ama xeerar kii roonow reerka-u-hadh. Ninkii xoogg leh wax-kastaa xalaalbay u ahayaayeen. Ka laga adkaadaana wax haba-yaraadee oo xuquuq ah oo uu leeyahay ma jirto. Tubtaasi Islaamka ee balladhani kama tegin kamanay tirtirmin. Waaqaca aadaminimada. Waayo wuxuu bilaabay aaduunku qarnigii todoba

iyo tobnaad ee Miilaadiga (Qarnigii kow iyo tobnaad ee hijriyada) inuu ka macaamaloodo gun-dhig xeer-kaasi ah. Wuxuuna qaaday tallaabooyin isxiga oo ah « Xeerka Dawladda ». Wuxuuna isku dayey inuu abuuro hay'ado Dawladeed oo laysku xukumo qarnigii sagaal iyo tobnaad. Hawlahaasi waxay soo mareen guul iyo guul-darraba ilaa iyo xilligan aynu joogno. Waxaana laga gaadhay go'anno waa-weyn xeerarka Dawladda. Sidaa awgeed habka uu Islaamku la yimid ma aha mid maanta loola yaabayo sidii maalintii ugu horeysay ee uu yimid. Waa dhab in aanay aadaminimadu weli sare ugu kicin heerkii akhlaaqada ay ka gaadhay kooxdii Muslinka ahayd marka la eego mucaamalada taagan. Waana dhab in hor-joogsiyo waa-weyni ka dhaceen casrigan aynu ku jirno xataa qawaaniinta dawliga ah ee aragtiyeed ee uu gaadhay xeerka qaanuunada caalamiga ah ee reer galbeedka. Waxaana la joojiyey qodobka cadda-ynta dagaalka, (Saxeexa Dagaalka.) iyo bur-burinta heshiisyada iyo tirtiridda ballan-qaadyada.

Wuxuuna arrinkii noqday mid aad uga foolxun xaaladdii dugaagga kaynaha ku jira. Waana dhab in danta ka dambaysa dagaalada iyo nabaduba ay weli yihiin faa'iida-doon, hantiraadin, dhac iyo suuq-raadin, aadna uga hooseeyaan heerka fikirka, caqiida-da, khayrka, caddaaladda, iyo nabadda uu u jeedo



jihaadka Islaamku. Intaasi oo idiliba waa dhab. Fikradda xidhiidhka caalamiga ah ee salka ku haya xeer laysla wada garanayo ayaa la gaadhay. Waxaana markii ugu horeysay inoo keenay Islaamka. Wuxuuna u dejiyey nolosha aadamiga habkaasi Ilaahiga ah ee qumman, sarreeyana. Markaas haddii marka kale aadaminimada loogu baaqo habkani, waxay taasi u tahay mid aan ku cusbayn, lala yaabayn, lana inkirayn. Waxay gundhigga akhlaaqdiisa sarreysaa yaab gelin doonta oo ay la cusboonta aadaminima-daasi hallowday ee ku dhex nooleed jaahiliyadda muddo go'an, laakiin asalkii jidkaas, iyo suuraddii-suba-toona oo ay inkiraan. Islaamkii ugu horreyentii ku tiirsanaa kaydka fidrada oo keliya markii uu taagayey mabaadiidiisa, una falayey jidkiisa, wuxuu marka soo socota ku tiirsanaan doonaa kaydkaasi. Wuxuuna Isla-mar-ahaantaa ku tiirsanaan doonaa waayo-aragnimada uu soo maray. Wuxuuna – Ilaahay idankii noqon mid karti-weyn u leh soo bilaabidda tallaabooyinkiisii mar kale – isagoo ka faa'iidaysanaya kaydkaasi.

* * *

# VIII

# UGU DAMBAYN

Hadalkani kooban, si faah-faahsan uma gudageli karno jidadkii ballaadhnaa ee uu Islaamku u falay nolosha aadamiga, taariikhideeda iyo waaqaceedaba. Kuwaasi oo aan Islaamka ka hor la aqoonin, lana dejin oo ay weli kaga sii hadhsanyihiin raadad iyo, astaamo aadamiga si kasta ha u laciifee, si kastana ha u leexdee, si kastana ha uga soo dullaamo figtii sare ee ay dadku sare u fuleen iyagoo ku hoos nool habkaasi Ilaahiga ah ee qumman. Tusaalooyinkaasi yar ee aynu taabannay waxay fikrad innaga siinaysaa tobannaanka raad ee uu dhigay habkaasi ka dib markii uu abuuray. Waxaana suurogal ah in lagaga dhaqmi meelaha kala gaddisan ee nolosha aadamiga ah muddadaasi kun iyo afar boqol oo sano ah.

* * *

Erayga kama dambaysta ah waa in lagu sheegaa dhammaadka baaristan kooban. Si ayna ugu jahawareerin kuwa Ilaahay ku baaqaya, kuna baaqaya habka Ilaahay, jirtaanka arrimahaasi saacidaya, oo ayna illoobaan u hub samaysiga qodxaha jidka iyo



hor-joogsiyadiisa. Erygaasi wuxuu ku saabsanyahay arrimaha ka soo horjeeda ee ku xadgudban jidkiisa. Aadaminimadu gebi-ahaanteed maanta aad ayey uga fogtahay Ilaahay. Boodhka dulsaaran fidraduna waa mid ka culus kana madow. Jaahiliyadihii hore waxay ahaayeen jaahiliyado leh aqoon-darro fududaan iyo bedowimo. Laakiin jaahiliyadda maantu waa jaahiliyad salka ku haysa aqoon, cuqdad iyo ciyaar-ciyaar. Hor-u-markii cilmiga sayniska laga gaadaay qarniyadii sideed iyo tobnaad iyo sagaal iyo tobnaad waxay noqdeen fidno jahawareer keentay, ka cararkii kinniisadda iyo Ilaahyada kinniisaddu oo ay ka gubanayeen ku hadalka magaceeda culimada fikirka iyo culimada wax soo saarkuba, taasoo ay ka diiqadoonayeen. Waxay taasi ahayd orod waalan oo baqocarareed oo aan waxba u kala aabbo dayeyn, wax Ilaahiya oo idilna u joogsanayn. Waa dhab in sayniska laf-ahaantiisu, laga bilaabo qarnigan aynu ku jirno inuu ku soo celiyey culimadii sayniska xagga Ilaah yé. Fidradii cidlada lagu dilayeyna waxay bilowday inay soo hafro-baxdoo una soo noqoto xaggii Ilaahay. Laakiin weli fidnadii weli way ogantahay wuxuuna qarnigani dhammaan intayna muuqan ifaafkii dhammays-tirna ee ay aadaminimadu kaga soo noqon lahayd dibed wareegaasi fog.

* * *

Heerka nolosha adduunyada, waxay ku fidday dareenka iyo jiritaanka aadamiga. Waxayna sidaas ugu fidday waxaa ugu wacan qalab raaxado iyo nolol sahildda ee uu inno keenay Ilbaxnimada cusubi. Waxayna dadkii dareemeen ballaadhnida iyo culayska noloshani ku leedahay waaqacooda, iyo dareenkoodaba. Sayniska, hiddaha, iyo dhaqankuba waxay ku soo kordhiyeen goobo hor leh dareenka iyo nolosha dadkaba. Haddii waxaasi oo idili ay kacaan tiiyoo salka ku haysaan garashada Ilaahay, astaamaha Ilaahnimada, astaamaha aadoonimada, iyo aasaaska xaqiiqada ah ee qotodadheer. Xaqiiqada ah inuu Ilaahay yahay ka dadka uga dhigay khaliif dhulkani.

Una sakhiray waxa ku jira, siiyeyna garaadka iyo hibada ku cawaaniya khilaafadan, una sahlaysa wanaagga nolosha oo idil. Waxaasi oo idilna sababta loo siiyey tahay si aakhiro lagula xisaabtamo. Wixii uu soo hor-marsaday noloshiisii adduunyada. Haddii intaasi oo idili kacdoo ku taagan gun-dhiggaasi saxa ah, waxay noqon lahaayeen goobahaasi cusub ee uu cilmigu u keenay, una keentay Ilbaxnimadu waqaca iyo dareeka nolosha, goobo ku soo biira goobaha iimaanka, dadkana usii badisa u dhowaanshaha Ilaahay, habkiisa qumman ee ah Islaamka. Laakiin waxaasi oo idili waxay kaceen iyagoo salka ku haya ka cararka kinniisadda qawlaysatada ah, iyo Ilaaheeda magaciisa lagu cadaadinayey dadka, sidaasi ayey u noqotay goob nolosha ku soo biirtay oo Ilaahay ka fog kana hor-joogta jidka loo mari lahaa, taasi oo loo baahanyahay inay ku darsadaan xisaabta kuwa Islaamka ugu baaqaya dadku. Waa dhab in ay aadaminimadu dhibaatootay oo ay ka daashay dhabar-saariddii Ilbaxnimadaasi maadiga ah, iyo ku dhex-jiridda tumashadeeda. Waana dhab in fasaadkii, xumaantii, cudaradii casabiga ah iyo kuwii nafsiguba, waalashadii cuduradii madaxa iyo jinsiguba intaas oo dhammiba ay cunayaan jidka Ilbaxnimadan dhibaataynayaana ummadaha iyo afraadaba qasabna ugu furayaan indhaha dadka xumaan iyo baaba. Laakiin aadaminimadu weli waxay ku dhex-jirtaa wareerkeedii xoolonimada ahaa, iyo sakhraanimadeedii waalida ahayd iyo jahowareerkoodii jaangow-racnaa. Qarnigan oo dhanna wuxuu dhammaan iyadoyna weli indhuhu aad u wada furmin, maskaxdana ayna weli ka maydhmin waalidii aadaminimaduna ka bogsan ama ayna ku fakirin inay ka bogsato wareerkan.

* * *

Waxay-ahaayeen jaahiliyadihii hore waxay u dhawaayeen bedowtinimada xilligaas, oo run-ahaantii si weyn u taabanaysay si kastaba arrinku ha-ahaadee.

Dadkuna waxay lahaayeen caadooyin, akhlaaqda reer- guuraa nimaduna – intabadan waxay xukumaysay dhaqanka dadka. Inkastoo dagaalka dhexmara dadka baaqa wata iyo dadka jaahiliyadda ay bedownimadaasi uu ahaa mid foolxun oo kulul haddana waxay ka dhigaysay mid cad oo diirka ka qaadan. Waxay fidradu ahayd mid dhow oo uga soo rooraysa ugana jawaabaysa meel dhow, iyo gadaasha canaadka iyo isla-weynaanta. Waxaana halkaasi ku kala caddaa gaalnimadii iyo iimaankii. Intaasi oo idili way ka fiicnayd jiicsanaanta, isku-dhexjiridda iyo dan-ka-gelid la'aantaba. Aadaminimada maantuna waxay ka cabanaysaa isku-dhexjiridda, dan-ka-gelid la'aan iyo fududaysi marka la eego caqiido kasta, ra'iyi kasta iyo hab kastaba. Iyadoo isla-mar-ahaantaa ka cabanaysa nifaaqa qalbiga khiyaamo iyo xumaan. Intaasi oo dhammi waa xannibaadyo hortaagan jidka dacwada Ilaahay, waana xannibaadyo innaga hortaagan habkii Ilaahay. Waxaa kaloo intaasi dheer inbadan oo ka geddisan oo noocyo kala geddisan ah. Waxaana lagama marmaan ah inaynaan yaraysan intaasi oo dhan si ayna u jahowareerin dadka Ilaahay wax ugu baaqayaa arrimaha saacidaya. ayna u suurogeli-waayin inay xoog isku kordhiyaan. Laakiin waa maxay korodhku. Waa korodh keliya, kordhinta cabsida Ilaahay. Waa iyadoo aad dhab-ahaan u



dareentid Ilaahay. Waa iyadoo si habboon aad Ilaahay ula kaashatid. Kuna kalsoonaatid ballankiisa go'an ee cad.

**« Waxaa nagu waajib ah guusha muuminiinta »**

*Al-Rum*: 47

Arrinka oo dhammina waa arrinka kooxdii muuminiinta ahayd ee gacanteeda saari lahayd gacanta Ilaahay. Kadibna jidka qaadi lahayd. Ballanqaad Ilaahay u ballanqaadayna waa ka dhacaya ee aanu wax kale dhacayn.

Raalinimada Ilaahayna waa hadafkeeda koowaad iyo hadafkeeda kama dambaysta ah. Kooxdaasina waa ta ku soconaysa sunnada Ilaahay sidii ay u xaqiijin lahayd habka Ilaahay, waana ta hurgufi boodhka jaahiliyadda fidrada. Waana ta tusaale u noqon qadarka Ilaahay si ay kor ugu qaado erayga Ilaahay gacantana ku dhigto xakamaha habkaasi.

**« Waxaa idinka horreyey sunnoyin. Bal arliga maroo eega waxay ku danbeeyeen kuwii beeniyey. Taasi waa mid dadka u cad hanuun iyo cibrana u ah kuwa alle ka cabsanaya. Ha is-hiifina hana murugoonina idinkaa ka sareeya. Haddii aad muuminiin tihiin. Haddii ay dhibi idinku dhacdana iyagaba mid taas oo kale ah ayaa ku dhacday maalinbana qola iska leh. Ilaahayna waa inuu ogaadaa kuwa rumeeyey kana dhex-doorto shuhado. Ilaahay-**

na ma jecla kuwa daalimiinta ah. Ilaahayna wuu koriyaa kuwa rumeeyey waanu baabiiyaa kuwa gaalada ah. ».

*Al-Cimran :* 137 – 141

* * *

# TUSMO


| | | |
|---|---|---|
| I · | Hab Banii'aadmi | 5 |
| II · | Hab Gaar Ah | 22 |
| III · | Hab Fudud | 39 |
| IV · | Hab Ku Soo Jidanaya | 56 |
| V · | Kaydka Fidrada | 67 |
| VI · | Kaydka Waayo-Aragnimada | 88 |
| VII · | Tallabooyin Sugan | 105 |
| a – | Banii'aadminimo Keliya | 106 |
| b – | Aadaminimo Sharfan | 109 |
| c – | Ummadd Keliya | 116 |
| d – | Anshax Iyo Asluub | 121 |
| VIII | Ugu Dambayn | 128 |


* * *

**International Islamic Federation of Student Organizations**

P. O. BOX 8631

SALIMIAH - KUWAIT